
# Sahankii Saxardiid iyo Saamayntii Saxarla



W.Q.
Mohamed Hussein
(Maxamedeyn)

June 2000
The Netherlands

***Dhammaan xuquuqda daabicidda iyo fidinta qisadan waxay u dhawrsan tahay qoraha,dib looma daabacan karo waxna lagama qaadan karo iyadoo aan fasax laga qaadan qoraha buugga.**

***Buuggan waxaa lagu daabacay dalka Holland***

**Cinwaanka qoraha:**
**Cronjestraat 29**
**1782 ED Den Helder**
**The Netherlands**
**Tel. 0223 619454**
**E-mail: maxamedeyn@hotmail.com**
**ISBN 90-805742-1-X**

**daabacaadda Kowaad**
**June 2000**
**The Netherlands**



## Mahadnaq

**Ilaah baa mahad leh oo hawsha qisadan ii fududeeyay,waxaan kaloo khayr u rajeynaya intii iigu dhiiraggelisay in aan sheekadan qoro gaar ahaan Dr. Cabdulqaadir Suufi Maxamed (Muriidi Golf) iyo Mohamed Baxsane oo gacan weyn iga siiyay xagga farsamada iyo Cabdulqaadir Wardheere oo iga caawiyay dhinaca sawirka.**

# Hibeyn

**Qisada buuggan waxaan u hibeeyay xaaskayga iyo carruurtayda qaaliga ah.**

# Hordhac

Qoyska waa saldhigga bulshada,haddii uu qoysku hagaago bulshaduna way hagaagi,bulshadu haddii ay hagaagtana waxaa la helaya dal dhisan iyo dad urursan.

Qisada ku urursan buuggan waxay koobaysa sida ay lagama maarmaan u tahay in labada is qabta ay isku kalsoonaadaan si daacad ahna isku qabaan iskuna noqdaan sidii far iyo faraati oo kale ama Ul iyo diirkeed.

Haddii ninka iyo naagta is qaba ay si dhab ahi isu jeclaadaan naftuna ay isu huraan waxaa la weynaya fikradda oranaysa:nin iyo naag is qaba colna ma'ahan nabadna ma'ahan.

Col waxaa ah labada is qabta oo aan si dhab ah isu jeclayn kala dan ah sirtana kala qarsada..nabadna waxaa ah labada is qabta ee isku danta ah dhibka iyo dheeftuna wadaaga.

Immisaa is qabtay oo laysku diray lana kala diray..immisaa ciil iyo caloolxumo lagu seexiyay..immisaa loo soo tebiyay warar been abuur ah si labada is qabta loo kala geeyo..immisaa loo diiday in ay farax ku noolaadaan ..immisaa lala damcay in bulshada lagu dhex xumeeyo.

Haseyeeshee haddii labada is qabta ay gacmaha is qabsadaan xiriirkooduna uu adag yahay waxay ka hortegi karaan cid alla ciddii isku dayda kala qaybintooda iyo kala fogayntooda.

Waxaan rajeynaya in qisadani ay ka mid noqoto qisooyinka lagu soo bandhigay afkeena hooyo oo daw u noqotay bulshadeena..waxaan kaloo rajeynaya in buuggani uu ka mid noqdo buugaagta waxtarka leh ee lagu baahiyay dalkeena gudihiisa iyo dibeddiisaba.

Ilaahay towfiiqda hana waafajiyo

Mohamed Hussein
(Maxamedeyn)

# Sahankii Saxardiid
# iyo
# Saamayntii Saxarla

## -1aad-

Saxardiid wuxuu ahaa wiil dhallinyaro ah oo aad u deggan,wuxuuna aad u jeclaa oo uu ku soo barbaaray la socodka dadka da'da ah si uu uga barto ugana kororsado waaya'aragnimadooda,aqoontooda iyo murtidooda.

Saxardiid lama mid ahayn dhallinyarada asaaggiisa ah ama la filka ah waayo kama uusan heli jirin waxyaabaha ay dhallinyaradaasi ka heli jireen sida:shaxda iyo sheekada..mana ahayn ruux ku caansan dheelid iyo dhoollatusad,waqtigiisuna kuma uusan lumin jirin cayaar iyo cawayn,wuxuuna ahaa qof markasta digtoon kana durugsan noocyada daroogada ah.

Saxardiid wuxuu ahaa wiil naxariis badan kuna caan baxay hab wanaagga la dhaqanka dadka..taasina waxa uu ku mutaystay:soo dhoweyntiisa,qalbi furnaantiisa,dhoollacaddayntiisa iyo deeqsi-nimadiisa.

Saxardiid ma lahayn qurux la tilmaami karo ama lacag buuran oo lagu jeclaan karo..haddana dabeecad wanaaggiisa ayaa waxa ay u soo jiidday in dad badani ay jeclaadaan.



Saxardiid isagoo weli arday ah qalinka iyo buuggana la saaxiib ah,maskaxdiisuna ay ku mashquulsan tahay aqoon kororsi iyo ku fikir aayatiin wacan, qorshehiisuna aanay ku jirin haasaawe hableed iyo googgaalaysi guureed,barnaamijkiisuna aanay ahayn gaabsi gabdheed iyo been u sheegid hableed ayaa soo damcay soona hunguriyaystay saddex hablood oo ay isku fil ahaayeen..labo ka mid ahi isku xaafad bay ahaayeen,midda saddexaadna sidaas ugama fogeyn halkii uu ku hooyanaayay waxayna rafiiq la ahayd walaashiisa oo la yiraahdo Saluugla.

Hablihii saddexda ahaa waxay mid kasta dhinaceeda ka gashay olole ay ku soo jiidanayso Saxardiid..isaguna wuxuu u arkaayay saaxiibo caadi ah.

Hablahaasi waxay Saxardiid ku eegi jireen indho jacayl ah oo wax tilmaamayeen waxay mid kasta doonaysay in iyada oo keliya uu Saxardiid la socdo..waxay mid kasta ku faraxsanayd in ay dhegaysato sheekadiisa..mid kasta waxay ku waraabin jirtay hadallo sarbeeb ah iyada oo ka baqaysay in haddii ay Saxardiid u bandhigto jacaylkeeda uu ku gacan saydhayo ama uu yeeli waayo dareenkeeda caadifeed.

Mid kasta waxay habeenkii ku fikirtaa ilaa uu waaga uga baryo sidii ay Saxardiid ugu sheegi lahayd jacaylkeeda,goortii iyo goobtii ay ugu sheegi lahayd iyo waliba sidii ay isaga dhigi lahayd in ay tahay tan ku habboon oo ku munaasab ah Saxardiid.

Inkastoo Saxardiid sheekadiisa dhammaan ay ku salaysnayd aqoon haddana wuxuu dareemay dhaqdhaqaaqa hablahaasi oo aan caadi ahayn,wuxuuna kari waayay xishood daraaddii in uu u caddeeyo in uusan diyaar u ahayn imminka iyo waqti dhowba la socod hableed iyo sheeko guureed.

Aamusnaanta Saxardiid waxay dhalisay in gabar kasta ay dhinaceeda

u malayso una qaadato in la jecel yahay lana guursanayo.

Saxardiid wuxuu si xoog leh u aaminsanaa in uu guurku yahay mas'uuliyad aad u ballaaran laguna degdegi karin jacaylkuna wuxuu u arkaayay in uusan ku dhisnaan karin dano gaar ahaaneed loona baahan yahay in uu labada dhinac ka yimaado.

Saxardiid wuxuu aad isaga ilaalinaayay in hablahaasi uu been u sheego mid kastana uu ku maaweeliyo:waan ku jeclahay waana ku guursanaya..markaana ay arrintu noqoto luggooyo iyo ballan kabbax..mana rumaysnayn fikradda ay dadka qaarkii rumaysnaayeen kaasoo sheegaysay:naago been baa lagu soo xero geliyaa runna waa lagu dhaqaa.

Loollankii habluhu wuxuu socdayba ayaa mid ka mid ah labadii ay isku xaafadda ahaayeen lana yiraahdo Suubban isa soo qurxisay waxayna soo aadday oo ay u soo muraadday Saxardiid iyadoo soo go'aansatay in ay shaaca ka qaadayso jacaylka ay u qabto Saxardiid.

Markii ay u soo dhowaatay oo ay aragtay isagoo fadhiya meel har ah neecaw fiicana ay dhacayso ayaa wadnaheedu bilaabay in uu si xoog leh u garaaco..intay hadli kari weyday ayaa Saxardiid ku yiri:maxaa ku helay abbaayo?..markaasay ugu jawaabtay iyada oo baqaysa:Saxardiidow..abbowow........

SU'AASHU WAXAY TAHAY:
MAXAY U SHEEGTAY?..MUXUUSE UGU JAWAABAY?



# -2aad-

Suubban oo ay garan weyday meel ay hadal ka bilawdo iyo sida ay u cabbirto dareenkeeda caadifeed ayaa waxa ay Saxardiid ku tiri iyada oo ay ka muuqato xishood iyo cabsi..Saxardiidow abbowow:waxaaan kaa codsan lahaa in aad talo iga siiso arrin aan la murugooday oo aan jawaab u waayay.

Saxardiid baa markaasi yiri:maxay tahay arrinta sidaa kuu caloolxumaysay oo aad u garan weyday jawaabteeda?

Suubban waxay ugu jawaabtay:wiil naga dhexaysay saaxiibtinimo caadi ah ayaa dibedda u aaday waxbarasho waxaana is dhaafsan jirnay waraaqo..haseyeeshee warqaddiisii ugu danbaysay ayuu igu yiri:waan ku jeclahay..waxaana kaa doonaya guur wuxuuna intaas raaciyay oo uu igu yiri:waxaad tahay ruux lala dhisan karo mustaqbal waxaana kaa rajeynaya in aad igu soo war celiso..jawaab wacan oo degdeg ahna i soo siiso.

Saxardiidow..wax aan sameeyo garan maayo..anigu ma jecli mana doonayo in aan ninkaas guursado oo aan la aqalgalo..si aan arrintaas ugu sheegana ma garanayo ee maxaa talo ah?

Saxardiid oo arrintaasi la yaabay ayuu Suubban ku yiri:waxaa la yiri Suubbaney:runta waa raaxo..micnaha haddii aad runta sheegto waxaad helaysaa raaxo nafsadeed..waxaa kaloo la yiri:run iyo ilkaba waa la caddeeyaa..anigu waxay ila tahay in haddii aad runta u sheegto uu qaadanayo maaddaama uu yahay qof wax bartay..waxaase ka sii xun in aad ka aamusto ama aad siiso jawaab maaweelis ah oo xaqiiqda ka fog..waxaadna ogaataa haddii aad u sheegto barnaamijkaaga iyo qorshahaaga waxa uu yahay in uu ku qanci doono..mana filayo in uu kaa soo hor baxo ama uu kaa caroodo.

Suubban iyadoo aan weli shaaca ka qaadin wixii ay u soo muraadday ayay Saxardiid ku tiri:habeen danbe haddii aad firaaqo tahay oo aadan mashquul ahayn waxaan jeclaan lahaa in aan is-aragno..haddii ay suuraggal tahay?

Saxardiid intuu yara qoslay ayuu ugu jawaabay:inkastoo aan mashquul ahay haddana waxba kama qabo in aan wada kulano oo aan sheekaysano maaddaama aynu nahay dad xaafadda wada deggan.

Suubban markii ay soo macasalaameysay Saxardiid ayay dib ugu laabatay aqalkeeda waxayna dib u xusuusatay hadalladii uu ku soo yiri Saxardiid iyo sida uu uga oggolaaday in ay wada kulmaan oo ay wada sheekaystaan.

Suubban waxa ay rumaysatay oo ay iska dhaadhicisay in Saxardiid uu wax la wado diyaarna u yahay in sheeko guud iyo mid gaar ahaaneedba ay ka wada sheekaysan karaan.

Suubban waxay markan soo qorshaysatay barnaamij ay Saxardiid ku arki lahayd labo goor toddobaadkiiba kaasoo ah in uu ugu celiyo casharada dugsiga laga soo siiyo..iyadoo ujeeddadeedu ahayd sidii ay waqti badan u arki lahayd Saxardiid dareenkeeda caadifeedna ugu bandhigi lahayd si fudud oo macaan.

Suubban iyada oo markani soo xiratay labbis kii hore ka duwan kana qurux badan ayay u timid Saxardiid.

Saxardiid iyo Suubban markii ay isa salaameen ayaa Suubban tiri:Saxardiidow waxaa dhibaato iga haysta casharada dugsiga layga soo siiyo sidaas daraadeed waxaan kaa doonaya adigoo raalli ah in aad garab i siiso oo aad igu celiso casharadaas.



Saxardiid oo waqtigiisu aad u yar yahay haddana wuxuu Suubban u oggolaaday in toddobaadkiiba uu hal maalin ugu celiyo casharada laga soo siiyo dugsiga.

Suubban oo ay ku guulaysatay rabitaankeedii ahaa in ay Saxardiid aragto hal maalin toddobaadkiiba si ay u meel mariso ujeeddadeeda oo ahayd in ay isku keliyaystaan dabadeedna ay u sheegto wixii ay ka doonaysay ayaa si farxad lehi ka muuqato ugu jawaabtay:abbowe..waad mahadsan tahay waxaana rajeynaya in aan ka faa'idaysto casharadaas aad igu celinaysid.

Suubban waxaysan ogeyn in ay jiraan hablo kale oo ku mashquulsan sidii ay ula saaxiibi lahaayeen Saxardiid waxayna rumaysatay in iyada mooyee aysan jirin hablo kale oo la saaxiibi kara Saxardiid.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SOCDAALKA AY SOO HAYAAN SAAFI IYO SAADO..SIDEE BAY UGA NABADGELI DOONTA SUUBBAN? SAFKA MIYAA LAGA SAARI DOONA,MISE WAY ISKU SUGI DOONTA?

# -3aad-

Suubban waxay Saxardiid ku ballamisay guriga habaryarteed si loogu fuliyo qorsheheedii ahaa in Saxardiid uu ugu celiyo casharada laga soo siiyo dugsiga,toddobaadkiina uu hal maalin u yimaado sidii ay ku heshiiyeen kuna ballameen.

Suubban marka ay Saxardiid guriga ku soo dhoweynayso waxay u soo dhoweysaa si farxad leh waxayna markasta soo xirataa labbiska ugu quruxda badan.

Saxardiid oo aan marna indhaha u raacin labbiska Suubban ayuu isku hawliya oo keliya sidii uu wax u bari lahaa Suubban..Saxardiid inta uu ku dhex jiro casharka ayuu marmar waxa uu Suubban weydiiyaa su'aalo ku saabsan casharka haseyeeshee wuxuu dhawr jeer arkay oo uu dareemay Suubban oo aan la soconba casharka,marka uu isku dayana in uu dib ugu soo celiyo casharka ayay naxdaa waxayna ugu jawaabtaa:iga raalli noqo waan yara maqnaayee.

Suubban waxay markasta ku soo tashataa in ay Saxardiid ku tiraahdo:waan ku jeclahay haddana waxay ka baqdaa in uu Saxardiid ku yiraahdo:saaxiib ayaan leeyahay ama wax kale oo ka duwan wixii ay rabtay.

Maalin maalmaha ka mid ah Saxardiidna kaga yimid Suubban guriga habaryarteed kaddib markuu u soo dhammeeyay casharkii soona nabadgelyeeyay ayaa Suubban waxa ay aalaabba u carartaa daaqadda si ay u sii eegto sii socodka Saxardiid.



Saxardiid intuusan sidaa uga sii fogaanin gurigii,Suubbana ay weli taagan tahay daaqadda ayaa indhaheedu qabtay Saxardiid oo la taagan Saafi.

Saxardiid iyo Saafi ma lahayn wax ballan ah balse waxay isku arkeen si lama filaan ah..gabadhii Suubban ahaydna waxay bilawday in ay isla hadasho oo ay is tiraahdo:Saxardiid iyo Saafi..ma ballan bay lahaayeen?..maxay u sheegi doonta?..xaggeese bay ku baratay Saxardiid?..ma laga yaabaa in ay ku tiraahdo waan ku jeclahay?

Alle maxaa i qaaday..labo bilood ku dhowaad buu Saxardiid wax i baraayay haddana uma sheegin in aan jeclahay..imminka waxaan ka baqayaa in gabadhaasi ay ballamiso Saxardiid dabadeedna ay isku keliyaystaan kaddibna ay ula timaado arrin haasaaweed,arrintayduna ay halkaasi ku dhammaato.

Laakiinse anigu sidaas ugama harayo Saafi iska daayoo toban kale haddii ay yimaadaan kama harayo Saxardiid oo aan mar kasta niyadda ku hayo kuna riyoodo in aan la aqalgalo.

Suubban intay is qaban weyday ayay u tagtay Saxardiid oo weli la taagan Saafi waxayna Saxardiid ku tiri iyadoo aan salaamin Saafi wejigeedana ka muuqdo caro sidii qof masayr ku jiro oo kale:Saxardiidow..habaryar baa ku doonaysay..markaasuu Saxardiid ku yiri:waa yahay waan kaa daba imaanaya.

Saafi oo aan dheg u dhigin una jixinjixin dhoollatuskii ay samaysay Suubban haddana waxa ay is weydiisay:waa sidee arrintu?..maxaa ku dhacay Suubban oo ay ii salaami weyday?..maxaase ka caraysiiyay?..maxay tahay barashada heerkan ah oo ka dhexeeya Saxardiid iyo Suubban,mise habaryarta ay sheegayso baa dan gaar ah ka leh Saxardiid?..miyaan loo qaadan karin sida ay Suubban ula hadashay Saxardiid waa sidii labo qofood wax ka dhexeeyo oo kale?

Saafi iyada oo dhakafaarsan isla markaana ay doonayso in ay ogaato xaqiiqdu waxa ay tahay ayay haddana iska dhigtay sidii qof caadi ah oo kale markaasay Saxardiid ku tiri:Saxardiidow aad baan kuu raadinaayay,waxaan kuu siday warqad adiga kuugu socotay ee iga guddoon.

Saxardiid markuu Saafi ka guddoomay warqaddii ayuu uga mahad celiyay kaddibna wuu nabadgelyeeyay dabadeedna wuxuu u dhaqaaqay gurigii looga yeeray.

IS WEYDIINTU WAXA AY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN SUUBBAN AY MUNAASABADAN UGU SHEEGTO SAXARDIID IN AY JECESHAHAY,MISE WAABA RUNOO HABARYARTEED BAA U YEERTAY KADDIBNA U SHEEGI DOONTA IN SUUBBAN AY GUUR KA RABTO SAXARDIID,MISE ARRIN KALE AYAA LOOGU YEERAY?..MAXAASE KU QORAN WARQADDII AY SAAFI U DHIIBTAY SAXARDIID?



# -4aad-

Saxardiid intuusan eegin warqaddii ay u soo dhiibtay Saafi ayuu u laabtay gurigii looga yeeray kaddib markii uu soo nabadgelyeeyay Saafi..wuxuuna gurigii kula kulmay Suubban oo wejigeeda aad u beddelan sidii gabar dhibaato loo geystay oo kale,markaasuu Saxardiid weydiiyay oo uu ku yiri:

Maxaa kuugu dhacay..waa adigaa murugsanee?..Suubban intay is illowday bay Saxardiid kula hadashay si aan munaasab ahayn,waxayna iska dhigtay sidii gabar la jecel yahay oo kale,markaasay ku tiri:ma garaneysaa gabadhii aad la taagnayd waxa ay ahayd?

Saxardiid intuusan ka jawaabin su'aasha ayaa Suubban sii wadatay hadalkeeda waxayna tiri:gabadhaasi waxay markasta isku daydaa in ay gacanta ku dhigto ragga oo dhan umana kala soocna ragga..kii saaxiib leh iyo kii aan lahayn..ku xaas ah iyo ku aan ahayn..waxaan kuu sheegi lahaa Saxardiidow in aad ka fogaato gabadhaas haddii kale sharaftaada ayay hoos u dhigeysaa.

Saxardiidow..anigu ma jecli in aad la hadasho hablaha noocaasoo kale ah..runtii anigu..............intaysan ku dhawaaqin hadalka intiisa kale ayaa Saxardiid yiri:

Abbaayo dhegayso..anigu waxaan halkan kuugu imid waqtigeyguna kuu soo lumiyay in aan wax ku baro,hadallada maalayacniga ahna innaga daa..gabadhaa Saafi waxay doonto ha ahaato,waa gabar xaafadda nala deggan,waxaana u garanaya sida aan kuu garanayo oo kale,waxay tahay iyo waxay doonayso iyada ayay u gaar tahay ee ii sheeg waxa ay habaryar iga doonayso?

Suubban kama ahayn dhab in Saxardiid ay u yeerayso habaryarteed,balse ujeeddadeedu waxay ahayd in ay ka soo kaxayso Saafi,waxayna Saxardiid ku tiri:

Habaryar kuma doonayn ee aniga ayaa ku doonayay..haddii aan ku oran lahaa:aniga ayaa ku doonaya waxaa dhici lahayd in Saafi ay wax kale u qaadato.

Saxardiid oo arrintaasi aad uga xumaaday ayuu Suubban ku yiri:waxay ahayd in aad runta iska sheegto maxaa yeelay waxa labo qofood ka dhexeeyo iyaga ayay u gaar tahay,bal ii sheeg waxa daran?

Suubban intaysan u sheegin waxa ay ugu yeertay Saxardiid ayaa habaryarteed u yeertay,markaasay Saxardiid ku tiri:iga raalli ahaw,habaryar baa ii yeeraysa,marka aad ii imaanaysid oo aad ii dhigeysid casharka ayaan kuu sheegaya Saxardiidna wuxuu ugu jawaabay waa yahayee nabadgelyo.

Saxardiid isagoo amakaagsan ayuu gurigiisa ku laabtay,wuxuuna durba u cararay qolka fadhiga si uu u aqriyo warqaddii ay Saafi u soo dhiibtay,markuu damcay in warqaddii uu jeebka kala soo baxo oo uu aqriyo ayaa qolkii soo wada galeen walaashiisa Saluugla oo la socoto Saado.

Saxardiid markuu soo wada dhoweeyay walaashiisa iyo Saado ayaa halkii la wada fariistay..dabadeedna waxaa la bilaabay in la sheekaysto.

Cabbaar kaddib ayaa Saxardiid fasax qaatay,hayeeshee intuusan dhaqaaqin ayaa Saado ku tiri:miyaad soo laaban Saxardiidow?..markaasuu ugu jawaabay:waan soo yara daahayaa ee wax daran miyaa jiray?..markaasay Saado ugu war celisay:iska daa caawa ayaan kula soo hadlaya.



SAXARDIID BERRITO WUXUU KA WAR SUGAYA SUUBBAN WIXII AY DOONAYSAY IN AY U SHEEGTO..MUXUU KA YEELI DOONA SAXARDIID KADDIB MARKUU AQRIYO WARQADDII SAAFI?..MAXAYSE SAADO DAMACSAN TAHAY IN AY U SHEEGTO SAXARDIID MARKA AY CAAWA LA SOO HADASHO?

# -5aad-

Saxardiid intuusan isku diyaarin in uu seexdo ayuu kala furay warqaddii ay u soo dhiibtay Saafi si uu u akhriyo,waxaana ku qornaa waxyaabahan soo socda:Salaan dabadeed waxaan Saxardiidow jeclaan lahayn,aniga iyo walaalkay inaad naga aqbashaan,adiga iyo walaashaa Saluugla in aad nala qadaysaan jimcaha soo socda si aan u sheekaysano labadeena reerna ay isku bartaan una noqdaan labo reer oo iska warqaba iskuna xiran.

Saxardiid markii uu warqaddii dhammeeyay,ayuu u dhaqaaqay sariirta,hayeeshee intuusan gam'in ayaa soo dhacay teleefon,isla markiiba waxaa teleefonkii ku carartay Saluugla oo u dhoweyd teleefonka..waxayna noqotay Saado oo doonaysay Saxardiid.

Markii ay isa salaameen Saado iyo Saxardiid waxay Saado ka codsatay Saxardiid haddii ay suuraggal tahay in ay guriga ugu timaado kana caawiyo casharada laga soo siiyo dugsiga.

Saxardiid intuusan jawaab siinin Saado,ayaa walaashiisa oo ag fadhiday lana socotay mowduuca Saado madaxa u ruxday iyadoo ujeedday in uu Saxardiid oggolaado waxa ay doonayso Saado..Saxardiidna isagoo ixtiraamaya walaashiisa ayuu Saado ku yiri:waa yahay..haseyeeshee dib ayaan kaaga soo sheegi doona waqtiga iyo maalinta aan kaa caawinayo casharka..isla markii uu dhigay teleefonka ayaa walaashiisa waxa ay durba bilawday in ay faallo ka bixiso Saado,iyadoo leh:Saado waa gabar fiican oo aad u deggan,lamana mid aha hablaha kale,waa gabar dadaal badan dabeecad fiicana leh.

Saxardiid kama uusan dhiiban wax ra'yi ah hadalkaas,wuxuuse walaashiisa ku yiri:inkastoo waqtigaygu yar yahay haddana waan ku dadaali doonaa in aan waqti siiyo..waadna ogtahay in bisha danbe aan



bilaabayo shaqo,Saxardiid wuxuu intaas raaciyay oo uu walaashiisa u sheegay in Saafi iyo walaalkeed ay nagu martiqaadeen qado jimcaha nagu soo aaddan ee sidee baad u aragtaa?

Saluugla oo aan marna doonayn in si fudud loo soo galo nolosha Saxardiid,raallina aysan ka ahayn hablaha doonaya in ay xiriir la samaystaan Saxardiid oo aan ka ahayn Saado ayay haddana doonayn in ay ku samayso faraggelin toos ah arrimaha Saxardiid ama ay dareensiiso in uu fuliyo waxay raalli ka tahay.

Iyadoo ay sidaas tahay ayaa Saluugla ku tiri Saxardiid:Saafi waxaad ka codsataa in ay dib noogu dhigto martiqaadkeeda maxaa yeelay jimcahan waxaa nala qadaynaysa Saado oo aan horay ugu sheegay..Saxardiidna wuu ku raacay codsiga walaashiisa wuxuuna doorbiday in uu Saafi la hadlo oo uu ku yiraahdo jimcaha danbe innooga dhig martiqaadka jimcahan waanu yara mashquulsanahayee.

Saxardiid wuxuu u kicitimay xaggaas iyo Suubban si uu ugu celiyo casharkeeda, laakiinse markan casharka ka sokow,wuxuu Saxardiid ka dhawraya Suubban wixii ay ugu yeertay

Saxardiid markuu casharkii dhammeeyay Suubbana aan juuq oran oo aysan ka hadlin wixii ay ugu yeertay ayaa Saxardiid yiri:dorraad waa adigii ii yeeray anigoo la taagnaa Saafi,markaan kuu imidna,habaryartaa baa kuu yeertay,dabadeedna waxaad igu tiri:marka aad casharka igu celinaysid ayaan kuu sheegaya..wax dhibaato ah miyaa jira Suubbaney?

Suubban waxay ugu jawaabtay iyadoo ay markani weydiinayso su'aalo toos ah..maya ee waxaan ku weydiin lahaa oo keliya in aad leedahay saaxiib gabar ah iyo in kale?..haddii aadan lahayn,ma laga yaabaa in aad samaysato?..maxaadse jeceshahay in ay lahaato gabadha aad la saaxiibi doonto?

Saxardiid intuu yara qoslay ayuu Suubban ku yiri si kaftan ah:waa su'aalo aad u muhiimsan loona baahan yahay,laakiinse waxaan ku weydiiyay:haddii aan sheego sifooyinka aan doonayo adiguna aadan lahayn ka waranba?..Suubban waxay ugu jawaabtay iyadoo dhoolabiraynaysa haddii aan lahaado sifooyinka aad doonayso iyaduna ka hadalba?

Saxardiid wuu is yara qabtay,maxaa yeelay wuxuu ka baqay in kaftanka noocaasoo kale ah ay halkaas ka sii fogaato..isla markiiba wuxuu u soo laabtay casharka iyo ballanka danbe,isagoo aan u sheegin in bil kaddib uu bilaabayo shaqo,cashar siintuna uu joojinayo,hayeeshee Suubban waxay aad ugu faraxday kaftanka noocaasoo kale ah waxayna raalli ka ahayd in ay halkaa ka sii socoto..waxay kaloo ku tiri:haddii ay kuu timaado gabar aad garaneyso markaana ay kuu soo bandhigto jacaylkeeda maxaad ku oran lahayd?

Sida ay muuqato Suubban waxa ay markan doonaysaa in barnaamijkeedii ay muddada dheer qarinaysay u soo bandhigto si caddaan ah,inkastoo aysan weli ka helin Saxardiid u janjeerid dhinaceeda ah.

Suubban inkastoo aysan daaha ka qaadin jacaylka ay u qabto Saxardiid kuna oran si toos ah,waan ku jeclahay haddana waxay go'aansatay in hadalladaa kaftanka ahi ay ku sii waddo ilaa uu Saxardiid ka fahmayo ujeeddadeeda.

Saxardiid,isagoo aan ka jawaabin su'aashii kale oo ay Suubban weydiisay ayaa waxa uu dareemay waxa soo socda wuxuuna markaasi yiri:mowduucan dib noogu dhigoo ee waa inoo casharka danbe iyo adigoo si fiican u soo barta casharka.



Suubban waxay u qaadatay markii uu Saxardiid ku yiri:mowduucan dib noogu dhig,in xilliyada soo socda laga hadli doono..markaasay tiri iyadoo faraxsan:waad mahadsan tahay,si fiican ayaan u soo aqrin doona casharka.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SAXARDIID MARKA UU U SHEEGO SUUBBAN IN UU SHAQO BILAABAYO..MAXAY KU DHAQAAQI DOONTA?..MA LAGA YAABAA IN SAXARDIID UU SI DHAQSI AH CASHAR UGU BILAABO SAADO?..MAXAYSE DAMACSAN TAHAY SAAFI OO AY QORSHAYNAYSAA?

# -6aad-

Saado oo si qurux badan isku soo hagaajisay ayay timid gurigii Saxardiid,waxaana halkaasi si wacan ugu soo dhoweysay Saluugla oo aad ugu faraxday imaanshaheeda.

Markii qadadii la gaaray,hal miisna ay wada fariisteen:Saado,Saxardiid iyo Saluugla ayaa hadallo kaftan ahi ka bilawday Miiskii,ugu horreyntiina waxaa hadalkii qaadatay Saluugla oo tiri:Saxardiidow..waxay fiicnaan lahayd in afar casho toddobaadkiiba aad casharka ugu celiso Saado..iyadoo markaasi doonaysay in Saxardiid iyo Saado ay aad isu soo dhowaadaan..Saado oo iyaduna meesha ka hadashay waxay tiri:anigu waxaanba jeclaan lahaa in ay noqoto maalin kasta si aan u kordhiyo waxbarashadayda.

Saxardiid oo yara dhoollcaddaynaya ayaa yiri:taasi ma xuma,hayeeshee duruufta ayaan ii saamaxayn..misna waxaan jeclaan lahaa in aan kuu sheego Saaday:in bisha soo socota aan bilaabayo shaqo,lagana yaabo in aan shaqeeyo labada gelin.. marka........intuusan hadalkii dhammayn ayaa Saluugla la soo boodday oo tiri:haa waa run Saado..laakiinse adigu si kastaba ha ahaatee waqti laguu waayi maayo.

Saado oo ka naxday shaqada Saxardiid siiba markuu yiri:waxaa laga yaabaa in aan waqti badan siiyo shaqada,waxay durba maskaxda ku qabatay:hadduu Saxardiid shaqo bilaabo malaha wuu ku mashquuli doona,aragtidiisuna way yaraan doonta .

Saado iyadoo weli fikir ku maqan ayaa Saxardiid ku yiri:xaggee baad ka fikireysaa Saado?..markaasay tiri:ma'aan maqnaynee,waxaan ku weydiiyay:xaggee baad shaqada ka bilaabaysaa?



Saxardiid oo si taxadar leh ugu jawaabaya ayuu ku yiri:waxaan ka bilaabaya hay'ad samofal ah oo xarunteedu tahay Muqdishow,haseyeeshee waxaan casharka kuugu celin doona labo maalin toddobaadkiiba waxaana kuu bilaabaya toddobaadka danbe.

Siday noqotaba Saxardiid ha u mashquulee haddana waxay Saado ku faraxsanayd la kulanka ay la kulmeyso Saxardiid labo maalin toddobaadkiiba,iyadoo markaasi u malayso in Saxardiid uusan cid kale xiriir la lahayn..Saxardiidna uma laha dhaqan in uu dadka ugu sheekeeyo waxa uu dad kale u qabanayo.

Saxardiid wuxuu soo aaday Suubban isaga oo markan soo qorshaystay in uu Suubban u sheego shaqadiisa,cashar siintuna uu joojinayo.

Saxardiid markii uu casharkii u dhammeeyay Suubban..isla markiiba wuxuu ku yiri:waxaan jeclahay in aan kuu sheego in aan helay shaqo,waxaana bilaabaya bisha danbe,sidaas daraadeed iskuma wadi karo shaqadaas iyo cashar siinta..waxaana kuu rajeynaya waxbarasho wanaagsan.

Suubban oo arrintaas ku noqotay mid lama filaan ah kana fajacisay ayay Saxardiid ku tiri:waayo..haddii aad shaqo heshay miyaadan casharka ii wadi karin?..maxayse tahay shaqada sidaa u ballaaran oo kuu diidaysa in aad garab i siiso?..haddii ay dhib kuugu tahay imaanshaha aad ii imaanaysid,aniga ayaa guriga kuugu imaanaya.

Waxaan kuu sheegaya Saxardiidow in aan aad uga faa'idaystay casharada aad igu celiso,sidaas daraadeed waxaan kaa codsanaya in aadan iga joojin.

Inkastoo Saxardiid uu soo go'aansaday in uu Suubban ka joojiyo cashar siinta haddana dib ayuu u liqay go'aankiisa kaddib markuu arkay Suubban oo aad ugu oomman in laga caawiyo casharka

dugsiga..wuxuuna ku yiri:waa yahayee waxaan kuu wadaya oo keliya 3da bilood ee ka hartay sannad dugsiyeedka kuna raalli noqo.

Suubban waxayba doonaysay in Saxardiid uu oggolaado in ay guriga ugu tagto si ay markaasi fursad ugu hesho in ay reerka dhex gasho oo ay ku barato.

Haseyeeshee Saxardiid wuxuu arrintaasi ka doortay in habkiisii hore ee uu wax ku baraayay Suubban uu ku wado isaga oo ka baqaayay in haddii uu gurigiisa wax ku baro uu halkaasi ka dhasho tuhun iyo isku dhac.

Saxardiid iyo walaashiisa Saluugla waxay u dhaqaaqeen dhinacaas iyo gurigii Saafi si ay uga qaybgalaan martiqaadkii loo fidiyay..waxaana si diiran u soo dhoweysay Saafi oo aad ugu faraxday oggolaanshaha ay Saxardiid iyo Saluugla ku oggolaadeen martiqaadka loo fidiyay.

Markii lays wada bartay hal meelna la wada fariistay ayaa taariikh iyo waayo waayo la bilaabay in laga sheekaysto haseyeeshee Saluugla oo aad isku dhawraysay kuna faraxsanayn jawiga martiqaadka oo heer sare ahaa si wanaagsana loo soo agaasimay ayay ka baqaysay in Saafi ay si fudud u soo dhex gasho Saxardiid.

Markii la soo gabaggabeeyay martiqaadkii ayaa Saafi soo raacday Saxardiid iyo walaashiisa Saluugla si ay u sii dhoweyso..haseyeeshee intii ay waddada ku jireen xoogaa yarna ay ka soo dhaqaaqeen gurigii ayaa ka soo hor baxday Suubban oo u socotay gurigooda waxayna si wanaagsan u salaantay Saxardiid,waxayna ku tiri iyadoo aan garanayn Saxardiid walaashiisa iskana indhatiraysa Saafi:waa inoo berri iyo waqtigeenii caadiga ahaa wayna ka dhaqaaqday..Saafi oo cunaha is qabatay ciil daraadeed ayay macasalaamaysay Saxardiid iyo Saluugla waxayna ku tiri:habeen danbe toddobada fiidnimo ayaan idin imaanaya.



HABEENKA AY IMAAN DOONTO SAAFI WAXAA GURIGA LAGULA BALLANSAN YAHAY SAADO OO WAX LOOGU AQRIN DOONO..SIDEE BUU MARKAASI JAWIGU NOQON DOONA? SUUBBAN OO MAR LABAAD ISKU ARAGTAY SAXARDIID IYO SAAFI MAXAY KU ORAN DOONTA MARKA UU SAXARDIID U YIMAADO?

# -7aad-

Saxardiid iyo walaashiisa Saluugla markii ay gurigoodii ku soo laabteen ayaa walaashiisa tiri Saxardiidow... gabadhii ku lahayd waa inoo berri tumay ahayd?

Saxardiid oo aad u neceb in arrimihiisa gaarka ah la soo faraggeliyo haddana isagoo dhawraya walaashiisa ayuu ku yiri:waa gabar aan ka caawiyo duruusta dugsiga laga soo siiyo.

Saluugla oo aysan ku faraxsanayn tallaabadaa uu qaaday Saxardiid ayay ku tiri:walaalow,iska ilaali hablaha,waayo waxay doonayaan in ay waqtiga ku seejiyaan.

Saxardiid oo markan si toos ah ugu jawaabaya walaashiisa ayuu ku yiri:iska daa waan garanaya dantayda..waxa aan ku dhaqaaqayna waa samofal oo aan intaas dhaafsiisnayn.

7dii fiidnimo markii la gaaray waxaa gurigii Saxardiid soo gashay Saafi..markii la soo dhoweeyayna waxaa loo dhaqaajiyay qolkii fadhiga,waxayna halkaasi ku aragtay Saxardiid oo la fadhiya Saado oo cashar siinaya.

Saafi oo aan ka helin muuqaalka meesha ayaa Saxardiid yiri:soo dhowow Saafi,wuxuuna is baray Saafi iyo Saado..waxaana markaasi khasab noqotay in casharkii la joojiyo lana bilaabo in la sheekaysto.

Saafi oo aan sheekadu u dhedhemin ayaa waxaa maskaxdeedu ku wareegaysay sidii ay u ogaan lahayd xiriirka ka dhexeeya Saxardiid iyo Saado,Saado qudheedu waxay doonaysay in ay ogaato waxa ay Saafi doonayso.



Arrintu si kastaba ha ahaatee Saafi waxay soo gaabisay booqashadeeda waxaana sii dhoweysay Saluugla Saadana waxay ku hartay gurigii si ay u muujiso oo ay iska dhigto in ay tahay sida qof guriga ka tirsan oo kale.

Saxardiid markuu Saado u dhammeeyay casharkii ayay bilawday in ay Saxardiid ku furto mowduuc guureed..haseyeeshee Saxardiid oo aan ku jirin mowduucaas ayuu ku yiri si kaftan ah:anigu waxaan guursanaya marka aan gaaro 40 sano.

Saado oo ka naxday kuna qancin jawaabtaa uu Saxardiid bixiyay haddana intaa kama sii qaadin,waxayna doorbidday in ay dib ugu soo laabato mowduuceedii waxbarashada.

Saxardiid oo markan aad ugu mashquulay shaqadiisa ayaan u suuraggelin in uu isku wado casharka uu siinayo Suubban,Saado iyo shaqadiisa,wuxuuna gaaray go'aan kama danbays ah oo uu labaduba ku wargelinayo in uu joojinayo waxbariddii uu u waday labadaasi hablood. Saxardiid intuusan Suubban aadin ayuu walaashiisa ku yiri:fadlan waxaad Saado u sheegtaa in aan u wadi karin hawshii waxbaridda ahayd ee aan u haayay,habeen danbena shir baan leeyahay,waxaana imaanaya waqti danbe shaqadayduna waxay noqotay laballaab..sidaas daraadeed casharadii aan ugu celin jiray Saado waan joojinayaa ee sidaa ugu sheeg.

Saluugla oo aad uga shakiday go'aankaa degdegga ah ee uu gaaray Saxardiid ayaa waxa ay maanka gelisay in Saxardiid uu u janjeero dhinaca Suubban,Saxardiidna uma kala duwana Suubban,Saafi iyo Saadaba.

Saxardiid wuxuu u dhaqaaqay gurigii uu wax ku baraayay Suubban,wuxuuna si caddaan ah ugu sheegay kaddib markii uu u dhammeeyay casharkii in uu halkaasi ku joojinayo waxbariddii isagoo

sabab uga dhigay waqtigiisa oo aad ciriiri u ah iyo sannad dugsiyeedkii oo gabaggabo ah.

Suubban oo aan u suuraggelin in ay Saxardiid ka dhaadhiciso in uu u yimaado xataa hal maalin labadii toddobaad ayay soo jeedisay in ay hal maalin u raacdo gurigiisa si ay isku barto reerkiisa,Saxardiidna kama uusan diidin haseyeeshee wuxuu ku yiri:aniga ayaa dib kaaga soo sheegi doona.

Saado markii loo sheegay in Saxardiid uu mashquulay cashar siintuna uu joojinayo kama nixin,maxaa yeelay ujeeddadeedu waxay ahayd in ay Saxardiid aragto wayna aragtaa maaddaama ay saaxiib yihiin Saluugla gurigana ay si caadi ah u tagto.

Saxardiid wuxuu noqday qof shaqadiisa si fiican u guta kuna soo caan baxa,hawl kasta hawshii loo dirana guul buu ka gaara,taasina waxay keentay in madax looga dhigo qayb muhiim ah oo Hay'adda ka mid ah.

Muddo markuu shaqaynaayay ayaa qayb u dhow qaybtii uu madaxa ka ahaa lagu soo qoray gabar indho qurux badan leh ah,qaab socod wanaagsana leh..markii ugu horreysayna wuxuu Saxardiid gabadhaasi ku arkay iyadoo fadhida qolka laga maamulo teleefonka Hay'adda,Saxardiidna halkaasi ayuu dan ka lahaa.

Saxardiid wuxuu gabadhaasi ku eegay indho naxariis leh wuuna ka dhaqaaqay isagoo aan la hadlin..gabadhii baa markaasi ku tiri wiilkii teleefonistaha ahaa:abbowow..wiilkan sidaa ii soo eegayay kumuu ahaa?..wiilkii baa yiri:sow ma garanaysid Saxardiid?..waa wiilka qaybtaas madax ka ah..waa wiil dabeecad fiican leh,inkastoo hablaha intooda badani ay shabaqiisu ku dhacaan.



SU'AASHU WAXAY TAHAY: SAXARDIID MA WUXUU DOONAYA IN UU GABADHAASI BARTO IYADOO AAN SHAQADUBA KU RAAGIN?..GABADHUNA MA WAXAY RAADIN DOONTA SABABTA UU SAXARDIID SIDAA UGU SOO EEGAY?

# -8aad-

Saddexdii hablood ee Suubban,Saafi iyo Saado oo ay olole ugu jireen sidii ay gacanta ugu dhigi lahaayeen Saxardiid ayaa waxa aad mooddaa in Saxardiid uu si lama filaan ahi wejigiisa uga muuqday dareen caadifeed,kaddib markuu indhaha ka qaadi waayay gabar cusub oo lagu soo qoray Hay'addii uu ka shaqaynaayay,waxayna maskaxdiisu ka dhammaan weyday muuqaalka gabadhaasi.

Saxardiid wuxuu ku soo laabtay daqiiqado kaddib qolkii laga maamulaayay teleefonka Hay'adda wuxuuna wiilkii teleefonistaha ahaa ku yiri:waa sidee arrintu gabar cusub baa naloo keenayee?..wiilkii intuu yara qoslay buu ku jawaabay:haa Saxardiidow..waa gabar qurux iyo qiime Allah u yeelay..waa gabar qunyar socod ah,quursina aan aqoon.

Saxardiid oo hadalkaasi u riyaaqay ayuu garan waayay wax uu ku jawaabo,wuxuuna markiiba u dhaqaaqay xafiis ku dheggan xafiiskiisa si uu u wargeliyo saaxiibkiisa arrin shaqadooda ku saabsan.

Saxardiid markuu galay xafiiskii wuxuu mar kale ku arkay gabadhii oo la fadhida gabar kale oo xoghayn ka ahayd xafiiska..markaasuu wada salaamay wixii meesha fadhiyay si ay naxariisi ku dheehan tahayna u eegay gabadhii,isagoo aan la dareemin hab u eegiddaas aan caadiga ahayn..haddii uu si fiican isha ku raaci lahaana wuxuu ka baqay in la yiraahdo:waa ku sidee Saxardiid..ma gabadha cusub baad durba la qabsatay?

Saxardiid oo maalmo ku mashquulay barashada gabadha cusub ayaa waxa uu go'aansaday in uu si toos ah isku baro si uu u ogaado barnaamijkeeda iyo qorsheheeda waxa uu yahay..gabadha qudheedu waxa ay doonaysay in ay si fiican u ogaato dhaqdhaqaaqa Saxardiid oo



xoogaa ay dareentay in uu dhinaceeda u soo janjeero,waxayna damacday in ay la hadasho inkastoo ay ka baqaysay in Saxardiid uu meel kale la haysto.

Caadi ahaan hablaha intooda badani kuma dhiirana in dareenkooda caadifeed ay u bandhigaan qofka ay ka helaan ama ay jecel yihiin iyagoo ka baqaaya in la yiraahdo heblaayo xishood daranaa!haseyeeshee gabadhani xishoodka ay xishoonayso ka sokow waxaa u sii dheeraa baqdin iyo shaki.

Gabadhii cusbayd waxay is barteen gabar uga soo horreysay shaqada lana yiraahdo Siman kana shaqaysa xafiis ka soo horjeeda xafiiska uu ka shaqeeyo Saxardiid..maalmo yar kaddibna waxay ula tagtay in lagala taliyo sidii ay dareenkeeda caadifeed ugu bandhigi lahayd Saxardiid.

Nasiib xumo gabadha cusubi uma lahayn aqoon durugsan gabadha ay taloda ugu tagtay mana ogeyn in gabadhaasi qudheeda ay ka heli jirtay Saxardiid..markaasaa lagu yiri iyadoo lagu jeesjeesayo:haddii aad talo doonayso dantaada ka raaco iskana daa in aad isku shuqliso wax aadan u jeedin isaguna kuu jeedin.

Gabadhii cusbayd oo aalaabba cabsi ku nool ahayd ayaa lagu sii kordhiyay shaki waxaana lagu bilaabay in wax laga sheego oo la xanto laguna yiraahdo:bal eega shalay bay timid markaasay ku leedahay:ila tali.. Saxardiid baan ka helayee..oo xaggee buu Saxardiid tani geynayaa?..ayaan daranaa oo miskiinsanaa.

Dadku qaar baan u muuqan wanaagga oo waxaadba mooddaa in ay u nool yihiin been iyo xumaan sheegid intaa waxaa sii dheer in hablaha qaarkood ay ka naxaan haddii laga hor guursado ama laga hor jeclaado..sidaas daraadeed waxay isku dayaan in ay carqaladeeyaan gabar guur u darban ama wax jeclaata.

Saxardiid oo taagan illinka laga soo galo hay'adda shaqadiisa ayaa soo gashay gabar ay aad isu yaqaanaan oo ka shaqaysa hay'ad kale oo xiriir la leh hay'addiisa waxayna isu salaamaan marka ay is-arkaan sidii labo qofood oo aan is-arag waqti badan oo kale.

Gabadhii cusbayd oo sheedda ka eegaysay sidii wanaagsanayd oo ay isu salaameen Saxardiid iyo gabadhii soo gashay hay'adda ayaa u carartay xafiiskeeda gudihiisa waxayna durba bilawday in ay is weydiiso:muxuu Saxardiid sidaa ugu soo dhoweeyay gabadhaas?..ma waxbaa ka dhexeeya,mise sidaas buu hablaha oo idil u soo dhoweeyaa?

Ma wiilkii teleefonistaha ahaa baa hadalkiisa run ah oo sheegaayay in habluhu ay ku ordaan Saxardiid,mise gabadhii igu jeesjeestay ee Siman oo ii arkaysay in aan caadi ahayn baaba Saxardiid dan ka leh,mise waan u tagaa oo u sheegaa inta ay goori goor tahay in aan ka helay?

Maku iraahdaa si caro ah:maxaad markasta ii soo eegtaa,mise waan u kaadiyaa ilaa uu ila soo hadlayo?..ma hubsadaa in uu saaxiib la yahay Siman,mise waxaan ogaadaa in uu saaxiib la yahay gabadhii uu sida fiican u salaamaayay?

Ma hadal baan ku tuuraa oo ku tijaabiyaa,mise waxaan si toos ah ku iraahdaa:sawirkaaga ma i siin kartaa?..ma warqad baan u qoraa oo arrintaasi ugu sheegaa,mise cid baan u diraa oo aan ka codsadaa in uu igu soo dhiibo sawirkiisa?



IS WEYDIINTU WAXAY TAHAY:

GABADHA SHAKIGA BADAN OO KU HAWLAN BARASHADA SAXARDIID..MA WAXAY NOQON DOONTA SAXARLA,MISE XEEB BAY KU DUL WAREEGAYSA SIDII HABLIHII XAAFADDA LA DEGGANAA SAXARDIID OO KALE?..MA LAGA YAABAA IN SAXARLA AY NOQOTO GABADHA UU SIDA FIICAN U SOO DHOWEEYO MARKA UU INDHAHA SAARO,MISE TU CUSUB BAA SOO BIXI DOONTA?

# -9aad-

Gabadhii cusbayd oo ay ku adkaatay furfuridda halxiraalihii ay is-hordhigtay ayaa waxay go'aansatay in aysan juuq u oran Saxardiid,kuna degdegin barashadiisa..iyadoo ka baqday in uu jac ku dhejiyo haddii ay la hadasho oo ay ku tiraahdo waan kaa helay.

Gabadhiise ay taloda ugu tagtay shaqadana uga soo horreysay lana oran jiray Siman waxa ay ka shakiday dhaqdhaqaaqa gabadha cusub waxayna is weydiisay:sow lagama yaabo in gabadhan shalay timid ay isku lifaaqdo oo ay la saaxiibto Saxardiid?..Walle intaysan taasi dhicin waa in aan Saxardiid la qabsadaa..oo aan la saaxiibaa..kolley sheekadeenu way isugu kaaya baxdaaye.

Siman waxa ay go'aansatay inta aanay tallaabadaas ku dhaqaaqin in marka hore ay ka naxsato oo ay dhawr maalmood ag marto xafiiska ay joogto gabadha cusub iyadoo Saxardiidna uu la socdo..si ay candhuufteeda dib u liqdo una malayso in Siman iyo Saxardiid ay saaxiibeen dib danbana u hawaysan Saxardiid.

Siman waxay ka dhabaysay in ay arrintaas ku dhaqaaqdo waxayna iyada iyo Saxardiid dhawr jeer ag mareen xafiiska gabadha cusub iyadoo uusan Saxardiidna ka warqabin qorshaha gabadhu oo ujeeddadeedu ahayd in marka hore ay gabadha cusub ka fogeyso khadka Saxardiid dabadeedna ay ku keliyaysato Saxardiid.

Gabadhii cusbayd mar kasta oo ay indhaha saarto Saxardiid oo la socda Siman cunaha ayaa laga qabtaa ciil dartii waxayna ku ducaysataa:Allahayow daa'imow..kalgacaylka aan u hayo Saxardiid yaa saxan ugu rida sariirtiisana u saara caweyskiina ku seexiya subaxdiina ku salaama saadaalna ugu sheega in la sugaayo.

Allahayow..iga qabo wixii igu jeesjeesayo oo jacayl been ahi jilayo.

Allahayow..iga qabo wixii ila maaggan xasarad iyo xaasidnimo.

Gabadha cusubi waxay iska dhigtay in iyada oo keliya ay dhab ka tahay jacaylka ay u qabto Saxardiid kuwa kalena aysan dhab ka ahayn sidii qof daalacda quluubta dadka kale.

Gabadha cusub waxay iska dhaadhicisay oo ay rumaysatay in Saxardiid uu ka helay waxna la wado.

Waxaa u muuqday in ay ka guulaysatay wixii u hanqal taagaayay Saxardiid.

Gabadhii cusbayd iyadoo ka naxsanayd waxa ay samaynaysay Siman ayay si lama filaan ah waxay daaqadda xafiiska ay joogto uga aragtay Saxardiid oo gees la taagan una sheekaynayo gabadhii uu sida fiican u soo dhoweynaayay markaasay is tiri:Walle tiiba tan baa ka daran ee inta aanan tiiraanyoonin tabar darana la taahin aan u tago Saxardiid kuna iraahdo:

Salaan dabadeed..

Tee baad la tegi lahayd Saxardiidow..Tu ku rabto oo kuugu tallaalan,mise Tu kaa durugsan oo aan taloba hayn turxaanteedana la ogeyn?

Gabadhii cusbayd inta aysan ku dhaqaaqin u tegidda Saxardiid ayaa loo soo tebiyey in Saxardiid iyo Siman ay saaxiibeen.

Gabadhii cusbayd intay murugootay maankeedina is dhaafay ayay boorsadeeda kala soo baxday qalin iyo warqad waxayna ku dhaqaaqday in ay warqad u qorto Saxardiid waxayna ku bilawday:

Salaan sarreysa oo samada kaaga timid kaddib:

Maalintii igu kaa horreysay oo aan muuqaalkaagu arko ayaan maskaxdayda ku gashaday..maalintaas ilaa maantana waxaan noqday sidii qof aan miyir lahayn oo kale..adiga mooyee in aan cid kale ii baxayn aragtidiisa.

Saxardiidow..abbowow..inkastoo aanan wada kulmin dareenkayguna aanan kuu sheegin ayaan maanta jeclahay in aan.........

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MAXAY U SHEEGI DOONTA OO AY WARQADDEEDA KU SOO GABAGGABAYN DOONTA?..M'A DHAB BUU NOQON DOONA WARKA LOO SOO GUDBIYAY OO SHEEGAYAY IN SAXARDIID UU LA SAAXIIBAY SIMAN?

# -10aad-

Gabadhii cusbayd intii aysan dhammaystirin warqaddii ay u qoreysay Saxardiid ayay is tiri:inta aanan marka hore dhammaystirin hadalka intiisa kale aan soo qaato wax aan cabbo si miyir lehna aan u qoro.

Markii ay xafiiskeeda ka soo baxday ayaa si lama filaan ah uga soo hor baxay Saxardiid wuxuuna ku salaamay:abbaayo ma nabad qabtaa?

Gabadhii oo aan filaynin ka soo hor baxaas ayaa ugu jawaabtay:waa nabad qabaa abbowe..Saxardiid oo hadalkiisa sii watay ayaa gabadhii ku yiri:waxaan jeclaan lahaa in aan ku barto haddii aad raalli ka tahay?

Waxba kama qabo ayay gabadhii ugu jawaabtay..Saxardiid baa markaas ku yiri:anigu waxaa lay yiraahda Saxardiid..Gabadhii oo in muddo ahba ku hawlanayd barashada Saxardiid ayaa si xishood leh ugu jawaabtay:aniguna Saxarla baa lay yiraahda.

Saxardiid oo aad uga heli jiray magaceeda iyo muunadeeda..qaabkeeda iyo qunyar socodkeeda..habkeeda iyo hannaankeeda..xishoodkeeda iyo xurmaynteeda ayaa ku yiri:qof kuu baahan inuu ku arko maku heli karaa?

Saxarla iyadoo faraxsan ayay ugu celisay..haddii uu yahay qofkii aan u baahnaa wuu i arki karaa wuuna ila kulmi karaa waxaanse jeclaan lahaa in aan ogaado qofka uu yahay?

Saxardiid oo aan doonayn inuu shaaca ka qaado qofkaasi ayaa ku yiri:inta aan la gaarin qofkaas kuu baahan waxaan doonaya in marka hore aan anigu ku arko iiguna timaadid haddii aad awooddo habeen danbe hotel Al-Curuba iyo Toddobada fiidnimo.

Saxarla waxay u qaadan weyday hadalkaas ka soo yeeray Saxardiid waxayna ugu jawaabtay iyadoo ay ka muuqato farax iyo rayrayn:waa yahay waxba kama qabo.

Kaddib markii lagu heshiiyay ballankii ayaa Saxarla garan weyday meel ay ka timid iyo meel ay u socoto ilaa ay markii danbe is-aragtay iyadoo dhex fadhida xafiiskeeda,waxayna gashay fikir..markaasay is weydiisay:sidee baan u oggolaaday ballankaas uu ii dhigay Saxardiid anigoon weligay oggolaan ballan wiil ii dhigo?..ma riyo baa waxa aan arkay,mise waa run?..ma Saxardiid buu ahaa wiilka ila ballamay,mise qof kaluu ahaa?..qofka ii baahan oo ii soo maray Saxardiid muxuu damacsan yahay,mise Saxardiid wuxuu doonaya in uu ogaado in aan saaxiib leeyahay iyo in kale?..ma warqaddayda baan iska qora si aan shakigaba uga baxo una caddeeyo in aan subax walba ku soo tooso Saxardiid,mise habeen danbe waxba innagama xigee waan u kaadiyaa ilaa laga gaarayo ballanka?

Hadduu igu yiraahdo marka aan kulano waan kaa helay waa sida aan laabta ku hayay niyadduna ay doonaysay..haddii uu ila yimaadana wiil baa kuu baahan isla goobtaas ayaan ku gacan sayraya una sheegaya in aan cidna doonayn oo aan u baahnayn..haddii uu igu yiraahdana kuwa aadan u baahnayn miyuu ku jiraa Saxardiid?

Waxaan markaasi ku leeyahay:anigoo shaqada ku cusbaa ayaan indhaha ku saaray..waxaanan illoobi karin sidii naxariista lahayd ee aad ii soo eegi jirtay..waqtigaas ilaa iyo iminkana waxaan sadrigayga ku sawirtay suuraddaada..subax walbana waxaan is-oran jiray:sidee baad u salaantaa?..ma subax wanaagsan baad ku tiraahdaa,mise sidee tahay Saxardiid baad ku salaantaa?

Saxarla iyadoo weli fikir ku maqan ayaa xafiiskeedii soo gashay Siman..waxaana dhexmaray hadalladan:

=Maxaa ku helay waa adigaa fikiraayee?

*Maxaad aragtay oo aad dareentay anigu caadi baan ahaye?

=Waxaan is-iri malaha gabadhii cishqi bay calfatay.

*Oo cishqigu ma fikir iyo wareer buu leeyahay?

=Haa..haddii aan waxba laguula wadin..oo aan laguula qaybsan jacaylkaaga.

*Ma khasab baa qofka wax jecel ama la jecel yahay in uu sheeg sheego ama la ogaado jacaylkiisa?

=Haa..haddii kale jacaylba ma'ahan.

*Jacaylku ma wax lagu faanaa,mise waa wax nolosha lama huraan u ah?

=Kolley anigu waxaan qabaa in labada is jeceli la ogaado jacaylkooda oo ay sheeg sheegaan..sida kayga oo kale.

*Jacaylkaagu ma cid walbaa og?

=Haa..si aan loo soo hunguriyaysan xabiibkayga.

*Ma xaafadda buu kula deggan yahay?

=Maxay tahay xaafadda aad sheegayso.. meel qura ayaanba ka wada shaqaynaaye.

Saxarla markii ay hadalkaasi maqashay waxaa ku abuurmay shaki hor leh waxayna is tiri:malaha jacaylka Saxardiid keligaa buu kuugu kooban yahay isaguna danba kaama laha.

Saxarla waxay isweydiisay:ma laga yaabaa in Saxardiid uu Saaxiib la yahay Siman?..haddii ay sidaas tahay muxuu igu ballamiyay hotel Al-Curuba?..ma wuxuu is leeyahay tijaabi oo ku ballami meel gurigooda ka fog si aad u ogaato in ay ku rabto iyo in kale,mise wax kale ayuu u jeedaa?

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN SAXARLA AY AADDO HOTELKA LAGU BALLAMIYAY SI AY U OGAATO QORSHAHA SAXARDIID,MISE WAY UGA BIXI DOONTA BALLANKA?

# -11aad-

Saxarla oo aanay weligeed cag dhigin hotel ama baar ayaa waxa ay ka fursan weyday in ay aaddo hotel Al-Curuba si ay u fuliso ballankii uu Saxardiid u dhigay iyadoo ay xiisaynaysay isla markaana ay rajeynaysay in ay si gooni ah u aragto Saxardiid.

Saxarla markii uu waaga u baryay ayay bilawday in ay isku diyaariso ballanka 7da fiidnimo..waxay gacmaheeda iyo lugaheeda ku qurxisay cilaan..timoheedina waxay u dhalaalisay sidii dahabka oo kale.

Saxarla oo aan sidaa uga weynayn labada hablood ee adeerkeed dhalay hal meelna ay ku wada noolaayeen ayaa inta badan waxay ka masayri jireen labbiska iyo dabeecad wanaagga ay leedahay Saxarla.

Labadaasi hablood oo la kala yiraahdo Cubtan iyo Cawrala waxay aad ula yaabeen sida ay isku qurxisay Saxarla markaasay ku yiraahdeen:Saxarlaayey..Calaacashii iyo cagahiiba waxaad marisay oo aad ku qurxisay cilaan wejigiina waxaad ku nuurisay huruud timohiina waxaad ku carfisay cuud sidii qof aroos ah ama malxiisad ah oo kale..Sidee bay wax u jiraan?

Saxarla waxay niyadda ka tiri:Alle yaa u sheega Cubtan iyo Cawrala in caawa aan u socdo aroos iyo wax la mid ah wax ka wanaagsan..Alle yaa wargeliya in haddii aan caawa nasiib leeyahay aan calfanayo ruuxii naftayda u raaxayn lahaa..haddii aanan calaf lahayna cishqigaygu wuxuu noqonaya mid keligay igu kooban sida ay ku dhacdayba caashiqiinta qaarkood.

Haseyeeshee..Saxarla waxay hablahaasi u sheegtay in ay aadayso gabar ay meel ka wada shaqeeyaan oo caawa la mehrinayo.

Saxardiid qudhiisu oo aad isku soo habeeyay ayaa ballankii uu la lahaa Saxarla ka soo hormaray toban daqiiqo si uu u soo dhoweeyo Saxarla oo ku cusub imaatinka hotel Al-Curuba.

Saxarla iyadoo laafyoonaysa..diraca,masarka,kabaha iyo boorsaduna ay isku midab yihiin ayay ka soo gashay illinka weyn ee laga soo galo hotelka iyadoo halkaasi diyaar ugu ahaa Saxardiid oo ku salaamay:sarriignimo iyo suubbanaan ayaad sidataa..subaxdii igu kaa horreysay ayaan ku saxiixay in aad sax tahay..niyad saafi ah oo aan saxar lahayn waxay ku leedahay:soo dhowow Saxarla..soo dhowow Saxarla.

Saxarla oo ay ka muuqato xishood iyo xaqdhawr..farxad iyo fayoobaan ayay ugu warcelisay:sina uma salluugsanayn in aad sacabo furan igu soo dhoweynaysid..saaka waabberigii ilaa saacaddan ayaan ku sugnaa sidii qof safar ah oo kale..markaan indhaha ku saaray ayaan sugtay in aan sax ahay..Saxarla kuu timidee sadrigaaga saaro.

Saxardiid iyo Saxarla intay yara ilko caddeeyeen ayay u dhaqaaqeen dabaqa kowaad ee hotelka halkaasoo ay ka muuqanaysay bilicda badda,neecaw fiicana laga helaayay.

Markii ay wada fariisteen Saxardiid iyo Saxarla..cashadii uu Saxardiid dalbayna la hor keenay ayaa dhexmartay sheekaysigan gaaban:

#Saxardiid:waxaan ka baqay in aadan imaan oo aan halkan ku cidloodo.

*Saxarla:anigu qudhaydu baqdinta caynkaas ah waan qabay..waxaana is weydiiyay:haddii aad Saxardiid weydo xaggee baad qabaneysa?..haddii aad guriga ku laabato waxaa lagu leeyahay:ma meherkii baa durba soo dhammaaday?..meel kaloo aan aadana garan maynin.

#Saxardiid:si kastaba ha noqotee waan kuu imaan lahaa xataa aan kuugu imaado anigoo gurguuranayo.

Saxarla oo raashinkii liqi weyday iyadoo ku baxsanayd aragtida Saxardiid ayaa Saxardiid yiri:maxaa ku helay abbaayo oo aad raashinka u cuni weyday?

*Saxarla:waan dhergay marba haddii aad ila joogto..waxaan ku weydiiyay abbowe:gabadha ka shaqaysa xafiiska idinka soo horjeeda ma waxbaa idinka dhexeeya?

#Saxardiid oo su'aashaa la yaabban ayuu ku yiri Saxarla:hablaha aan garanaayo oo ka shaqeeya hay'adda wax naga dhexeeyo oo gaar ah ma jirto oo aan ka ahayn shaqo..haseyeeshee waxaan rajeynaya in adiga aad ka duwanaato hablahaas.

*Saxarla waxay aad ugu faraxday hadalkaas uu Saxardiid sheegay waxayna tiri:ma garanayo wax aan ku iraahdo..waxaanse Allah ka baryayaa in aad ii noqoto wiil aan la saaxiibo kii ugu horreeyay uguna danbeeyay.

#Saxardiid:miyaadan wax kale rajeynayn oo aan ka ahayn saaxiib?

*Saxarla intay yara qososhay ayay tiri:saaxiib waxaan ka wadaa qof nolosha ila qaybsada Allahna ii calfiya ee ma wax kalaa jira abbowow?

#Saxardiid intuu gacantiisa midig saaray gacanteeda bidix una rogay dhinaca kale ayuu calaacasheeda ku arkay cilaan si qurux badan u marsan kuna sawiran wadno ay ku dhex qoran yihiin Saxarla iyo Saxardiid..markaasuu yiri:maxaa ka qurux badan innagoo si dhab ah ugu dhex jirno wadnahaas aad sawirtay.

*Saxarla:maxaa dhacay..miyaanan iminka ku wada dhex jirin?

#Saxardiid:si fiican waxaanse inoo guul ah innagoo..................intuusan Saxardiid hadalka dhammaystirin ayaa adeegihii hotelka dhegta ugu sheegay Saxardiid in waqtigii la xiri lahaa meesha laga cunteeyo ee hotelka la gaaray.

*Saxarla ayaa la soo booddday Allah waan daahay..Saxardiidow,sheekadu way ina qaadday ee ina keen.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MARKA AY SHAQADA SOO WADA GALAAN SAXARDIID IYO SAXARLA..SIDEE BUU JAWIGU NOQON DOONAA?..MA LAGA YAABAA IN SAXARLA AY SAMAYSO SIDII AY SAMAYN JIRTAY GABADHII AY TALODA UGU TAGTAY OO KALE..TAASOO KU JEESJEESI JIRTAY SAXARLA, MISE WAX KALOO CUSUB BAY LA IMAAN DOONTAA SAXARLA?

# -12aad-

Saxardiid wuxuu dib ugu laabtay gurigiisa kaddib markii uu sagootiyay Saxarla kuna hubsaday aqalkooda wuxuuna aad ugu faraxsanaa kulankii uu la yeeshay Saxarla..wuxuuna bilaabay in uu sariirta ku dul fikiro isagoo is weydiinayo:ma laga yaabaa in Saxarla ay ii noqoto gabadhii aan nolosha la qaybsan lahaa oo aan la aqalgeli lahaa,mise reerkooda ayaa is-hortaagi doona?..kolley anigu ka helay..wixii sifooyin oo wanaagsan ahina Allah wuu siiyay..Eebbe ha iga dhigo marwo daacad ii noqota.

Saxarla oo aan dheg u dhigin dhego ku hadalka Cubtan iyo Cawrala soo daahidda awgeed ayaa waxay durba u carartay qolkeeda waxayna bilawday in aysan gam'in oo ay sariirta iska saarnaato ilaa uu waaga uga baryay iyadoo ay dib u xusuusaneysay kulankii ay la kulantay Saxardiid waxayna is weydiisay:maxay noqon doonta ujeeddada Saxardiid..guur mise gaabsi?..ma anigaa u bandhiga oo ka codsada in aan si degdeg ah isku guursano,mise isagaan ka dhursuga?

Saxarla markii uu waaga u baryay ayay si wacan isku diyaarisay waxayna u labbisatay si qurux badan dabadeedna waxay u dhaqaaqday shaqadeeda iyadoo ay ka muuqdaan farxad iyo firfircooni.

Saxardiid iyo Saxarla waxay awoodi kari waayeen in jacaylkooda ay ku wadaan si qarsoodi ah..ilayn jacayl dhab ahi ma qarsoomee.

Muddo gaaban markuu socday jacaylka Saxardiid iyo Saxarla ayaa gabadhii Siman ahayd bilawday in ay qaaddo olole ballaaran oo ay ku ceebaynayso jacaylka Saxarla.

Haseyeeshee Saxardiid oo kalsooni buuxda siiyay Saxarla ugana digi jiray mar kasta oo uu la kulmo in ay ka digtoonaato diradiraalayaasha

aan dayi karin dadka isku duuban oo isku daacadda ah una darban had iyo jeer in ay kala diraan dad is jecel oo is doonaya.

Saxarla oo aad ugu dheggan talooyinkii uu siin jiray saaxiibkeeda Saxardiid ayaysan dheg u dhigin waxa ay ku hadlaysay Siman waxayna u qaadan jirtay in ay tahay gabar masayrsan oo ciilqabta oo kale.

Saxarla iyo Siman waxay ku wada kulmeen xaflad aroos ah oo ay dhiganaysay gabar saaxiibtooda ah oo ka shaqaysa isla hay'adda ay ka wada shaqeeyaan Saxardiid iyo Saxarla.

Saxarla waxay si toos ah u abbaartay Siman waxayna ku tiri:waxaan kuu sheegi lahaa in aad faraha ka qaaddo Saxardiid oo aadan damcin soona hunguriyaysan sheekadiisa iyo arrimihiisana aad faraha ka qaaddo.

Siman iyadoo weli jeesjeesaysa ayay ku tiri:sidee baan faraha uga qaadaa?..ma turjumaan baad u tahay?..maxaase keenay arrinta Saxardiid?..ma run baad u malaysay in Saxardiid uu ku jecel yahay?

Saxarla intay is qaban weyday ayay shaaca ka qaadday sidii qof kalsooni buuxda isku qaba oo kale waxayna Siman ku tiri:waa in aad ogaataa oo aad maanka gelisaa in Saxardiid uu yahay Saygayga taa ku seexo kuna soo toos.

Siman oo arrintaas ka fajacday lana noqotay arrin lama filaan ah ayay ugu jawaabtay:ilaa goormaa heerkaasi la gaaray?

Saxarla oo si kulul ugu jawaabaysa Siman waxay ku tiri:hawl adiga kuu taal ma'ahan..ogow ama ha ogaan Saxardiid kuma rabo kumana rabi doono..halkii ayayna uga dhaqaaqday.

Saxarla waxay is tirii:Walle..waxaan ku guulaystay in Siman aan meel saaro kuwa soo harayna sidaasoo kale ayaan safka uga saari doona.

Saxarla waxay durba u carartay Saxardiid waxayna ku tiri iyadoo ilmaynaysa:waxaan doonayaa xabiibkaygiiyow..in aad Siman u tagto oo aad meel saarto..su'aasheeda ma'aan fahmin sirteedina ma'aan garan..waa gabar qas iyo qalaanqal u socota.

Saxardiid wuxuu u ballan qaaday xabiibtiisa Saxarla in uu Siman u sheegayo in Saxardiid iyo Saxarla ay mataanoobeen.

Saxardiid oo inta badan ku ballami jiray Saxarla holtel Al-Curuba iyo meelo kale oo u dhow aqalka Saxarla ayuu markani weydiistay in ay guriga ugu timaado.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN SAXARLA AY KA AQBASHO SAXARDIID IN AY GURIGIISA UGU TAGTO? MAXAYSE KALA KULMI DOONTA SAXARDIID WALAASHIISA SALUUGLA OO WELI LA JECEL IN SAXARDIID UU LA SAAXIIBO SAADO?

# -13aad-

Saxarla waxay si aan leexleexasho lahayn u oggolaatay codsiga xabiibkeeda Saxardiid oo ahaa in ay guriga ugu tagto halkaana ay ku wada sheekaystaan..iyadoo aysan weydiin walaalihiisa iyo waaliddiintiisa sida ay u arki karaan imaanshaheeda.

Saxardiid oo xor u ahaa gurigiisa ayuu si wanaagsan ugu soo dhoweyn jiray Saxarla marka ay u timaado.

Markii ugu horreysay oo uu aqalka ku soo dhoweeyay ayuu u saaray hees macaan ah oo ay ku luqeeyaan Sahra Axmed iyo Dhabarlow..markii la soo gaaray baytka ah..hadduu beerku qaybsamo barbaan adi ku siin lahaa wadnahayga bidixduna waan kuu beddeli lahaa kaagana waan la bixi lahaa..

Saxardiid baa la soo booday markuu baytkaasi dhammaaday wuxuuna yiri:Walle haddii hal Qalbi ay labo qofood ku wada noolaan lahaayeen Saxardiid iyo Saxarla baa ku noolaan lahaa.

Saxarla oo hadalkaasi ku raaxaysatay ayay ku tiri Saxardiid:anigu waxaanba jeclaan lahaa in aan markasta kula joogo..oo aan dhinacaaga ahaado har iyo habeen..isla markaana aan noqono mataano isku si wax u arka isku sina u fikira.

Muddo gaaban markii ay socotay saaxiibtinimada Saxardiid iyo Saxarla ayaa weerar meelo badan lagaga soo qaaday iyagoo ujeeddadoodu ahayd kuwa weerarka soo qaaday in ay kala geeyaan labada isku mataanoobay ee Saxardiid iyo Saxarla.

Inta badan dadku waxaysan arki karin labo is jecel oo isku jeellan..labo isku daacad ah oo isku duuban..labo aan gaabsi iska rabin oo guur iska raba.

Saluugla waxay aad ula yaabtay Saxardiid oo guriga keenaya gabar aanay garanayn..inta ay is celin weyday ayay tiri:Saxardiidow gabadhan aadan na barin waa tuma?

Saxardiid oo iska jeclaa in wax waliba ay si qarsoodi ah ugu socdaan hadalkiisuna uu gaaban yahay ayuu walaashiisa Saluugla ku yiri:waa gabar aan meel ka wada shaqayno.....intaas ayuuna hadalkiisa ku soo xiray.

Saluugla oo aad uga shakiday waxa ka dhexeeya Saxardiid iyo gabadha ay aqalka ugu timaado ayay is tiri:Walle way caddahay in Saxardiid uu gabadhan ka helay dana uusan ka lahayn Saado iyo wixii la mid ahba.

Saxarla waxaa aad looga dareemay xaafaddeeda,waxayna ka fursan weyday in ay saaxiibadeeda u sheegto in ay jeceshahay wiil ay hal meel ka wada shaqeeyaan oo la yiraahdo Saxardiid.

Saxardiid qudhiisa waxaa laga ogaaday xaafadda uu deggan yahay kaddib markii la arkay isagoo dhawr jeer la socday Saxarla wuxuuna ka fursan waayay in uu u sheego saaxiibadiisa in uu la saaxiibay gabar ay hal meel ka wada shaqeeyaan oo la yiraahdo Saxarla.

Habeen habeenada ka mid ah ayaa gabar ay xaafadda wada degganaayeen Saxarla kula kulantay Saxardiid oo saaxiibkiisa la fadhiya xaruntii dhaqanka Faransiiska ee Muqdishow.. halkaasoo lagu barto luqadda Faransiiska,waxayna gabadhii ku tiri Saxardiid:abbowe..Saxardiid ma adigaa lagu yiraahda?..markaasuu Saxardiid yiri:haa ee maxaan kuu qabtaa?

Gabadhii baa markaas tiri:maya..waad mahadsan tahayee..gabar aan saaxiib nahay oo aan xaafadda wada degganahay baa ina wareerisay..waxay had iyo jeer afka ku haysaa Saxardiid baa sidaas ah..Saxardiid baa sidaas jecel iyo wax la mid ah.

Saxardiid saaxiibkii baa gabadhii ku yiri:oo adigu miyaadan weli wax jeclaan ama lagu jeclaan?..markaasay gabadhii tiri:waan la'ahay wax i jeclaada aniguna aan jeclaado..markaasuu wiilkii kaftan ahaan ku yiri:gabar furfuran baadba tahayee sidee baa laguu jeclaan waayay?..ka hadalba haddii aan habeen danbe halkan ku wada sheekaysano soona kaxaysato gabar kaloo saaxiibtaa ah si aan u noqono afar qofood?

Gabadhii oo aad ugu faraxday arrintaas ayaa tiri:waxba kama qabo hadduuba Saxardiid imaanayo..markaasuu wiilkii yiri:habeen danbe marka uu casharku dhammaado halkan isugu kaaya keen!

Saxardiid ayaa soo booday oo ku yiri saaxiibkiisa:anigu habeen danbe lay arki maayo..maxaa yeelay waxaan aadaya xaflad gaar ah oo loo fidiyay madaxda qaybaha ee hay'adda aan ka shaqeeyo.

Gabadhii iyadoo og in Saxardiid iyo Saxarla ay wada socdaan oo ay saaxiib yihiin ayay haddana damacsan tahay in ay qalalaaso abuurto iskuna daydo in ay Saxardiid kala wareegto Saxarla.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:XEELADDEE BAY ADEEGSAN DOONTAA GABADHAASI SI AY HAL MEEL ISUGU KEENTO IYADA IYO SAAXIIBTEED IYO SAXARDIID IYO SAAXIIBKIISA?

# -14aad-

Gabadhii ahayd saaxiibta Saxarla Saxardiidna kula kulantay xaruntii dhaqanka ee Faransiiska..waxay inta badan aadi jirtay hay'adda ay ka wada shaqeeyaan Saxardiid iyo Saxarla,waxayna aalaabba arki jirtay Saxardiid oo marba wiilal iyo gabdhaba salaamayaan oo la xiisaynayo..waxayna gabadhu ogeyd in Saxarla iyo Siman ay is khilaafsan yihiin.

Saxarla way ka warqabtay in Saxardiid uu aadayo xaflad..gabadhii saaxiibteed ahaydna waxay si lama filaan ah u ogaatay in Saxardiid uu aadayo xafladdaas.

Habeenkii xafladda ayaa gabadhii u tagtay Saxarla waxayna ku tiri:saaxiibtaydiiyay Saxarla..waxaan caawa arkay wax iga yaabiyay..Saxarla baa la soo booddday:oo maxaa kaa yaabiyay saaxiibey?..gabadhii baa tiri:waxaan arkay Saxardiid oo gacanta ku dheggan Siman waxayna ka soo baxayeen meel aan u malaynayo in ay xafladi ka jirtay.

Saxarla oo niyaddii ka xumaatay filan waana ku noqotay ayay ku soo dhacday taxi iyadoo aan caadi ahayn..waxay u dhaqaaqday aqalkii Saxardiid waxayna ag fariisatay aqalka hortiisa iyadoo aan hubin in Saxardiid uu aqalka ku jiro iyo in kale.

Saacad kaddib iyadoo fikir ku wareersan ayaa Saxardiid yimid wuxuuna arkay xabiibtiisa Saxarla oo si kale ah iskuna buuqsan..markaasuu ku yiri:maxaa ku helay macaane?..ma dhibaataa dhacday Rabbi ka maganee?..waa sidee arrintu?

Saxarla oo aad u caraysan ayaa waxa ay weydiisay Saxardiid halka uu ka yimid?..markaas buu Saxardiid ugu jawaabay xabiibtiisa:

Macaane..sow adigii ogaa in caawa aan aadayo xaflad..markaasay tiri:ma Siman baa kula socotay oo aad xafladda ka soo wada baxdeen?..intuu Saxardiid ka naxay hadalkaas ayuu garabka qabtay xabiibtiisa wuxuuna ku yiri:

Ma kula tahay in adigoo ku tallaalan qalbigayga aan qof kale la soconayo?..ma kula tahay in aan gacanta qabsanayo oo aan la laafyoonayo gabar aan Saxarla ahayn?..ma kula tahay in bilawga barashadeena aan belaayo abuurayo?..waxaan kuugu adkaynaya in aan gabarna gacanta qabsan xafladduna ka muuqan..ee waxaan kuu sheegaya in qofkii kuu soo weriyay warkaas uusan wanaag noo rabin ujeeddaduna ay tahay in uu waxyeelo u geesto jacaylkeena.

Saxarla oo ku qanacday hadalkii Saxardiid haddana markuu waaga µ baryay shaqadeedina ay caadi u aadday ayay durba u tagtay Saxardiid saaxiibkiisa oo qayb kale madax ka ahaa waxayna ka wareysatay in wax gabdho ahi ay ka soo qaybgaleen xafladdii xalay iyo in kale..wuxuuna wiilkii ugu jawaabay marka hore dad yar baaba la martiqaaday kumana jirin dadkaas hal gabar.

Saxarla halkii bay si fiican ugu qanacday waxayna aad uga fajacday fidnadii ay abuuri lahayd saaxiibteeda waxayna Saxarla is weydiisay:maxay tahay waxa ay doonaysay saaxiibtay?..ma iyadaa isku rabtay Saxardiid,mise waxayba doonayn in aniga iyo Saxardiid aan wada socono?..maxaan sameeyaa?..ma gooyaa oo maka aamusaa,mise waan u sheegaa beenta ay sheegtay?

Saxarla oo lagu ogaa hadal yari iyo dhib la'aan ayay goosatay in ay saaxiibteeda u tagto kuna tiraahdo:abbaayo..waxaan jeclaan lahaa adigoo raalli ah in aan faraha iska qaadno..wixii aad igu samaysayna waan kaa cafiyay.

Gabadhii waxay isla goobtii ku qiratay in ay been sheegtay waxayna codsatay in la cafiyo..Saxarlana way ka oggolaatay wayna cafisay.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay wada kulmeen ayay isla soo qaadeen sheekadii dhacday..markaasuu Saxardiid yiri:arrintaa wax ka daran ayaad la kulmaysa xabiibtaydiiyay..dheg ha u dhigin waxa ay walaaqayaan kuwa aan doonayn wadajirkeena,iguna kalsoonow sida aan kuugu kalsoonahay oo kale.

Waxaa laga yaabaa in lay soo tebiyo been abuur lagaa sameeyay adiguna laguu soo tebiyo been abuur layga sameeyay sida ay u dhacdayba..marka iska ilaali si fiicana u eeg:kee baa wanaag kula raba?..kee baana xumaan kula damacsan?

Saxardiid iyo Saxarla wuxuu jacaylkoodii noqday mid maalinba maalinta ka sii danbaysa sii xoogaysta ilaa uu gaaray heer ah in ay habeen walba is-arkaan.

Saxarla waxay go'aansatay in ay Saxardiid u sheegto oo ay u bandhigto in ay guur ka doonayso.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SIDEE BAY SAXARLA UGU BANDHIGI DOONTA SAXARDIID ARRINTA GUURKOODA?..MA WAXAY KU ORAN DOONTA REERKAY IGA SOO DOONO,MISE WAX KALE AYAY U SHEEGI DOONTA?..SIDEE BUU SAXARDIID U ARKI DOONA GUURKA SAXARLA?..MA WUXUU ORAN DOONAA XOOGAA AAN U KAADINO,MISE DURBA WUU KA YEELI DOONA?

# -15aad-

Saxarla waxay aad uga shakiday wiil ay qaraabo yihiin oo la yiraahdo Jaamac inta badana uu yimaado guriga Saxarla xiriir adagna la samaystay Saxarla hooyadeed..hablihii Cubtan iyo Cawralana waxay bilaabeen in ay wax ka ogaadaan bixitaanka Saxarla oo aad u batay iyagoo su'aalo gaar ah weydiinayo Saxarla.

Haseyeeshee Saxarla oo sida Saxardiid oo kale ah waxay nebcayd in arrimaheeda gaarka ah la soo faraggeliyo,waxayna hablihii ku oran jirtay:xilliga aan imaanayo iyo meesha aan ka imaanayo aniga ayay ii gaar tahay..halka aan u socdo iyo waxa aan u socdana waa wax aniga i khuseeya waxaan idin oran lahaa aniguba idin ma weydiiyee halka aad habeen walba u kicitintaan..maxaad isku shuqlisaan arrimahayga?

Cubtan iyo Cawrala waxay Saxarla ku yiraahdeen:Jaamac baa innagu kaa wareeriyay oo habeenkii uu yimaadaba ku weydiiya.

Saxarla oo aan doonayn in ruux bini'aadam ahi uu nolosheeda soo galo aan ka ahayn Saxardiid ayay hablihii ku tiri:Jaamac hadduu guriga imaanayo wuu ku soo dhowaan karaa,hadduu wax kale u socdana isagay jirtaa.

Jaamac wuxuu laballaabay imaatinkiisa guriga wuxuuna bilaabay in marka uu imaanayo guriga uu gacanta wax ku soo qabsado..hooyo iyo labada gabdhoodna uu wax u keeno..markuu Saxarla guriga ka waayana wuxuu Cubtan iyo Cawrala ku oran jiray:haddiyadan Saxarla baa iska leh yaan laga taaban marka ay soo laabato hala siiyo salaan fiicana ha layga gaarsiiyo.

Jaamac wuxuu ku duulaayay falsafadda ah:haddii aad gabar doonaysid marka hore reerka ayaa layska dhisaa..waana lays jeclaysiiyaa..Qaraabonimana waa la muujiyaa dabadeedna waxaa la bandhiga in aad gabar ka doonaysid.

Qaamuuska Jaamac kuma qornayn jacayl iyo ka helid..xurmayn bini'aadmi iyo in marka hore gabadha la weydiiyo in ay diyaar u tahay guur iyo in kale?..in ay Jaamac doonayso iyo in kale?

Jaamac wuxuusan ka war hayn in qalbiga Saxarla uu meel kale ku xiran yahay oo uu ku tallaalan yahay..Cubtan iyo Cawralana waxaynan ka war qabin in Saxarla ay dunida ka doorotay ruuxii la qaybsan lahaa nolosheeda.

Habeen habeenada ka mid ah Saxarlana ka timid xabiibkeeda Saxardiid ayay durba u carartay qolkeeda si ay u fikirto meelna u dhigto habkii ay Saxardiid ugu sheegi lahayd mowduuceeda guurka.

Saxarla iyadoo fikiraysa ayaa Cubtan u soo gashay,waxayna ku tiri:Jaamac baa qolka fadhiga ku sugan wuxuuna doonaya in uu ku arko kuna salaamo.

Saxarla oo fikir mustaqbaleed ku jirtay ayna doonayn in ay cid la hadasho ayay Cubtan ku tiri:u sheeg Jaamac in madaxa layga hayo waan hurdayaa ee nabadgelyo.

Jaamac markii loo sheegay in Saxarla ay yara daalan tahay madaxana laga hayo durba wuu is taagay wuxuuna reerkii ku yiri:Aspirin baan u keenaya Saxarla waan soo laabanaya isagoo ulajeeday in uu reerka isaga dhigo qof waxtar leh.

Jaamac markuu tegay Aspirinkiina keenay ayaa Saxarla qolkeedii ka soo baxday..waxaana durba lagu yiri:Jaamac baa Aspirin kuu

keenay..haseyeeshee Saxarla oo aan doonayn in ay Aspirinka qaadato ayay hablihii iyo hooyadeedba ku tiri:waan ladanahay iminka uma baahni Aspirin.

Saxarla waxaa loo bilaabay in lagu hor ammaano Jaamac laguna yiraahdo:waa qof fiican oo aad reerka u jecel.

Saxarla oo aysan dan ka lahayn waxa lagu ammaanayo Jaamac iyo waxa uu keenaayaba ayay durba beddeshay mowduucii laga hadlayay waxayna u laabatay qolkeeda.

Saxarla waxaa ku dhashay cabsi waxayna ka baqday in Jaamac uu hooyo ku yiraahdo Saxarla ayaan doonaya halkaana ay isaga hor yimaadaan Saxarla iyo hooyadeed.

Saxardiid wuxuu qabay in guurkii lagu degdego uu aayatiinkiisu noqonaayo mid lagu guuldaraysta..wuxuuna si xoog leh uga soo horjeeday guurka ku salaysan qabyaaladda iyo ganacsiga kaasoo ay dad badani ka dhigteen mabda' iyo nolol.

Saxarla oo in muddo ahba ku noolayd welwel "iyadoo ka baqaysay in Saxardiid uu gacanteeda ka baxo kaddib markii weerar badan lagu soo qaaday iyo waxa uu la imaan karo Jaamac oo gurigooda aad ugu soo batay" ayay go'aansatay in ay Saxardiid u bandhigto oo ay ku soo qaaddo arrin ku saabsan guurkooda kulankooda ugu horreeya ee ay kulmi doonaan.

Saxardiid iyo Saxarla oo ku dhex sheekaysanaaya maktabad ku dhextaala hay'addooda ayaa Saxardiid yiri:noloshaydiiyay..marka aad ila joogtó waxaan dareemayaa:riyaaqid iyo roonaansho..nasasho iyo nimco..waxaan noqdaa sidii qof nolol cusub u bilawday oo kale..waxaan ku leeyahay:weligaa ha caroon..ciilna ha qabin..ha welwelin hana walbahaarin Saxardiid kaama harayo kaamana fogaanayo.

Saxarla ayaa iyaduna tiri:anigu waxaan ku xusuustaa har iyo habeen..xataa marmar waxaan gaaraa heer ah in aan qof kasta ugu yeero Saxardiid..anigu waxaan kuu hayaa kalgacal iyo kalsooni..haseyeeshee waxaan dareemaya cabsi oo waxaan u malaynaya in lay kaa qaadanayo.

Saxardiid oo si caadifiyadi ku dheehan tahay u hadlaya ayuu Saxarla ku yiri:ha baqin hana shakiyin..anigu inta ay nafta igu jirto qof aan adigu ahayn la socon maayo lana seexan maayo.

Saxarla oo fikir ku baxday ayay is tiri:ma u sheegtaa oo ma u bandhigtaa mowduucii guurka,mise dib ayaad u dhigtaa?.. ma iraahdaa...........................

Saxarla iyadoo weli fikir ku maqan ayaa Saxardiid ku yiri:macaantaydiiyay maxaa dhacay,miyaadan ila joogin?

Saxarla baa markaasi tiri:si fiican baa kula joogaa ee waxaan xoogaa u baxay arrin aan doonayay in aan kaala hadlo.

Saxardiid oo aan Saxarla la doonayn in ay murugooto ayuu ku yiri:wax walba oo noloshaada ku saabsan ama noloshayda ku saabsan ama nolosheena ku saabsan waad ii sheegi kartaa..waana yeelaya xataa haddii aan noloshayda ku waayayo.

Saxarla oo faraxsan ayay tiri:waxaan jeclaan lahaa xabiibkaygiiyow in aad iga aqbasho..in aan aqal galno oo aan qoys noqono Ubadna aan Eebbe weydiisano.

Saxardiid isagoo dhawraya taloda xabiibtiisa Saxarla ayuu ku yiri:ma xuma..haseyeeshee miyaanay fiicnayn noloshaydiiyay in xoogaa aan dib u dhigno ilaa uu dhaqaalaheenu kobcayo si fiicana uga xoroobayno faraggelin lagu yeelan karo guurkeena?

Saxarla oo u muuqda keliya jacaylka Saxardiid ayay tiri:maal iyo maskax Allah wuu nagu deeqay jacaylkeena dhabta ah iyo isku kalsoonideena ayaa waxa ay ka hortegi karaan wax kasta wixii faraggelin ku yeelan kara wada socodkeena..niyad haddii aynu hayno iimaankeenuna uu sugan yahay kaasaa maal iyo maskaxba ah.

Anigu waan ku jeclahay oo waan kuu jeellanahay..maskax iyo maalna adigaa ii ahee iga aqbal macaanow codsigayga.

Saxardiid qudhiisu oo u jeellan Saxarla guurkeedana diyaar u ahaa haddana wuxuu rabay in xoogaa dib loo dhigo..laakiinse si uusan waxba u gaarin niyadda xabiibtiisa Saxarla ayuu ku yiri:waan aqbalay wixii aad soo jeedisay iyo wax kastoo aad soo jeedinayso.

Saxarla intay is celin weyday ayay ku boodday Saxardiid farax awgeed..iyadoo dhabtiisa ku jiifta oo ilmaynaysa ayay tiri:maalintii aan indhaha ku saaray ilaa maanta ayaan ku fikiraayay goormaad Saxardiid ku tiraahdaa:goormaynu aqalgeli?..waxaana iminka ka soo wareegatay labo sano..waxaan noqday sidii qof shalay ku bartay oo kale isla markaana kaa helay kuna fikiray in aad ila aqalgasho..maanta ayaana kuu soo bandhigay..labadii sano waxay ila noqotay labo maalmood.

Saxarla oo weli ku barkan dhabtii Saxardiid ayay tiri:Allah waxaan ka baryayaa sida uu jacaylkeena uga dhigay mid dhab ah guurkeenina uga dhigo Ubad khayr qabana nagu deeqo.

Saxardiid oo garan waayay wax uu yiraahdo ayuu illintii ka tiray Saxarla..markaasuu ku yiri:anigu maalintii aan ku arkay ayaad i deeqday waxaana kuu ilaalinaayay sidii qof aan ku leeyahay oo kale..waxaana markasta ku fikiri jiray:goormaad la hadashaa oo aad ballansataa?..goormaad kalgacaylkaaga u gudbisaa?..labada is rabta macaantaydiiyay kalama maarmi karaan.

Saxarla oo aabbeheed ka shaqaysta Yurub ayay ku fikirtay in mowduuceeda guurka u bandhigto adeerkeeda oo ah shaqaale dawladeed.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN ADEERKA SAXARLA UU KU GACAN SAYRO CODSIGEEDA?..AMA UU KU KHASBO IN AY RAACDO CAADOOYINKA LAYSKU GUURSADO OO INTA BADAN UU SAXARDIID KA SOO HORJEEDO?

# -16aad-

Saxarla waxay soo ballamisay adeerkeed iyadoo ay siisay warbixin ku saabsan Saxardiid iyo barnaamijkeeda guurka ah..wuxuuna adeerkii ku yiri:waxba kama qabo in aan Saxardiid arko iyo rabitaankaaga guureed.

Saxardiid iyo Saxarla oo wada socda ayay adeerkii ugu tageen gurigiisa wuxuuna u soo dhoweeyay si fiican oo sharaf leh..dabadeedna wuxuu faallo ka bixiyay oo uu xusay Saxardiid aabbihiisa wuxuuna sheegay in uu yahay nin caan ah oo aad loo yaqaano.

Adeerkii Saxarla wuxuu intaa raaciyay in ay sharaf tahay in labada is doonayso laysugu oggolaado..haseyeeshee waxaan idin weydiiyay:kẹe baa iska leh taloda guurka?

Saxardiid iyo Saxarla waxay mar qura la soo boodeen Aniga......

Adeerkii intuu muusooday faraxna muujiyay ayuu yiri:waan idin duceeyay aabbana anigaa gaarsiinaya.

Saxardiid iyo Saxarla waxaa u baryay waa cusub..waxaa laysugu oggolaaday in ay aqalgalaan..waxayna markaa kaddib u dhaqaaqeen iyagoo faraxsan aqalkii Saxarla si ay u wargeliyaan Saxarla hooyadeed in ay guur iska doonayaan.

Hooyadii oo aad ugu faraxday inanteeda oo la timid inan ay raalli ka tahay ayay ku tiri:waan idin duceeyay,waxaana idinku dardaarmaya hooyooyin in aydan dheg u dhigin kuwa dhaqanka ka dhigtay nin iyo naag is qaba colna ma'ahan nabadna ma'ahan.

Col waxaa ah hooyooyin dadka aan is rabin oo aan isku kalsoonayn..nabadna waxaa ah dadka is raba oo is jecel sidiina oo

kale..waxaana Allah idinkaga baryayaa in guurkiina uu ka dhigo mid ku nagaada farax iyo naxariis.

Saxardiid iyo Saxarla iyagoo dhoolacaddaynaya oo aad u faraxsan ayay isa soo raaceen waxayna u dabbaaldegeen sida laysugu oggolaaday oo laysugu farxay in ay is guursadaan.

Markii ay kala tageen ayaa qof kasta farax awgeed u gami' waayay..qof kastana waxaa waaga ugu baryay isagoo faraxaas ku dhex jira.

Saxarla waxaa waaga ugu baryay xusuustii Saxardiid iyadoo xusuusaneysay hadalladii naxariista lahayd oo uu Saxardiid markasta ku oran jiray..haseyeeshee Saxardiid waxaa waaga ugu baryay in uu warqad u qoro Saxarla wuxuuna ku bilaabay: noloshaydiiyay,naftaydiiyay,naxariistaydiiyay, nimcadaydiiyay................

Iga guddoon salaan saafi ah oo ay kaaga timid samada kuuna soo marayso saxansaxo dhexdeeda..salaan dabadeed..

Saacaddu waa saqdii dhexe sanqarna aan lahayn suuraddaadina waxay ii saaran tahay sariirta aan ku seexdo..

Waxaan dareemayaa noloshaydiiyay qof duni cusub ku nool oo nolol deggan ku dhex jiro adiguna i dhinac jiifa.

Macaantaydiiyay..waan ogahay waana la wada ogsoon yahay in Eebbe weyne uu niyaddaada ka sifeeyay:been,faan,faduul,islaweyni,isku dir,luggooyo,nacayb, xan iyo xumaan.

Waan aaminsanahay dadkuna waa u muuqda in aan isu nahay mataano daacad isku ah .. isku qalbi furan iskuna kalsoon.

Waxaan xaqiiqsanahay oo ay dhabtu tahay in Allah weyne uu kuugu deeqay:anshax iyo asluub,bini'aadamnimo iyo bashaashnimo,degganaan iyo darajayn,daacadnimo iyo deeqsinimo,dulqaadasho iyo daryeelid,farax iyo fayoobaan,hagarbixid iyo hufnaan,ilbaxnimo iyo ixtiraamid,kalsoonaan iyo kaalmayn,nabad iyo naxariis,run iyo raaxo,soo dhoweyn iyo sacabo furan,tixgelin iyo taakulayn,xishood iyo xurmayn.

Sifooyinkaa wanaagsan uu Ilaahay ku siiyay waa mid aan laguu quuri karin lagaana qaadi karin..aniguna waxaan kuugu ducaynayaa in uu Allah kuugu sii wado kaana qabto wixii mardabo kuugu wada aniguna igu wada jacaylkeenina jilaafo la jecel.

Naftaydiiyay..maanta waxaan u dabbaaldegaynaa farxaddii guusheena waxay maanta ii ahayd maalin xusuus weyn ii leh oo ay maankaygu ka go'ayn..waxaan weligay sahansanaayay..saadaashayduna ahayd Saadirkana ka baryaayay in uu i siiyo gabar sifooyinkaada leh wuuna i siiyay..waxaana Allah ka baryayaa in uu isku kaaya simo.

Igu salaan inta na jecel oo wadajirkeena ku faraxsan raallina ka ah.

Nabadgelyo.
Mataankaaga
Saxardiid

Maalintii ku xigtay wuxuu Saxardiid gacanta ka saaray Saxarla warqaddii uu u qoray..waxayna Saxarla sugi weyday in ay guriga ku aqriso iyadoo ula carartay xafiiskeeda.

Markii ay wada aqrisay ayay Saxarla ilmaysay waxayna go'aansatay in ay isla goobtaas jawaab ugu celiso mataankeeda Saxardiid waxayna ku tiri:salaan san oo sarreysa ayaan hawada kuu soo marinayaa ee iga guddoon..

Saygaygiiyow Saxardiid..ma garanaayo wax aan ku iraahdo waxaanse ku leeyahay:shalay ayaan ku jeclaaday maantana ku jeclahay berritona ku jeclaan doona haddii Alle idmo..naftayda adigaa ah..noloshayda adigaa ah..Allahna waxaan ugu mahadcelinaya in uu i siiyay nin ii naxariista oo noloshayda la qaybsada.

Waan kuugu salaamaya wixii na jecel oo wadajirkeena raalli ka ah.

Mataankaaga
Saxarla

SU'AASHU WAXAY TAHAY:BARNAAMIJKA SAXARDIID OO KU SALAYSAN IN GUURKU UUSAN KU DHISNAAN KARIN AMA UUSAN YEELAN KARIN QAAB QABYAALADEED AMA WEJI GANACSIYEED,MUXUU KA YEELI DOONA MARKA AY SOO QORSHAYSTAAN REERKA SAXARLA IN UU U DHACO QAAB KA DUWAN QAABKII UU DOONAYAY SAXARDIID ?

# -17aad-

Saxardiid oo labadiisa waalid ay geeriyoodeen ayaa mowduuciisa guurka u bandhigay walaalkiisa oo ka weyn wuxuuna ku yiri:waxaan in muddo ah wada soconay gabar aan meel ka wada shaqayno..waxaana ku heshiinay in aan is guursano..sidaas daraadeed waxaan jeclahay in adiga iyo qaar asxaabta ka mid ah aad ii raacdaan aqalka gabadha aan guursanayo halkaasoo lagu samaynayo xafladda nikaaxa oo aan doonayn in uu ku baxo xoolo badan,faan iyo kibirna ka muuqan dabadeedna aan samayno xaflad yar oo ay ka soo qaybgalaan dad yar oo asxaabta ka tirsan.

Saxardiid walaalkiisa oo qudhiisu aaminsanaa falsafadda noocaasoo kale ah ayuu haddana yiri:Saxardiidow marka hore aad baan ugu faraxsanahay tallaabadaa aad ku dhaqaaqday..marka xiga waxaa ila qumman in adeerkeen aan u sheegno sidii uu ugu farxi lahaa arrintaas isla markaana uu noogu raaco habeenka xafladda nikaaxa.

Saxardiid kama uusan diidin walaalkiisa talodaa uu soo jeediyay waxayna ku heshiiyeen in ay u tagaan adeerkooda una sheegaan barnaamijka guurka ee Saxardiid.

Adeerkii markii loo sheegay arrintaas wuxuu yiri:ma xuma ee gabadhu ma tahay gabar aad ka eegtay wixii bini'aadam laga eego sida:iimaankeeda,diinteeda,akhlaaqdeeda,garashadeeda, dabeecaddeeda,bini'aadamnimadeeda, qabyaalad ka fogaanshaheeda iyo dad la dhaqankeeda?

Saxardiid wuxuu adeerkiisa u sheegay:marka hore gabadhu hal meel baynu ka wada shaqaynaa..marka labaad waa gabar ku sarreysa dhammaan qodobadii aad xustay adeerow..waaliddiinteedana waa dad ku caansan xushmad iyo xurmayn.. bini'aadamnimo iyo bashaashnimo.

Adeerkii baa yiri:weligaaba waad ducaysnayd Saxardiidow iminkana waan kuu duceeyay..haseyeeshee goormaad jeceshahay inuu nikaaxu dhaco aan odayaasha u yeeree?

Saxardiid oo salluugsan odayaasha loo yeerayo isagoo aaminsanaa in ay yeelan karto weji qabiileed ayuu adeerkiisa ku yiri:adeer innaga daa odayaasha maxaa yeelay waxaa laga yaabaa in ay keenaan wax aan loo joogin ama ay ka hadlaan wax aan ii cuntamaynin.

Saxardiid walaalkiisa ayaa ku daray oo yiri:adeer..Saxardiid wuxuu u jeedaa qoyskeena oo keliya in aan ku tagno Saxarlaba qoyskooda oo keliya baa imaanayee.

Adeerkii wuxuu ka fursan waayay in uu ku raaco taloda carruurtiisa markaasuu yiri:soo qorshaysta iina soo sheega waqtiga aad ku dhaqaaqaysaan cilmi iyo caqli Allah wuu idin siiyayee.

Saxardiid baa isla goobtii ku yiri:adeer..aniga iyo Saxarla waxaan ku heshiinay in bisha Juun 13keeda..7da fiidnimo uu dhaco xafladda nikaaxa hadduu Allah idmo halkan ayaana idinku imaanaya isagoo ila socdo qaaligii wax nikaaxi lahaa.

Adeerkii wuxuu Saxardiid ku yiri:Ilaah waxaan idinka baryayaa in uu guurkiina ka dhigo mid farxad leh.

Saxardiid wuxuu wargeliyay dhammaan walaalihiisa iyo waaliddiintiisa aad bayna ugu farxeen.

Saxarla waxay iyaduna wargelisay oo ay u sheegtay waaliddiinteeda iyo walaalaheeda..haseyeeshee waxaa dood ku furay labadii hablood ee Cubtan iyo Cawrala waxayna ku yiraahdeen:ninkaagu qolodiisu waa qoloma?..markaasay Saxarla ku tiri:intii aan wada soconay aniga iyo Saxardiid..weligiisa ima weydiin qolodayda,aniguna ma'aan

weydiin..hablihii intay qosleen bay ku yiraahdeen:sidee baadan u weydiin?..ma waxaad doonaysaa in aad la aqalgasho qof aadan garanayn qolodiisa?

Saxarla oo sii geesinimo leh ugu jawaabaysa hablahaas ayay ku tiri:Saxardiid si fiican baan u garanaya..waa wiil Soomaali ah oo casabiyad ka saafi ah..waa wiil bashaash ah bini'aadamnimaduna yaqaano..waa wiil qabiilka ka faana qaranimaduna ku faano..waa wiil aqoon leh akhlaaqdiisuna ay sarreyso..waa wiil garasho leh dadnimaduna garanayo..waa wiil iimaan leh diintana lagu soo ababiyay..waa wiil i jecel aniguna aan jeclahay jacaylkaasina wuxuu i baray in aan ku dhaqmo mabda'a bini'aadamnimada.

Walaalayaal..in aan jacayl ku guursado oo aan dowqayga wax ku doorto iyo in aan aqalka fadhiyo aqoon la'aana la tiiraanyoodo,qof aan aqoonina qoorta lay geliyo waxba uma dhexeeyaan,haddii aad ila rabtaan qodobka hore waa wax aan qaadanayo,haddii aad u janjeertiina qodobka labaad waa mid idinka idin khuseeya.

Waxaan idin leeyahay:wiil naxariis badan Allah wuu igu deeqayee wax aan macquul ahayn oo aan maskaxdu gelaynin ha ii sheegina.

Hablihii waxaa maankooda geli waayay waxa ay Saxarla ka hadlayso wuxuuna la noqday wax ku cusub oo aysan horay u maqal..iyagoo ka baqay in aysan jawaab u helaynin haddii la weydiiyo:Saxarla wiilka guursaday waa qolodee?

Labadii hablood ee Cubtan iyo Cawrala waxay Saxarla ku yiraahdeen:waxaanu doonayna in aan samayno xaflad ballaaran ee sidee baad wax u rabtaa?

Saxarla waxay u sheegtay hablahaasi in aysan doonayn xaflad ballaaran oo faan wax lagu bixinayo..xaflad u muuqata in dad ladan oo keliya loo yeerayo..xaflad xoolo badan lagu bixinayo.

Cubtan iyo Cawrala inkastoo aysan ku qanacsanayn waxa ay Saxarla sheegayso haddana waxay dantu ku khasabtay in ay raacaan taloda Saxarla iyo sida ay wax u doonayso.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:XAFLADDA NIKAAXA IYO AROOSKUBA MA WAXAY U DHICI DOONAAN SIDA AY SAXARDIID IYO SAXARLA SOO QORSHAYSTEEN,MISE WAX KA DUWAN BAA LA SAMAYN DOONA?

# -18aad-

Saxardiid iyo Saxarla waxay ka wada sheekaysteen waxyaabihii ay kala soo kulmeen labadooda reerood markii ay u bandhigeen barnaamijkooda guureed waxayna meel isla dhigeen in jacaylkooda uu wax walba ka weyn yahay dhegna aysan u dhigaynin wax kasta wixii ka hor yimaada qorshahooda guureed.

Habeenkii nikaaxa wuxuu marka hore Saxardiid aaday guriga adeerkiisa isagoo la socda saaxiibkiisa iyo qaaligii wax nikaaxi lahaa.

Markii ay gurigii galeen ayaa halkaasi diyaar ku ahaa Saxardiid adeerkiisa iyo walaalkiisa..waxaa kaloo meesha fadhiyay oday adeerkiisa ahaa oo aabbihiina saaxiib la ahaa iyo seeddigiisa iyo nin ay adeerkiisa saaxiib ahaayeen oo la yiraahdo Sumal.

Sumal wuxuu Saxardiid ku yiri:marka hore,Allah hakuu barakeeyo..marka labaad,waxaan Saxardiidow ku weydiiyay:caawa maxaynu u soconaa?ma doonasho,mise meher?..miyaad ku heshiiseen adiga iyo gabadha meherkeeda?.. lacagta loo geynaayana adeerkeed ee loo yaqaano gabbaatiga waa intee?

Saxardiid oo quursanaya su'aalahaas qalafsanaantooda iyo sida uu Sumal aan waxba ula socon ayuu ku yiri:adeer marka hore waqtigu waa innagu ciriiri maxaa yeelay aqalka gabadhu waa in aan joognaa toddobada..marka labaad iyadoo kooban waxaan jeclahay adeerow in aan kuu sheego:caawa waxaa laysku mehrinaya labo qofood oo is jecel oo dunidan iska doortay..wax walba waxa ay gabadhu dalbatana diyaar baan u ahay.

Adeerow sheekadu ma'ahan gabar lay doonayo oo ma'ahi qof indho la' dheguhuna ay ka xiran yihiin..ikhtiyaar iyo doorashana aan

lahayn..aniga ayaa dowqayga ku doortay iyaduna i doorataay..midda kale:xoolo badan geyn maayo goobtaas..waa kuwee:gabadhu ma'ahan badeecad aan iibsanayo lacagta aan geynaayana oo loo qeybinayo dadka ka soo qaybgala xafladda waa mid caadi ah oo farax lagu muujinayo diintana ay raalli ka tahay..waa labee:waxaa fadhiga ka reeban xusid qabyaaladeed iyo wax u muuqan kara..sidoo kale ayay Saxarlana u soo wargelisay qoyskooda.

Waxa isku imaanayo adeerow waa waaliddiintayda iyo waaliddiinta Saxarla waxa is guursanaayana ma'ahan labo qabiil ee waa Saxardiid iyo Saxarla waqtiguna wuu ina soo hayaa ee ina keena..ballan aan ku tagnee.

Odaygii Sumal ahaa intuu dhakafaaray ayuu yiri:Walle waa wax aanan soo arag soona maqal baan u horseedayna ee waxaan ka baqaya in gabadha reerkooda ay wax kale la yimaadaan arrintan uma boginee.

Intii la wada is taagay ayaa Saxardiid yiri:waxba haka baqin..dad isku daacad ah baa is doortay..dadkii ka didana waa dantood..dadkii nagu daydana waa dadnimadood..aniga iyo Saxarla wax cusub ma'aan bilaabin ee waxaanu daminaynaa dab la shiday dawna la mooday waxaan qabyaalad ku salaysnayn in aysan soconayn xalna ahayn..waxaanu jidka u jeexaynaa jiilka naga danbeeya in ay nagu daydaan oo ay isku guursadaan jacayl..waxaanu tuseynaa in dirqi guur ku yimid iyo dooq guur ku dhacay aysan isku daw ahayn.

Saxardiid iyo akhyaartii la socotay markii ay cagta dhigeen aqalkii Saxarla ayaa si fiican loogu soo dhoweeyay..markii la wada fariistayna oo uu qof kasta magaciisa sheegay sidii laysku barto ayaa hadalkii furay Saxardiid adeerkiisa wuxuuna yiri: salaan kaddib waxaan maanta si aad ah ugu faraxsanahay in aan goob joog ka ahaado meherka Saxardiid iyo Saxarla idinkuna aad nala qaybsataan faraxaas waadna mahadsantihiin.

Saxarla adeerkeed baa hadalkii qaatay wuxuuna yiri:waxaan aad ugu faraxsanahay in inanteena Saxarla iyo inankiina Saxardiid ay dunidan iska doorteen annaguna raalli baan ka nahay..in aad iska kaaya bartaana uma baahni maxaa yeelay Saxardiid aabbihiis waa nin la garanaayo oo macruuf ah taariikhna ku leh bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda.

Waxaa kaloo meesha ka hadlay Saxardiid adeerkiisa oo ahaa saaxiibka aabbihiis wuxuuna yiri:waad ku mahadsantihiin sida aad noo soo dhoweyseen una aqbasheen codsigeena..waana mid lagu farxo maanta in la arko labo isu raalli ah waaliddiintooduna ay raalli ka yihiin in ay is raacaan oo ay aqal yeeshaan.

Markaa kaddib wuxuu qaaligii dalbay in Saxarla la soo weydiiyo meherkeeda haseyeeshe Saxarla oo garan la' wax ay ku jawaabto ayay tiri:waxba kama doonayo Saxardiid..markaas baa lagu yiri:waa in aad wax sheegtaa? markaasay tiri:kitaabka Qur'aanka kariimka ah in uu i baro ayaan ka doonaya in uu igu deeqo Saxardiid waa nin xaqa ku taaganee.

Odaygii Sumal ahaa baa arrintaa la amakaagay..markaasuu niyadda ka yiri:wixii aan filaayayba may noqon waxaanba is lahaa adduun bay gabadhu ku xujayn doonta..Walle halkaasi waxaa ku cad in labadaasi waa Saxarla iyo Saxardiidee ay aad isu jecel yihiin wax walibana ay ku soo heshiiyeen.

Markii la soo gabaggabeeyay meherkii ayaa si fiican laysu gacan qaaday laysuguna farxay waxaana dabadeed aqalka Saxardiid lagu sameeyay xaflad waxaana ka soo qaybgalay labada reerood iyo saaxiibbada Saxardiid iyo Saxarla.

Markii ay xafladdii dhammaatay dadkiina ay rawaxeen ayaa isu soo haray Saxardiid iyo Saxarla waxaana waaga ugu baryay sidii ay u sheekaysanayeen iyagoo soo xusuusanayay waayo waayo iyo sidii ay ugu guulaysteen wadajirkooda iyo jacaylkooda.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SAXARDIID IYO SAXARLA..MA LOO DAYN DOONAA FARAXOODA IYO WAAYAHOODA,MISE FARAGGELIN AYAA LAGU SAMAYN DOONA? DAANDAANSIGU MA DIBEDDUU KA IMAAN DOONAA,MISE DAD U DHOW LABADA MATAANOOBAY BUU KA IMAAN DOONA?

# -19aad-

Muddadii ay Saxardiid iyo Saxarla ku jireen Toddobaadka arooska..duni deggan oo nasasho lehna ay dhex dabaalanayeen ayaa Cubtan iyo Cawrala ka bixi waayeen aqalkii Saxardiid iyo Saxarla iyagoo ku marmarsoonayay in ay soo booqanayaan Saxarla.

Saxardiid iyo Saxarla labaduba may jeclaysan booqashada joogtada ah ee Cubtan iyo Cawrala waxayna go'aansadeen in ay hablahaasi u sheegaan in imaanshahoodu uu xaddidnaado ballana ay ku yimaadaan.

Saxarla markii ay wargelisay Cubtan iyo Cawrala arrintii ay ku heshiiyeen iyada iyo Saxardiid ayaa hablihii iyagoo ka faa'idaysanaya arrintaas u rogay mid iyaga lagu xumaynayo waxayna goosteen in aysan aadin guriga Saxarla.

Saxardiid iyo Saxarla waxay ku faraxsanaayeen in ay inta badan keligood isla joogaan oo ay isla haasaawaan isla markaana ay noqdaan sidii labo qofood oo saaxiib ah oo isku ruux ah oo kale.

Cubtan iyo Cawrala waxay fursad u heleen in ay Saxarla ku diraan hooyadeed iyagoo ka dhaadhiciyay in Saxardiid uusan cidna rabin Saxarlana ay diidday in gurigeeda loogu tago.

Muddo markii ay wada jireen Saxardiid iyo Saxarla ayaa u dhashay wiilkii ugu horreeyay waxayna u bixiyeen Bile.

Cubtan iyo Cawrala waxay ka fursan waayeen in ay ugu hanbalyeeyaan Saxarla inkastoo ay ka gaabsadeen in ay gacan siiyaan Saxarla.

Saxarla aabbeheed ayaa fasax dalkii ku yimid waxaana durba lagu salaamay inankii guursaday Saxarla nooma yimaado hooyana sooma booqdo iyagoo hablahaasi u jeeday in Saxarla ay joojiyaan meel cidle ah.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay maqleen in Saxarla aabbeheed yimid durba way u carareen iyagoo wiilkooda yaraana dhabta u saaran.

Aabbihii wuxuu aad ugu farxay markuu dhabta saaray cunuggii ay dhaleen Saxardiid iyo Saxarla..markaasuu yiri:waxaan aad ugu faraxsanahay in aan maanta noqday awoowe..waxaan Bile u rajeynaya in uu noqdo kii barbaara Boqorkana ka badbaadiya belaayoda.

Saxardiid wuxuu waalidkii ku martiqaaday gurigiisa wuxuuna u sooray si heer sare ah..wuxuu tusay sida uu gurigiisa u deggan yahay arooska Saxarlana ugu faraxsan yahay.

Aabbihii markii uu gurigiisa ku laabtay ayuu gabdhihii ku yiri:Saxarla waxay heshay wiil aqoon leh oo aad u deggan dadnimaduna yaqaano aad buuna ugu faraxsan yahay gurigiisa si fiicana wuu u dhaqaya reerkiisa isagoo waliba hawl badan.

Sidaas daraadeed yaan lagu khasbin imaanshaha gurigan..hadduu waqti helana wuu idin imaanaya hadduusan lahayna idin imaan mayo.

Qoyska dhisan oo barnaamijkiisa ku socda si deggan wuxuu inta badan la kulma jilaafooyin isagoo aan lala rabin in uu noqdo mid urursan oo farax iyo rayrayn ku noolaada.

Haseyeeshee haddii labada is qabta ay si dhab ah isu jecel yihiin kalsoonina ay isu qabaan waxaa wanaagsan in aysan dheg u dhigin hadallada dibedda kaga imaanayo oo lagu waxyeelayo jacaylkooda iyo wadajirkooda..wixii wanaagsana ay ka qaataan wixii fidno ku salaysana ay dhegaha ka xirtaan.

Saxardiid iyo Saxarla oo jacaylkoodii ka hor tagay wax walba wixii mardabo la maagganaa ayuu si saani ah ugu sii socday..faraxooduna maalinba maalinta ka sii danbaysay ayuu sii kordhayay waxaana fursad loo waayay in arrimahooda gaarka ah la soo faraggeliyo inkastoo ay qaar ku daaleen kala fidnayn iyo kala furid labadaa mataanoobay ee Saxardiid iyo noloshiisa Saxarla.

Kaddib markii ay ka quusteen dadkii ku hareersanaa labada hal ruux isku noqday in ay qas iyo qalalaanso ka dhex dhaliyaan ayaa waxa ay dantu ku khasabtay in ay faraha ka qaadaan labadaas mataanoobay arrimahooda.

Wada noolaashihii Saxardiid iyo Saxarla oo si caadi ah u socda ayaa dalkii Soomaaliya ka dhacay dagaal sokeeye..dagaalkaasoo saamayn weyn ku yeeshay dadkii iyo dalkiiba.

Dagaalkaas sokeeye wuxuu kala geeyay dad badan oo dalka gudihiisa isku qabay,kuwo kalena dalka dibeddiisa ayay u duuleen dabadeedna ku kala durkeen oo ay kala dariiq noqdeen

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SIDEE BUU DAGAALKAASI U SAAMEEYAY JACAYLKA SAXARDIID IYO SAXARLA?..MA DALKA AYAY KU SII HARI DOONAAN,MISE DIBEDDA AYAY UGA DUULI DOONAAN?MA WADA SOCON DOONAAN,MISE WAY KALA SOCON DOONAAN?

# -20aad-

Dagaalkii sokeeye markuu ka dhacay Soomaaliya macluul ba'ana ay ku habsatay dalkii oo dhan ayaa Saxardiid iyo Saxarla iyo cunuggoodii Bile waxay Allah ka baryeen in uu ka badbaadiyo belaayoda bilaabatay iyagoo muujiyay samir iyo iimaan .

Markuu dagaalkii istaagi waayay ayaa Saxardiid iyo Saxarla waxay go'aansadeen in ay dalka ka haajiraan iyagoo cunuggoodii yaraana dhabta saartay waxayna markii ugu horreysay abbaareen dalka deriska la ah Soomaaliya ee Itoobiya.

Saxardiid iyo Saxarla iyo cunuggooda Bile waxay Xamar ka soo raaceen gaari weyn waxayna waddada ku soo jireen muddo lix casho ah iyagoo silic iyo saxariirba kala soo kulmay waddada,haseyeeshee Ilaah baa mahad lehee iyagoo bad qaba ayay soo gaareen magaalada Addis ababa caasimadda dalka Itoobiya

Saxardiid iyo Saxarla iyo cunuggooda Bile iyo intii la socotayba waxaa lagu soo dhoweeyay dalka Itoobiya iyagoo aan la weydiin wax visa ah..maxaa yeelay waxaa loo arkaayay in ay ka yimaadeen dal burburay oo aan dawladi ka jirin.

Saxardiid iyo Saxarla iyo cunuggooda Bile waxaa u suuraggeli weyday in ay sii joogaan dalka Itoobiya ilaa ay Soomaaliya ka degayso waxayna goosteen in ay abbaaraan dalka Masar iyagoo taageero dhaqaale ay ka heleen Saxardiid walaalihiisa oo dibedda uga horreeyeen kana shaqaysanayeen.

Saxardiid iyo Saxarla waxay u doorteen dalka Masar..waa kowee:waa dal taariikh weyn ku leh Soomaaliya..waa labee:waa dal Islaam ah.

Saxardiid iyo Saxarla intii ay Masar joogeen waxaa ugu dhalatay gabar ay ugu magac dareen Barwaaqo,haseyeeshee waxaa ku adkaatay joogitaanka Masar..waa kowee:Soomaaliya oo aan nabadi ka muuqan..waa labee:iyagoo ka baqay in ay istaagto kaalmada dhaqaale ee ay ka helayeen walaalaha Saxardiid.

Si kastaba arrini ha noqotee Saxardiid iyo Saxarla iyo labadooda cunug waxay goosteen in ay u haajiraan Yurub kaddib markii ay ka quusteen in dalkii Soomaaliya uu degi waayay dagaalkii sokeeyana uu halkiisa ka sii socday.

Saxardiid iyo reerkiisa oo aan Soomaaliya ugu laaban karin dagaalkaas awgeed Masarna ay sii joogi karin dhaqaale darteed ayaa Saxardiid weydiistay walaalihiisa lacag dheeraad ah si ay ugu suuraggasho u haajiridda Yurub.

Ma'ahan arrin sahlan in Yurub loo haajiro..waa kowee:mukhalaska dadka kaxeeya ayaa lacagtii la baxsan kara..waa labee:khadkii loo mari lahaa Yurub baa qarxi kara..waa saddexee:qoyskii Saxardiid baa kala go'i kara oo kala meel ku wada noolaan kara.

Saxardiid iyo qoyskiisa waxay heleen lacag aysan ku dhoofi karin Saxardiid iyo Saxarla iyo labadooda cunug.

Saxardiid markuu arrinta dhan kasta ka eegay ayuu is yiri:haddii aad keligaa dhoofto Saxarla iyo carruurta waxay u baahnaan doonaan gargaar..haddii aad Saxarla iyo labada carruur isku dartana waxaa dhici karta in khadkii uu qarxo dabadeedna ay waqti qaadanayso in mar kale ay isu yimaadaan qoyska isku mataanoobay.

Saxardiid wuxuu kaloo ka baqay in haddii ay ku guulaystaan Saxarla iyo labada cunug safarkooda Yurub ay waqti qaadanayso isku keenidda qoyska hal ruux isku noqday ama ay Saxarla qaaddo dunida

cusub..markaana ay tiraahdo sida ay hablo badanba raggooda ku yiraahdeen:duni cusub baanu nimidee Saxardiidow..laba mid dooro:in aad si degdeg ah noogu timaado iyo in aad na kala kaxayso oo aynu kala dariiq marno.

Arrintu si kastaba ha ahaatee wuxuu Saxardiid go'aansaday in uu marka hore diro Saxarla iyo labada cunug talona uu Eebbe saarto ducona ugu daro.

Saxarla iyo labadeeda carruur waxaa Allah u fududeeyay in ay galaan dalka Holland oo ka tirsan Yurubta galbeed..waxaana durba loo oggolaaday oo la siiyay sharci ay ku joogi karaan dalkaasi.

Saxarla iyo labadeeda Ubax markii ay cagaha dhigeen dalka Holland ayaa Saxarla durba teleefon u dirtay saygeeda Saxardiid waxayna ku tiri:macaane Saxardiidow..Ilaah baa mahad u sugnaatay oo nabad noogu keenay dalkan Holland isagoo noo aqbalay ducodeena.

Xabiibkaygiiyow..waan kuu xiisnay,had iyo jeerna waan ku xusuusanaa..waan ku jecel nahay waana ku jeclaan doonaa inta ay nafta noogu jirto haddii Alle Idmo.

Soo dadaal xabiibkaygiiyow sidii aad dhaqsi noogu imaan lahayd..noolaan kari meyno la'aantaa..gami' kari meyno la'aaantaa..cuni kari meyno la'aantaa..cabbi kari meyno la'aantaa..raaxaysan kari meyno la'aantaa..noloshu dhadhan noo yeelan mayso la'aantaa.

waxaan kuu rajeynayna liibaan iyo ladnaan in aad ku waarto,bash bash iyo barwaaqana in aad ku noolaato.

SU'AASHU WAXAY TAHAY: JACAYLKII SAXARDIID IYO SAXARLA MA HALKAAS BUU KU DHAMMAAN DOONA OO SAXARLANA LA QABSAN DOONTA DUNIDAA CUSUB EE YURUB SIDII AY HABLO BADANBA SAMEEYEEN,MISE SAXARDIID BAA LA QABSAN DOONA GABAR CUSUB?

# -21aad-

Saxardiid iyo Saxarla markii ay muddo is dhaafsanayeen teleefono iyo sawiro ayaa Saxardiid ku adkaatay sidii uu Yurub u aadi lahaa.

Saxarla waxaa lagu furay buuq cusub waxaana lagu yiri:qof Masar jooga kuuma soo jeedee Saxarlaayey iska samir ama qof wehel kuu noqdo raadso hana is wareerinin Yurub baad joogtaaye.

Saxarla iyadoo ay soo xusuusaneysa hadalladii uu ku oran jiray saygeeda Saxardiid ayaysan dheg u dhigin waxa ay dadka qaarkii ku hadlayeen waxayna aaminsanayd in Saxardiid uu u imaanayo maalin maalmaha ka mid ah.

Saxardiid oo ka warqabay in aan faraha laga qaadaynin Saxarla ayuu laballaabay xiriirkii uu la xiriiri jiray marwadiisa Saxarla si aysan marna uga fikirin in Saxardiid uu ka danaysanayo ama uu cid kale la qabsanayo ama aysan u dareemin in qalbiga Saxardiid uu cid kale soo gelayo ama lala qaybsanayo jacaylkeeda muddada dheer soo jiray.

Saxardiid wuxuu Saxarla u qoray warqad uu ugu sheegayo in uu har iyo habeenba xusuusto..wuxuuna warqaddiisa ku bilaabay:
Noloshaydiiyay..hooyadii labada Ubaxey iga hoo salaan macaan oo ay ku dheehan tahay:jacayl iyo hilow..salaan wacan oo ay xanbaarsan tahay xiiso iyo xusuus..ka helid iyo kalgacayl..salaan kaaga imaaneyso qalbi furan iyo niyad saafi ah.

Ka guddoon salaan..Saxardiid dunida kaa doortay..say subax walba ku leh:subax wanaagsan saqda dhexana ku leh seexasho san..salaantaa kaddib:

Indhahaygu waxay markasta u ilmaynayaan xusuustii jacaylkeena,faraxii nolosheena iyo Ubadkii uu Allah na siiyay.

Macaantaydiiyay..waxaanan marna illaawi karin sidii wanaagsanayd oo aad noo dhawri jirtay nooguna naxariisan jirtay isla markaana aad noo xannaanayn jirtay dhammaantayada.

Xabiibtaydiiyay..waan ku jecel nahay waana ku jeclaan doonaa inta ay nafta noogu jirto hadduu Allah idmo..waan ku xusuusan doonaa inta aan dunidan joogno..waxaana Allah kaaga baryayaa carruurtana uga baryayaa in aad weligiin jirtaan.

Xabiibtaydiiyay..waxaan aad ugu farxay markaan arkay sawiradii quruxda badnaa ee aad ii soo dirtay waxaana aad ugu bogay sida aad ugu dadaashay labada Ubax iyagoo ka muuqda qurux iyo caafimaad..waxaana kuugu adkaynaya in aad naxariistaada ku badiso labada Ubax kuuguna lifaaqnaadaan had iyo jeer sidii aysan u dareemin maqnaanshahayga.

Macaantaydiiyay..dadka ka digtoonow wixii dan kuu wado soo dhoweey wixii diradiraale ahina ka durug..danta guud iyo dariiqa toosana daw ka dhigo.. dabeecaddaadii dahabiga ahaydna dadka kula dhaqan.

Hooyadii daacadda ahaydey..waxaan kuugu dardaarmaya in aadan marnaba daynin diintii iyo dadnimadii laguugu ogaa..in aadan ka daalin dulqaadkii iyo dad la dhaqankii wanaagsanaa ee aad ku caansanayd..waxaan kuugu dardaarmaya in aad dadka kala ogaato qof ku dulminayo iyo mid ku daryeelayo labaduba waa kuu diyaar..qof ku danaynayo iyo mid ku dayacayo labaduba waad la kulmaysaa.

Noloshaydiiyay..ha noqon kuwa is dhigay oo aan waqtigu ka faa'idaysan waayay..ha noqon kuwa daadka qaaday oo markay duni cusub arkeen diintii iyo dalkiiba si fudud ku illoobay..ha noqon kuwa saygoodii ka seexday samirkiina ka suulay.

Waxaan kuugu ogahay barashada afka Hollandeeska ah si aad bulshada la nooshahay u barato..waxaan kuugu ogahay in aad gacanta ku dhigto labada Ubax uu Ilaahay na siiyay..waxaan kuugu ogahay in labada Ubax aad ku hagto barbaarinta toosan ee Islaamka.

Waxaan kuugu dardaarmaya in aadan cidna rumaysan haddii ay kuu soo tebiyaan war xaggayga ah oo laguugu marin habaabinayo..sida aan aniguba u rumaysnayn war xaggaaga ah oo laguugu waxyeelayo..wixii aad ii sheegto ayaan rumaystaa maskaxdayduna ku tallaala..adiguna sidaas oo kale waa in aad rumaysataa wax kasta wixii aan kuu soo tebiyo.

Waxaa xaqiiqo ah in haddii aan ku dhaqano falsafaddaas ay keenayso in jacaylkeena uu sii kobcayo kalsoonideenina ay sii weynaanayso.

Waxaan rajeynayaa in jacaylkeenu uu noqdo kii guulaysta dadkuna ay ku daydaan kuna ducaystaan:Allahayow..jacaylkeena ka yeel sida jacaylkii Saxardiid iyo Saxarla oo kale..waxaan Allah ka baryayaa in uu hal meel isugu kaaya keeno afarteena,caafimaadna na wada siiyo.

Salaan iyo dhunkasho iga gaarsii labada Ubax ee Bile iyo Barwaaqo.

Nabadgelyo

Mataankaaga ku jecel

Saxardiid

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SAXARLA MA SAAMAYN DOONTAA WARQADDAA AY KA HESHAY SAYGEEDA SAXARDIID, MISE AFKA AYAY KA XIRAN DOONTA?

# -22aad-

Saxarla markii ay akhrisay warqaddii uu u soo diray xabiibkeeda Saxardiid ayay ilmaysay..markaasay tiri:Allahayow..ii wanaaji oo ii dhawr mataankayga.. Allahayow..ii soo dedeji oo samo iigu keen..Allahayow..Saxardiid waa inoo garab iyo gaashaanee ha naga qaadin.

Saxarla waxay bilawday sidii qof aan miyir qabin oo kale in ay qof kasta u calaacasho oo ay garab weydiisato sidii loogu keeni lahaa mataankeeda Saxardiid oo ka maqan.

Saxarla waxay dadkii kala kulantay oo ay kaalmada weydiisatay:qaar ka naxa oo talo iyo tusaalaba siiya iyo qaar ku jeesjeesa oo ku yiraahda:dantaada ka raaco qof kaa maqan oo dal kale jooga lama tirsadee.

Dadkii dhanka xun u arkaayay waxay la dhakafaareen jacaylka Saxarla iyo sida ay daacadda ugu tahay Saxardiid..waxayna u arkayeen in Saxarla ay tahay qof jahawareersan oo aan danteeda ogeyn.

Labadii hablood ee ku soo koray guriga Saxarla ayaa iyaguna fursad u helay in ay u haajiraan dalka Germany oo ka tirsan Yurubta galbeed waxayna ku midaysnaayeen fikradda ah in Saxarla aysan isku shuqlin Saxardiid iyo arrimahiisa marba haddii ay Yurub joogto.

Cawrala iyo Cubtan waxay rumaysnaayeen in marba haddii ay Saxarla joogto Yurub ay illoobi doonto Saxardiid..dunida cusub ee Yurubna ay la qabsan doonto.

Saxarla waxay kalsooni siisay Cawrala iyo Cubtan si ay garab uga hesho waxaase nasiib xumo ahayd in Cawrala iyo Cubtanba ay si kale

u rogaan naxariistii iyo kalsoonidii la siiyay waxayna Saxarla u arkeen in ay tahay qof wareersan oo aan caadi ahayn,halkii ay ku oran lahaayeen ama ay ugu ducayn lahaayeen in uu samo Allah ugu keeno saygeeda Saxardiid.

Arrintu si kastaba ha ahaatee waxay hablahaasi fureen dacaayad weyn oo ay ku dhaawacayeen jacaylka Saxarla iyo Saxardiid iyagoo ujeeddadoodu ahayd in Saxarla ay faraha ka qaaddo Saxardiid talo iyo tusaalana ay ka qaadato Cubtan iyo Cawrala.

Hablahaasi oo ay la noolaayeen labadooda oday waxay isku dayeen in ay kala geeyaan Saxardiid iyo Saxarla..waxay damceen in ay gacanta ku dhigaan Saxarla oo ay u maamulaan sidii ay iyagu doonaan..waxayna dantooda ahayd in Saxarla aysan la xiriirin Saxardiid wax taakulayn ahna u geysan.

Saxarla oo wax kasta ugu weynaa saygeeda Saxardiid ayaysan u dhega raacin wax kasta wixii ka soo horjeeday Saxardiid waxayna goosatay in ay faraha ka qaaddo Cawrala iyo Cubtan iyo wixii la fikrad ahba.

Saxarla waxay Saxardiid u dirtay lacag uu ku soo dhoofo kaddib markii ay u halgantay ururinteeda Saxardiidna wuxuu bilaabay sidii uu ugu imaan lahaa marwadiisa Saxarla.

Saxardiid oo keligiisa hal guri ka degganaa dalkii Masar ee uu joogay si uu buuqa dadka uga fogaado ayuu haddana ahaa qof saaxiibo badan.

Saxardiid waxay is barteen gabar Soomaaliyeed oo degganayd dalka Masar si uu uga kaalmeeyo dhibaato ka qabsatay xagga nolosheeda..haseyeeshee muddo gaaban kaddib waxay gabadhii ka heshay Saxardiid waxayna ka dalbatay guur..Saxardiidna wuxuu u sheegay in uu xaas leeyahay ayna ku maqan yihiin Yurub.

Gabadhii iyadoo aan ka quusan kuna qancin waxa uu Saxardiid u sheegay ayay ku tiri:waxaan kuugu doonaya marwada aad qabto iyo Carruurta aad leedahay..Saxardiidow ama halkan ila noolow ama aan Yurub kuu raaco oo aan halkaasi ku wada noolaano dhammaantayada..haddii aad iga tagto waxaan dareemaya cidla..waxaana jeclahay in aad wehel ii noqotid.

Saxardiid wuxuu aad ula yaabay waxa ay gabadhu ka hadlayso iyo sida ay u hadlayso isagoo waliba u sheegay barnaamijkiisa iyo in aysan suuraggal ahayn in uu Masar kula noolaado ama ay Yurub isku raacaan.

Saxardiid wuxuu go'aansaday in uu runta u sheego kuna yiraahdo:qalbigaygu meel buu ku xiran yahay..qalbiguna labo ruux ma wada qaado sida loo yiri:shimbiri hal mar labo geed ma wada gurato.

Muddo kaddib waxaa gabadhii soo foodsaartay arrin murugo leh oo waxay isa soo khilaafeen iyada iyo habaryarteed oo ay la noolayd waxayna u timid Saxardiid iyadoo ka codsaneysa in uu magangeliyo.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN SAXARDIID UU GABADHAASI CUSUB LA QABSADO OO UU MAGANGELIYO,SAXARLANA UU HALKEEDA KU ILLOOBO?..GABADHUSE MA DHAB BAY KA TAHAY IN AY DOONAYSO OO AY JECESHAHAY SAXARDIID, MISE DAN GAAR AH BAY WADATAA ?

# -23aad-

Saxardiid isagoo ka baqaayay in gabadhii uu Masar ku bartay ay ku abuurto jahawareer ayuu runta u sheegay wuxuuna ku yiri:anigu wixii aan awoodo waan kuu qabsan karaa oo ku salaysan bini'aadamnimo..wixii intaa ka baxsana kuuma awoodo kuna raalli noqo.

Saxardiid iyo Saxarla inkastoo ay labo sano kala maqnaayeen haddana maalin walba ayay isla xiriiri jireen iyagoo ku wada xiriiri jiray teleefono iyo waraaqo waxayna dhegaha ka xirteen dadka qaarkii oo marba ku oranaayay warar aan sal iyo raad midna lahayn..mar ay Saxarla ku yiraahdaan:Saxardiid kuma rabo kuumana soo socdo ee iska illow iyo mar ay Saxardiid ku yiraahdaan: naag Yurub aadday ka tasho Saxardiidow.

Saxarla waxay xoogga saartay sidii ay u fulin lahayd dardaarankii saygeeda Saxardiid oo ahaa:in aysan noqon kuwa is dhigay oo aan waqtigu ka faa'idaysan waxayna ku dadaashay barashda afka Hollandeeska sidii ay u baran lahayd dabeecadda bulshada ay la nooshahay.

Saxarla waxay gacanta ku dhigtay oo barbaarin toosan ku hagtay labadeeda Ubax..waxayna dhegaha ka xiratay sheeko kasta oo adduun iyo aakhiro lagu seegayo,saygeedina lagu dirayo.

Saxarla iyo labadeeda Ubax waxaa si weyn u soo dhoweeyay dadkii deriska la ahaa aadna uga helay dabeecad wanaaggeeda.

Inkastoo ay dhib badnayd in Saxardiid uu soo aado mataankiisa haddana waxaa Allah u fududeeyay in uu yimaado dal u dhow halkii ay ku sugnayd noloshiisa Saxarla iyo labadooda Ubax.

Saxardiid waxaa u suuroobi weyday iskuday dabadeed in uu galo Holland si uu ugu tago ruuxiisa Saxarla..wuxuuna garan waayay meel uu aado iyo meel uu u hooydo.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SAXARDIID MA CIDLADAAS BUU JOOGI DOONA SAXARLANA KA SAMRI DOONTA,MISE LABO SANNADOOD OO KALE AYAY KU QAADAN DOONTA ISKU IMAANSHAHOODA?..MA DURBAANKII AY GARAACAYEEN CUBTAN IYO CAWRALA BAA SAAMAYN DOONTA,MISE DHEGAHA AYAY KA XIRAN DOONTA?

# -24aad-

Saxardiid oo garan la' meel uu aado ayaa hadalkii ugu danbeeyay ee uu Saxarla ku yiraahdo waxay ahayd isagoo kula hadlayay teleefon:inta ay nafta igu jirto ayaan ku leeyahay waan ku jeclahay..hadduusan Ilaahay idmin in aynu kulano waxaan kuugu dardaarmaya:cabsida Eebbe iyo daryeelka labada Ubax..ma garanayo meel aan u socdo iyo waxa aan ku sugnaan doono Rabbi baase og..waxaan idinku dhaafaya ladnaan iyo liibaan..baraare iyo barwaaqo.

Waxaad ii dhunkataa labada Ubax waxaana idin rajeynayaa in aad caafimaad ku waartaan.......nabadgelyo.

Saxarla iyadoo ilmaynaysa ayay tiri:xabiibkaygiiyow..sidaas ha oran..aniga iyo labada Ubaxba kaama maarmi karno..waxaanse kaa codsanayaa in aad halkaa igu sii sugto oo aadan ka dhaqaaqin annagaa kuugu imaan doonee hadduu Allah idmo.

Saxarla waxay raadisay cid ay guriga uga tagto oo ay ku dhaafto maalmaha ay ka maqan tahay..haseyeeshee cidna maysan arag waxay markaasi go'aansatay in ay isaga dhaqaaqdo Allahna tawakasho.

Saxarla oo aysan baasaboor haysan ayaa gabar saaxiibteeda ah ka soo qaadatay baasaboorkeeda inkastoo saacado yar kaddib gabadhii is rogtay waxayna Saxarla ka dalbatay in ay dib ugu soo celiso baasaboorkeeda kaddib markii lagula soo taliyay arrintaas.

Haseyeeshee waxaa Saxarla afkeeda Allah ka soo yeersiiyay:abbaayo iminka ayaan dhaqaaqaya wax walibana waa ii diyaar ha welwelin Ilaah baan talo saartayee,hana baqin dhib nama gaarayo Ilaah idinkii.

Saxarla waxaa gurigeeda ku soo ururay dadkii Soomaalida ahaa oo deriska la ahaa kaddib markii ay maqleen in Saxarla ay ku safrayso si sharci daro ah iyada iyo labadeeda carruurna ay u aadayaan Saxardiid oo meel cidla ah joogo.

Dadkii isu yimid waxay la amakaageen waxa ay Saxarla ku dhaqaaqayso..qaar baaba yiri:tani tu quman uma ekee yaan la fasaxin.

Qaar kale waxay soo jeediyeen in dad loo diro halka tareenada laga raaco si ay Saxarla uga celiyaan safarkeeda..qaar kalena waxay raadiyeen adeerkeeda si uu u baajiyo safarka Saxarla awoodna u isticmaalo..qaar baa yiri:carruurta ha laga reebo..qaar kalena intay hadli kari waayeen bay yiraahdeen:Leyla aragnayee Qays ayaa ina tusa..qaar kale intay quusteen ayay lacag ururis aadeen.

Saxarla oo ay weyday fursad ay ku hadasho ayay tiri iyadoo ilmaynaysa: walaalayaal waxaan idinka codsanaya in aad faraha iga qaaddaan oo aad i fasaxdaan..labo sannadood ayaan mataankayga u samraayay maanta oo ii soo dhowaadayna..ma anigaa halkan joogi kara?

Waxaan idin leeyahay ii duceeya Rabbina ii barya in uu guul igu siiyo si aan xabiibkayga u soo kaxaysto..lacagna dooni maayo mataankayguna raalli kama aha habka lacagtaas lagu soo ururinayo carruurtana yaan layga reebin.

Gabar dadkii meesha joogay ka mid ahayd baa tiri:Walle haddii aad baxdo soona noqoto adigoo Saxardiidna uu kula socdo waan ku xusi doona..gabar kale ayaa tiri:haddii aad ku guulaysato waxaad igu leedihiin adiga iyo mataankaaga martiqaad heer sare ah.

Oday dadkii meesha joogay ka mid ahaa baa yiri:ruuxii iimaan leh oo xaqa ku taagan Ilaahay wuu garab qabtaa.. waxaan idin leeyahay:gabadhan daacadda ah oo wixii sifooyin wanaagsan ahi sidato hala fasaxo ducona ha loogu daro.

Gabar kale oo saaxiib la ahayd Saxarla baa la boodday labada carruur waxayna tiri:wax kastoo dhaco labada carruur anigaa hayn doona ilaa ay Saxarla ka soo laabato.

Dadkii meesha isugu yimid waxay u kala qaybsameen labo qaybood:qaar waxay ku is taageen in Saxarla aan la fasaxin lagana joojiyo safarkeeda adeerkeedna la raadiyo..qaar kalena waxay yiraahdeen:hala fasaxo lacagta loo ururiyayna ha lagu khasbo carruur-tana ha laga reebo ducona ha loo raaciyo.

Arrintu si kastaba ha noqotee waxay dantu noqotay in taloda danbe la raaco oo la fasaxo Saxarla.

Saxarla iyadoon arag adeerkeeda oo aan la garanayn go'aankiisa wuxuu noqon lahaa..labadii ubaxna laga reebay..lacagtii loo soo ururiyayna lagu khasbay ayay Saxarla u dhooftay halkii uu ku sugnaa saygeeda Saxardiid.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:SAXARLA MA KELIGEED BAY SOO LAABAN DOONTAA,MISE IYADA OO SAXARDIID LA SOCDO BAY SOO NOQON DOONTA?

# -25aad-

Saxarla waxay si nabadgelyo ah ugu tagtay saygeeda Saxardiid oo aad u dhowrayay imaanshaheeda.

Markii ay indhaha isa saareen ayaa Saxarla is-aragtay iyadoo xabadkiisa ku barkan waxayna isu qaadatay in ay riyoonayso oo aysan dhab ka ahayn in ay Saxardiid la joogto.

Saxardiid qudhiisu intuu hadli kari waayay ayuu arkay Saxarla oo ilmaynaysa markaasuu illintii ka tiray dabadeedna ku yiri:hadduu Allah samo igu kaa keenay salaatul shukri baa innagu waajibta.

Saxarla oo weli garan la' wax ay xabiibkeeda ku tiraahdo ayay markii danbe ku tiri:inakeen xabiibkaygiiyow labadii Ubax baa ina sugayee,inkastoo aan jeclaa inay i soo raacaan haddana waxaan ku soo dhaafay gabar saaxiib ah oo aad noo jecel.

Saxardiid oo aan jeclaysan in ay durba laabtaan ayuu ruuxiisa ku yiri:xoogaa aan nasano kaddibna aan ducaysano markaasna aan dhaqaaqno.

Saxarla waxay sidatay baasaboor aysan lahayn saygeeda Saxardiidna waxay u sidday baasaboor uusan lahayn waxayna habeenkii hotel ku seexdeen labadaas baasaboor iyagoo Allah ka badbaadiyay in la garto.

Saxarla iyo Saxardiid waxaa habeenkaas waaga ugu baryay sidii ay u sheekaysanayeen..markuu waaga baryayna waxay Eebbe weydiisteen in uu safarkoodu u fududeeyo labadooda Ubaxna samo ugu geeyo.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay soo marayeen Kontoroolada xadka maysan dareemin wax cabsi ah..ciidankii xudduudda ilaalinaayayna

Ilaah baa ka qabtay oo maysan shakiyin labada Passport ee ay kala siteen Saxardiid iyo Saxarla.

Mataanihii ruuxa waxay si nabadgelyo ah ku galeen dalka Holland markii ay gurigoodii yimaadeena waxay Saxarla durba doontay labadii Ubax dabadeedna waxaa gurigii ku soo qulqulay dadkii deriska ahaa lana socday safarka Saxarla iyagoo sugaayay taariikhda dhici doonto.

Saxardiid wuxuu durba bilaabay in uu martidii u adeego soona dhoweeyo si farxad lehna ugu sheekeeyo waxayna dadkii aad ugu farxeen soo dhoweyntaas qaayaha lahayd..gabar ka mid ahayd gabdhihii soo booqday Saxardiid iyo Saxarla ayaa tiri:
Walle Saxarla gar bay lahayd waxaan u haystay in iyada uun wax jecel isagaaba ka daran nin u adeegayo gurigiisa marwadiisana ku leh:iska fariiso malab aniga ayaa martida u keenaya wax ay cabbaane..Allahayow..ninkaasoo kale i sii..gabar kalaa tiri:Allahayow..aniga iyo ninkayga ka yeel sida jacaylkii Saxardiid iyo Saxarla oo kale.

Inkastoo ay dad badani ku farxeen guusha ay Saxarla gaartay..haddana dad baa ka xumaaday waxayna kuwaasi doonayeen in Saxarla ay ku guuldaraysato safarkeeda Saxardiidna uu cidladaas fadhiyo.

Saxardiid iyo Saxarla waxay marka hore ku dhaqaaqeen in lacagtii loo soo ururiyay ay dib u celiyaan..waa kowee:Saxarla iyadoo aysan raalli ka ahayn baa lagu soo khasbay..waa labee:Saxardiid baan raalli ka ahayn habka iyo hannaanka lacagtaas lagu soo ururiyay..wuxuuna Saxardiid u sheegay ninkii mas'uulka ka ahaa lacag ururinta inuu ku mahadsan yahay hawshaas uu qabtay..marka labaad wuxuu u sheegay in uusan rumaysnayn qaaraan qabiil wax lagu soo ururiyay weji kasta oo ay lahaataba.

Saxardiid wuxuu kaloo odaygii u caddeeyay in mabda' Saxardiid iyo Saxarla uu salka ku hayo in gargaarku uu ku salaysnaado Islaamnimo,bini'aadamnimo iyo Soomaalinimo wixii ka baxsana aysan oggolaanayn.

Guulaha weyn ka sokow ayuu Saxardiid odaygii u sheegay in aan garab ka sugayno dadka aanu isku fikradda nahay bini'aadamnimaduna wadaagno ee kama sugno xallaalna nooma noqoto wax xigto naloogu keenay..ha nala yaabin sidaas baa nalagu soo ababiyay..ha naga caroon sidaas baan dhaqan u leenahay..kuna raalli ahaw adeerow.

Saxardiid iyo Saxarla iyo labadooda Ubax waxay noloshoodu ugu socotay si farxad leh bilawgii imaanshahooda haseyeeshee iyagoo aan bilba gaarin ayay heleen warqad ay soo dirtay Cubtan.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MAXAY ORAN DOONTAA CUBTAN OO AY WARQADDEEDA KU SHEEGI DOONTA?..MA SOO DHOWEYN DOONTAA SAXARDIID,MISE ARRIN KALE AYAY KA HADLI DOONTA?

# -26aad-

Saxardiid iyo Saxarla waxay bilaabeen in ay akhriyaan warqaddii ay soo dirtay Cubtan hayeeshee inta aan la aqrin oo aan warqadda la furin ayaa Saxardiid yiri:waxaan aad ugu faraxsanahay in warqadda Cubtan ay tahay warqaddii ugu horreysay ee aynu helno imaatinkeena kaddib waxaana rajeynayna in wanaaggaas ay Cubtan samaysay annaguna aan si degdeg ah ugu jawaabno.

Saxardiid iyo Saxarla may noqon wixii ay rajeynayeen waxaana warqadda ku qornaa waxyaabahan soo socda:

Waxaad tahay Saxarlaayey qof wax ma garad ah..ma waxaad is moodday in aad haysato adduunyo?..sow ma ogid in aad ku nooshahay nolosha ugu xun adduunka?..sow ma ogid waxa ku qabana in uusan garaad lahayn wuxuu yahayna la ogeyn?

Adduunyada adiga ka hor lama sheegin lamana maqal naag sidaas u jecel ninkeeda arooskeedina aanay ninkeeda ka dalban xoolo badan.

Waxaan kuu sheegaya in aadan ku tashan kuuna baahnayn qof waalid ah ama reerka ka tirsan..adduunka inta aad saaran tahayna kuu baahan mayno waxaadna naga tahay dayro..adeerna wuu ku habaaray..waana la ogyahay in qofka habaaran uusan guul helaynin.

Adduunyadu kama dhicin adiga ka hor naag intay baxday ninkeeda soo wadatay annaguna aadan na soo wargelin oo nala tashan..ma dhalays baan u rajeeyay kan ku qabo ee meel haku geeyo.

Warqaddii markii ay sidaas ku dhammaatay ayaa Saxardiid iyo Saxarla la amakaageen waxayna is weydiiyeen waxa helay gabadhu?..ma soo dhoweyntii laga sugaayay baa sidaas noqotay?..ma faraxii aan ka

filaynay in ay nala qaybsato bay u beddeshay xumaan?..ma waxay ka xumaatay guusha ay Saxarla gaartay,mise arrin kale ayaa jiray?..ma run baa in Saxarla la dayriyay oo uu aabbeheed habaaray,mise way mala'awaalaysaa gabadhu?..ma gef horaa loo geystay,mise talo toosan ayaa laga diiday?

Arrintu si kastaba ha ahaatee mataanaha ruuxa waxay aad uga xumaadeen waxa ay Cubtan ku hadashay oo haba yaraatee aanay muujin wax ixtiraam ah oo wanaag ah oo soo dhoweyn ah.

Saxardiid iyo Saxarla waxay isla garteen in marka hore arrinta loo bandhigo waalidka loona sheego waxa ay Cubtan ku hadashay dabadeedna la qaado tallaabada ku habboon.

Saxardiid iyo Saxarla intaysan warqadda u gudbin waalidka ayay heleen warqad kale oo ay soo dirtay Cawrala waxayna tiri:waxaan kuu sheegaya Saxarlaayey war i soo gaaray layguna yiri u sheega:sida ay u go'aansatay in ay ninkeeda u soo kaxaysatay ayaa adeer iyo dadka oo idilna kaaga xun yihiin lana soo hadli karin.

Wax salaan ah oo naga dhexeeyo aniga iyo adiga iyo kan ku qabo ma jiro..sow kaan ogaa ma'ahan oo Soomaaliya noogu wacdi jiray:shaqo, waxbarasho,qorshe,barnaamij,ballan iyo wax aan loo joogin..ma isagaa nasab ah hadduu nasab yahay talo ayuu na soo weydiin lahaa.

Adeer markuu maqlay hadalba wuu ka soo bixi waayay wuuna ku habaaray .. maxaad sharaf adduunyo ka sugeysaa 80 jir ayaad adduunyo ka doorotay oo aad moodday in uu sharaf iyo maskax leeyahay.

Cawrala markii ay warqaddeeda soo gabaggabeysay ayaa Saxardiid iyo Saxarla u qaadan waayeen waxa ay habluhu ku hadleen markaasay is yiraahdeen:Walle waxa hablahaasi la gaarsiiyay wax yar ma'ahan.

Saxardiid wuxuu Saxarla ku yiri isagoo amakaagsan: macaantaydiiyay..arrintu waa sidee?..ma intaan maqnaay baa wax dhaceen?..Saxarla oo si deggan u hadleysa ayay xabiibkeeda ku tiri:wax kale ma jiraane isku imaanshaheena ayaa la diiddan yahay..waxaysan hablahaasi doonayn xabiibkaygiiyow in aan faraxno oo aan mustaqbal yeelano..waxay hablahaasi doonayeen in aanu weligeen isu imaan adduunkana aan ciil ku joogno.

Saxardiid isagoo si naxariis leh kula hadlaya marwadiisa ayuu ku yiri:maxaynu galabsanay?..maxaa sidan naloogu gelayaa?..ma cid baan wax ka xoognay,mise cid baan wax u dhinnay?..ma dad baan isku dirnay,mise dad baan kala dirnay?..ma cid baan daandaansanay,mise cid baan la dagaalanay?..maxay tahay ciilka ay hablahaasi qabaan?..sidee bay raggoodu ugu fasaxeen in asluubtaas ay dadka wax ugu qoraan,mise lama socdaanba waxay hoosta ka qorayeen?

Saxardiid iyo Saxarla oo ay aad uga xumaadeen labadaasi waraaqadood ayay ku dhaqaaqeen go'aankoodii ahaa in marka hore waalidka la gaarsiiyo si ay arrin u dhaceena loo sheego kaddibna laga dhursugo talodiisa?

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MARKA UU WAALIDKU HELO LABADAASI WARAAQADOOD EE LOO SOO DIRAY SAXARLA..MUXUU KU DHAQAAQI DOONA?..MA RUN BAY NOQON DOONTAA WAXA AY LABADAASI HABLOOD SHEEGEEN OO ORANAYSAY IN SAXARLA AY HABAARAN TAHAY?

# -27aad-

Saxarla iyadoo aad u fikirsan kana naxsan waxa uu waalidku oran doono ayaa Saxardiid ku yiri:ha welwelin noloshaydiiyay hana is xumayn..wuxuu Allah kaa dhigay qof wanaagsan oo anshax iyo asluub leh.

Dadka qaarkii oo ay hablahaasi ka mid yihiin waxaysan arki karin qof daacad ah oo dabeecad fiican leh..waxay ka masayrayaan jacaylka aan isku qabno iyo sida aan daacadda isu nahay..waxaanan laguu oggolayn macaantaydiiyay sifooyinkaa wanaagsan uu Eebbe kuugu deeqay.

Waxaan rajeynaya in waalidku uusan dheg u dhigi doonin waxa ay mala'awaalayaan labadaasi hablood oo masayr daraadii wax u qasaya,aflagaaddana u geysanaya dad aan denbi gelin oo aan waxba galabsan xumaan iyo xasaradna lagu ogeyn.

Saxardiid iyo Saxarla waxay si degdeg ah u heleen jawaab uu soo diray waalidkii Saxarla wuxuuna warqaddiisa ku bilaabay:

Salaan duco iyo muxubo badan xanbaarsan dabadeed..

Waan helay gabadhaydiiyay Saxarla labadii waraaqadood ee ay kuu soo direen Cubtan iyo Cawrala.

Waxaan jeclahay gabadhaydiiyay in aan kuu sugo inuusan shaki ku jirin in uu Allah ku siiyay nin garasho leh oo waaya'arag ah..nin tixgelin iyo talo leh..nin diin leh dadnimaduna yaqaano.

Gabadhaydiiyay waxaad maskaxda gelisaa oo aadan ka guban si wanaagsana ugu qalbi qabowdaa in arrimaha ay ku hadleen Cubtan iyo Cawrala ay yihiin arrimo baadil ah oo aan xaq ku dhisnayn oo gardaro

ah..waana in aad u aragtaa in ay kaa gardaran yihiin oo ay baadil kuugu wadaan aniguna sidaas baan u arkaya.

Cubtan iyo Cawrala haddii ay garan waayeen walaaltinimadii oo ay ku qaddari waayeen waliba adigoo ka weyn oo mudnaan ka leh xaq kuuguma laha in ay ku caayaan oo ay ku canaantaan..waa gardaro cad ah oo aan geed loogu soo ganban weeye aad iyo aad baana uga xumahay canaana waan ka kor geynaya.

Dhinaca kale oo ay leeyihiin waalidkaa baa ku habaaray ama weligaaba waad habaarnayd..anigu weligay kuma habaarin haddana Ilaahay ka rajeyn maayo in uu ila soo gudboon siiyo wax aan kuugu habaaro.

Waxaa cajiib ah meesha ay joogeen oo waalidkaa kuugu habaaray..anigu garan maayo..malaha shaydaan baa dhegta ugu sheegay.

Anigu gabadhaydiiyay habaar aan ku habaaro iska daayee niyaddayda xataa ilaa maalintii aad dhalatay ilaa maanta weli ma'ayan gelin maalin xataa caro aan kaa carooday bal iska daa habaar aan ku habaaree..mana dhicin hadal aan ka caroodo ama ficil aan ka caroodo oo xaggaaga igaga yimid .. Ilaahna kama baryin.

Waxaad tahay oo aad weligaaba ahayd gabar naxariis badan oo af macaan..waana wax uu Ilaahay ku siiyay cid kaa qaadi kartana aysan jirin.

Halka ay ku leeyihiin ninkeedii bay soo kaxaysatay..sharci ahaan xaq baad u leedahay in ninkaaga aad soo kaxaysato si kastaba haku soo kaxaysidee,waana waajib ku saaran oo aad gudatay weeyaan waana kuugu ammaanay Ilaahayna raalli buu kaaga noqday.

Marka guulaysta aad soo guulaysatay waxaa weeye:niyaddaadii suubbanayd ee aad ku dhaqaaqday iyo Ilaahaygii ku abuurtay oo aad aamintay oo garab kuu noqday weeye.

Gabadhaydiiyay..ha is xumayn..niyaddaadii saafiga ahaydna ku soco wixii aad dadka u tari jirtayna u tar..qofna xumaan ha u qaadin.

Waxaan kaloo halkan ka salaamaya oo salaan sharaf leh oo ay duco xanbaarsan tahay u diraya Saxardiid waxaana leeyahay:mahad Ilaah bay u sugnaatay oo hal meel isugu kiin keenay qoyskiina oo si dhab ah isu jecel daacadna isu ah..waxaana Allah idinka baryaya in aad noqotaan qoys isku waara oo nolol barwaaqo leh ku noolaada dadkana u gargaara.

Saxardiid oo iska ogaa kuna kalsoonaa in waxa ay Cubtan iyo Cawrala ku hadleen aysan dhab ahayn ayaa waalidkiina sii qayaxay xaqiiqdu waxa ay tahay..Saxarla qudheedu oo iska ogeyd in Cubtan iyo Cawrala ay masayr daraadii wax u walaaqayay ayay haddana ku faraxday jawaabta uu waalidku soo siiyay.

Labadii hablood waxay sii wadeen daandaansigii ay u geysanayeen Saxardiid iyo Saxarla iyagoo soo qoray waraaqo kale.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MAXAY SAMAYN DOONAAN SAXARDIID IYO SAXARLA?..MA DACWAD KALE BAY U GUDBIN DOONAAN WAALIDKU,MISE WAY ISKA DHICI DOONAAN LABADAASI HABLOOD?

# -28aad-

Saxardiid iyo Saxarla waxay ku heshiiyeen in ay iska canaantaan Cubtan iyo Cawrala una sheegaan sharafta iyo asluubta waxa ay tahay waxayna mid kasta u qoreen warqad u gooni ah waxayna marka hore u direen Cubtan waxayna ku yiraahdeen:

Salaan kaddib:
Ruuxii fal xumaan ah sameeyo lib ma helo adiguna waxaad maskaxdaada ka soo fulisay fal xumaan ah oo aan laga fiirsan.

Annagu kuma aanan talogelin in aan kula soo hadalno oo aan waqti kuugu lumino bacdaama aadan ku taagnayn waddada toosan oo aad ka marin habawsan tahay haddana waxaanu doorbidnay in aanu kuu caqli celino..ku toosino..ku waanino islamarkaana aan kaa soo saarno xerada dulmiga ah ee aad ku sugan tahay..Allaha garab hanagu siiyee.

Boqorka weyn baa mahad leh oo naga dhigay labo isku daacad ah oo isku kalsoon..labo is jecel oo nafta isku huray labo is-aamintay oo xaqa ku taagan.

Waxaad ogaataa Cubtaney in ruuxii been iyo mardabo dhaqan ka dhigta uusan liibaanaynin..nebigeena suubbanaana naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri:calaamadaha lagu garto munaafaqa waa saddex:markuu hadlayo been buu sheegaa..marka uu ballan qaadana wuu ka baxaa..haddii wax lagu aaminana wuu khiyaameeyaa.

Waxaad ogaataa Cubtaney in haddii aad maqasho fikrad kuugu cusub oo aadan horay u maqal kaasaa ah aqoon iyo cilmi..haddii aadan horay u maqal naag si daacad ah u jecel ninkeeda ama nin si daacad ah u jecel naagtiisa kaasaa ah jacaylka dhabta ah.

Aan kuu sheegnee Cubtaney Saxardiid wuxuu leeyahay wadnaha Saxarla sida ay Saxarla u leedahay wadnaha Saxardiid..Saxarla waxay ku sawiran tahay qalbiga Saxardiid sida uu Saxardiid ugu sawiran yahay qalbiga Saxarla.

Adduunyada aad sheegaysana haddii aad wax ka ogaan lahayd ma dhahdeen: Saxarla waxay samaysay wax aan adduunyadu ka dhicin lagana maqal.

Aan kuu sheegnee Cubtaney adduunyadu waxaa laga maqlaa taariikhduna lagu qoraa suugaanyahanaduna caddeeyeen:in jacaylka dhabta ahi uu yahay kan nafsadda laysku huro kuna habaysan falsafadda wax is weydaarsiga oo ah "qaado iyo i sii" Saxarlana taas ayay samaysay tusaalane u noqon doonta kuwa doonaya in ay si daacad ah isu jeclaadaan,nafsadduna isku huraan.

Dadkii magaalada nala degganaa waxay aad ugu farxeen guushii Allah na gaarsiiyay nasiib xumo kuwii noo dhowaana oo aad adiga iyo Cawrala ka mid tihiin waxay la seexan waayeen ciilqab iyo caloolxumo..uurkusiddo iyo uurkutaalo.

Waxaa la yiri Cubtaney:waa la hadlaa looma hadlee hadal murti leh baa haraa loo hadlaa..nebigeena suubbanaana naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri:ruuxii rumeysan Ilaah iyo aakhiro wax wanaagsan ha sheego haddii kale afkiisa ha xirto.

Ruuxii doonayo in uu nala yimaado Cubtaney: Islaamnimo,walaaltinimo, Soomaalinimo iyo bini'aadamnimo gacmo furan baanu ku soo dhoweynayna.. ruuxii aan doonayn in uu nala yimaado arrimahaas annaguna dooni meyno..ruuxii irbad caaraddiis u geesta Saxardiid Saxarlana wuu u geestay waana halruux aan qaybsamayn rumayso ama ha rumaysan.

Saxardiid iyo Saxarla nafsadda ayay isku hureen waxayna ku heshiiyeen in ay nolosha qaybsadaan wayna ku taagan yihiin,taana ku seexo kuna soo toos.. Saxardiid wuxuu ku hadli karaa magaca Saxarla sida ay Saxarla ugu hadli karto magaca Saxardiid.

Cubtaney..meeshii aan idinka filaynay in aad ku faraxdaan guushii aan gaarnay ayaad cunaha is qabateen ciil daraaddii waxaadna noqoteen sidii dad musiibo ku habsatay oo kale waa yaabee:ma waxaad damacsanaydeen oo aad ku faraxi lahaydeen in mataanaha ruuxa ay weligood kala maqnaadaan?..ma waxaad doonayseen in Saxarla iyo Ubaxyadeeda ay Holland ku cidloodaan Saxardiidna uu dal kale ku baaba'o.

Waxaad ogaataa oo aan kuu sheegaynaa Cubtaney in aadan afhayeen u ahayn reerka..taada ka hadal tu kale laguuma dirsan..af jooga looma adeego ayaa la yiraahdaa.

Waxaan rajeynaynaa in qoraalkan gaabani aad ka faa'idaysan doonto waa intaasoo ku waano qaadataayee.

Nabadgelyo
Mataanaha Ruuxa
Saxardiid iyo Saxarla

Saxardiid iyo Saxarla waxay kaloo go'aansadeen in warqaddaa mid la mid ahi ay u diraan Cawrala.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN CUBTAN IYO CAWRALA AY MADAX ADEEGAAN OO AY KA SOO JAWAABAAN WARAAQIHII LOO DIRAY,MISE WAXAY NOQON DOONAAN DAD KA FAA'IDAYSTA WAAYAHA DIBNA ISU SAXA?

# -29aad-

Cubtan iyo Cawrala waxay garan waayeen cir iyo dhul meel ay cag dhigaan waxay u ciirsadeen cid kasta ciddii ay caawinaad ka heli karaan sidii dad xaqooda la duudsaday oo kale waxayna ku sifoobeen Hasha Geela cunta iyadaana cabaadda..waxay illoobeen in marka hore ay daandaansi geesteen..waxaysan maanka gelin in xaqu yahay kii markasta sarreeya..taariikhduna ay xusi doonto kan dadka gardaraysta iyo kan la gardaraysta.

Iyadoo ay sidaas tahay ayay Cubtan iyo Cawralaba qalinkooda ku soo xariiqeen hadallo ay xikmadi ka fog tahay iyagoo ictiqaadsanaa dacwadna ku fura dadkana ku dira dagaalkiina qoraaleedna hoosta ka wada.

Saxardiid iyo Saxarla waxay qorshaysteen oo ay go'aansadeen in ay meel iska mariyaan qof kasta qofkii ku soo xad gudba iskuna daya in jacaylkooda uu waxyeelo u geesto waxayna jawaab kale u kala qoreen Cubtan iyo Cawrala..waxayna ku yiraahdeen:

Walaalayaal..waxaa idin daw ah in aad taloda toosan qaadataan kaasaa lagu liibaani karaaye..waxaa khayr idin ah in aad camal wanaagsan la timaadaan kaasaa adduun iyo aakhiraba lagu aflaxaaye,waxaan idin leenahay waad nagu gefteene na raalli geliya Allahna cafis weydiista si uu idin denbi dhaafo.

Waxaad ogaataan in kuwa gefa ay ugu khayr badan yihiin kuwa ka toobad keena..nebigeena suubbanaana naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri:bini'aadam kasta wuu gefaa kuwa gefana waxaa ugu khayr badan kuwa ka toobad keena.

Qofka muslimka ahi waa kan muslimiintu ay ka nabad gasho carrabkiisa iyo gacantiisa..sida uu sheegay nebigeena naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee.

Waxaad ogaataan in ruuxii fidno ka shaqeeya uusan guulaysanaynin..nebigeena suubbanaana wuxuu sheegay:in fidnadu ay huruddo kii toosiyana ay ku dhacayso lacnada Eebbe..Ilaah waxaan ka baryaynaa in uu naga dhigo kuwii wanaagga iyo khayrka la yimaada.

Mataanaha Ruuxa

Saxardiid iyo Saxarla

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA DHICI KARTAA IN CUBTAN IYO CAWRALA AY JAWAAB KALE SOO BIXIYAAN,MISE WAXAY NOQON DOONAAN KUWO KU QANCA TUSAALOOYINKII SAXARDIID IYO SAXARLA?..MA DAD` KALE AYAA SOO DHEX GELI DOONA,MISE IYAGII BAA GARDARADA KU MINTIDI DOONA?

# -30aad-

Cawrala duqeeda oo la yiraahdo Gurxan ayaa soo dhexgalay arrinta ka dhexaysa ooridiisa iyo labada mataanoobay ee Saxardiid iyo Saxarla,haseyeeshee meeshii laga filayay in uu wax saxo oo uu hagaajiyo ayuu la dab qaaday ooridiisa Cawrala wuxuuna warqad aan laga fiirsan lagana soo baaraandegin u qoray Saxardiid iyo Saxarla isagoo Saxardiid ku yiri hadalladan soo socda:

maxaad isu tihiin marka aad Cawrala wax ka sheegayso aniguna aad iga sheegayso?..maxaa ku dhexgeliyay hablaha is-haysta?..maxaad ku keentay in aad jacaylka adiga iyo naagtaada ka sheekayso?..aniga iyo adiga wax hadal ah oo naga dhexeeyo ma jiro in aad iga gar baxdo mooyee.

Aniga iyo adiga isku qolo ma nihin,bini'aadamnimo,Soomaalinimo iyo wax aan jirin ha noo sheegin,waxaad ku jid bixi lahayd iyo waxaad isku difaaci lahaydba soo diyaarso.

Abaalkaagu waa in laad lagaaga daalo weeyaan,su'aalahaaga iyo hadalkaaga waxay geynaysa qodob iyo dagaal ballan baana ku qaaday in aan hadalladaada kaa gooyo kaana abaalmariyo.

Naagta aad qabto codkeeda kuma hadli kartid mas'uulna kama tihid kamana noqon kartid,wax kasta oo ay samaysana iyadaa xor u ah.

Saxardiid iyo Saxarla waxay kaloo warqad kulul ah oo ay ku dheehan tahay aflagaaddo iyo cagajuglaynba ka heleen Cubtan iyadoo ay warqaddeeda ku soo gabaggabaysay:haddii aad dib danbe warqad ii soo qortaan waxaan idinka qaadaya tallaabo adag.

Saxardiid iyo Saxarla sidaa ugama harin waxayna labo jawaab ah u kala direen Cubtan iyo Cawrala ninkeeda Gurxan waxayna marka hore u direen Cubtan oo ay ku yiraahdeen:salaan dabadeed,Cubtaney waxaad ogaataa in nebigeena Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee laga soo weriyay in kalmadda wanaagsani ay tahay saddaqo..sidaas daraadeed waxaa innagu waajibta in aanu ku dayano suubbanaheena oo aan afkeena ka dhawrno wax kasta oo xumaan ah amase xumaan noo soo jiidi kara.

Waxaanu kaa helnay Cubtaney warqad ay ku dheehan tahay hadallo aan xishood iyo xaqdhawrba lagu arag,hadallo laga xayuubiyay sarriigta iyo soo dhoweynta, hadallo aan macne lahayn murtina aan xanbaarsanayn,annagu waxaanu rajeynaynay in aad ku cibro qaadato hadalladii aan kuu soo dirnay waxaanse garanayn sida aad wax u fahamto ama laguugu fahamsiiyo malaha waxaad doonaysay in aanu u hadalno sida aad u hadashay oo kale markaana loo kala saari waayo kan sharka u horseeda iyo kan khayrka ka taliya.

Waxaad ogaataa maandhey in qalinka sida loo qaato ay fududdahay haseyeeshee ay adag tahay sida wax loogu qoro waxayna u baahan tahay marka wax la qorayo in laga fiirsado waxa la qorayo iyo qofka loo qorayo haddii kale dhibkeeda ayay leedahay waxaana la yiri:hadal aan fiirsi loo oran iyo caano aan fiiqsi loo cabbin labaduba feeraha ayay wax yeelaan.

Cubtaney waxaad maanka gelisaa in Saxardiid iyo Saxarla aysan dhaqan u lahayn daandaansi iyo diraddirayn waxayna had iyo jeer ku fikiraan sidii ay kuu tusi lahaayeen waxa ay danta guud tahay khayrkana uu ku jiro waana wadi doonaa in aan markasta kuu sheegno waxa uu wanaaggu yahay iyo waxa ay xumaantu tahay ilaa marka danbe aad ka noqoto kuwa suubbanaheena Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee uu tilmaamay:ruuxii Ilaah iyo aakhiro rumaysan wax khayr leh ha sheego ama ha aamuso.

Saxardiid iyo Saxarla waxay kaloo warqad u direen Gurxan oo ah Cawrala ninkeeda waxayna ku yiraahdeen:Gurxanow,shaydaan ruuxii ka yeesha weli aanan ahayn Allaha na uuntay wuxuu noqday kii si caddaan ah u khasaaray sida uu Ilaahay yiri.

Allaha waaxidka ahna waxaan ka baryeynaa in uusan naga dhigin kuwa noocaas oo kale ah..shaydaan iyo munaafaqna ruuxii talo ka qaata sharaf uma sugnaato guulna ma gaaro.

Aan ku xusuusinee maandhow in naagtaada Cawrala ay ahayd tii adduun isku qastay isla markaana kuugu tiri:keligey wax ma walaaqi karee kaalay ila walaaq adiguna si ka fiirsasho la'aan ah isla markaana aadan garanayn waxa la walaaqayo ayaad la soo orodday Fandhaal kaddibna la walaaqday.

Waxaan sugaynay Gurxanow in uu xerada nala soo galo qof wax ku fiirinayo maskaxdiisa aqoon iyo waayoaragna leh qabiil iyo qolo qolona ka fog si ay markaasi u timaado xisaabtan garna lagu kala qaato.

Haddii ay maskaxdu shaqayn lahayd Gurxanow xikmadna ay barbar socon lahayd waxaa la weyn lahaa af dad lagu caayo iyo addin dad wax lagu yeelo.

Waxaa is weydiin leh maandhow:yaa wax ka sheegay sharaftaada?..yaase ku xumeeyay?..mise waxaad naga filaysay in aan ku sifowno sidiina oo kale markaana loo kala saari waayo qof macaggagnimo wax ku taliya iyo qof dimoqraadinimo wax ku xaliya.

Waxaan filaynay oo aan rajeynaynay in aad u caqli celiso naagtaada Cawrala xaqana aad tustid kana soo saartid xerada dulmiga ah ee ay ku sugantahay waa haddii aad wax dhaantidee,haddiise aad hesheen qof idiin caqli celiya ma waxaa la yiraahdaa mahadsanid,mise waa la xumeeyaa?..ma la soo dhoweeyaa,mise waa la eryaa?

Taasi waa iga hordhacee maandhow ee aan u soo laabto warqaddii aad ku soo feeraartay oo la moodo in uu soo qoray qof qoraal barad ah weligiina aan ka soo qaybgelin xero laysku dhaafsado dood cilmiyeed iyo aqoon is weydaarsi ama uusan u dheganuglaan odayaashii murtida lahaa.

Walle haddii warqaddaada la tusi lahaa macallinkii wax ku soo baray wuxuu ku oran lahaa:intaasoo sano ayaan ku baraayay anshax iyo asluub,xishood iyo xurmayn,qiimayn iyo qaddarin maantana ma waxaad keentay in aad dadka afkaas kula hadasho waxna ugu qorto uguna micnayso waxa aad doonayso Walle macalin kuuma soo noqon waxna kuma soo barin.

Annagu haddii aynu nahay mataanaha ruuxa waxaanu jawaab waafi ah iyo dersi sharaf lehba siinaynay ooridaada oo dadkii kala dirtay adiguna intii la rabay in aad dariiqa toosan daw uga dhigto ayaad kula safatay dulmigeeda.

Bal eeg Gurxanow,warqaddeenii caadiga ahayd ee aan idiin soo dirnay baad ka carooteen cunahana is qabateen ciil daraadii waxaadna noqoteen sidii dad xaqooda laga duudsaday oo kale,ka hadalba haddii aan ku afxumayn lahayn sidii aad afxumayseen oo kale malaha waxaad la soo bixi lahaydeen torrey dabadeedna waad na gelin lahaydeen,haseyeeshee Ilaah baan ka magan galnay in uu naga qabto wax walba wixii xumaan iyo mardabo nala damacsan.

Maandhow af baan leeyahay looma hadlo waxaadna ogaataa in haddii uu qofku lagu kari waayo in uu si miyir leh,xushmad leh iyo kala danbayn leh dadka ula dhaqmo isla markaana uu xakamayn waayo waxa uu sheegayo wuxuu noqdaa qof iska hadlay oo aan qiime lahayn qawlkiisana wax ka soo qaad lahayn.

Dadka wanaagsan Gurxanow waa lagu ducaystaa barashadooda kuwa shaydaanka wehel ka dhigtana waa laga ducaystaa barashadooda Allaha waaxidka ahna wuxuu yiri:shaydaan ruuxii saaxiib ka yeesha isaguna sidiisa oo kale ayuu noqdaa..Ilaah baana kaaga baryaynaa naagtaadana uga baryaynaa annaguna ka baryaynaa in uusan na marin waddada uu shaydaanka maro.

Waxaan ku leenahay maandhow degdegtaye dib isu qabo hubsiino Hal baa la siistaaye,hablaha aad sheegaysana miyay wada hadleen oo ay talo is dhaafsadeen, mise mid baa la gardaraystay?..kala garo oo kala saar wadahadal iyo isku xad gudub waa kala arrine,dab iyo dhagax layskuma dhuftee kala dhawr maandhow.

Jacaylka Saxarla iyo Saxardiid waxaan idinku wargelinay in aad ka dhadhansataan waxa uu yahay jacayl iyo in aad ogaataan waxa ay Saxarla ku dhaqaaqday in aysan ahayn wax caashiqiinta ku cusub kuwa aan jacaylba dhadhamin mooyee.

Maandhow ku gartaye waxa aad tahay,aniguse ima garanayside aan is kaa baro. Waxaan ahay bini'aadam ku dhasay una dhashay Soomaaliya kuna abtirsada magaca Soomaali,waxaan ahay nin u guntada oo ku faana qaranimoda qabiilkuna ka guntada oo ka faana qorshehiisuna aan ku jirin,waxaan ahay nin aan u kala soocnayn kalana garanayn kaasi waa laan dheer kanina waa laan gaab,kaasi waa reer hebel kanina waa reer hebel,waxaana ku duulaa marwadayduna ku duusha mabda'a suubbanaheena naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee uu sheegay kaasoo ah:dadku waxay u siman yihiin sidii ilkaha saqafta ama shanlada oo kale wax farqi ah oo u dhexeeyana ma jiro carab iyo cajam taqwada Eebbe mooyee, Ilaahay qur'aankiisa kariimka ahna wuxuu ku yiri:Ilaahay agtiisa waxaa idiinku qiime badan kan idinku taqwada badan.

Qabiil iyo qolo qolo adiguu qoorta kuugu xiranee ku quus qaado waxa uu qarankeena ka yeelay innaguna caydh naga dhigay.

Gabyaagii Cabdullaahi Suldaan Timacadde Allah ha u naxariistee wuxuu yiri: Ubadkiinii waad daadiseen waana dubateene...
Dubaaxdiisii waad wada cunteen duhur dharaareede...
Dariiq toosan Soomaaliyay waa lagaa dayaye...
Darajada Ilaahay ninkii doonayaa hela e...
Nin ku dudey distoorkiyo waxyiga diintii ka carowye...
Dugsi ma laha qabyaaladi waxay dumiso mooyaane...

Aabihii fanka Cabdullaahi Qarshe Allah ha u naxariistee wuxuu yiri: Ma qaran baynu ahaanaa,mise qabiil baynu huwanaa?..ma qayrkayn baynu tiigsanaa,mise tallaabaan dib u qaadnaa?

Faynuustii fanka Faadumo Qaasim Hilowle waxay tiri:in aan dibedaha wareegno, in aan dawarsano shisheeyaha,dal laawe in aan ahaano,qaxooti in aan dan moodno ayuu na baday maandhow qabiilka aad sheegayso oo aad aabbe iyo hooyo ka dhigatay haybadna mooddaỳ.

Ogow Gurxanow in nebigeena Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee uu yiri:nagama mid aha nin qaraabakiil ku dagaallamay,nagama mid aha nin qaraabakiil ku dhintay,nagama mid aha nin qaraabakiil ugu yeeray.

Suubbanuhu waxaa kaloo laga soo weriyay:qabyaaladdu waa wax qurmoon ah ee iska daaya oo ka fogaada.

Qabyaalad waxaa adeegsada Gurxanow qof cabsi badan oo ka fog bini'aadamnimada iyo Islaamnimada waxaana qofkaasi loogu soo wacdiyay hadduusan qabiil adeegsan uu qoomamaynayo qof takooranna uu noqonayo.

Ruuxa caynkaas oo kale ah wuxuu rumaystay oo uu maanka gashaday laguna soo anqariyay:in uusan noolaan karin qabiil la'aantiis,in uusan shaqayn karin qabiil la'aantiis,in uusan wax baran karin qabiil la'aantiis,in uusan farxi karin qabiil la'aantiis,in uusan bulsho hal meel isugu keeni karin qabiil la'aantiis,in uusan dawlad dhisi karin qabiil la'aantiis.

Maandhow gob iyo geesi ma waxaad u garanaysaa kan dadka dila oo dagaalka u horseeda,kan dalka dhaca oo dadka u kala eexda,kan dantiisa mooyee aanan dan ka lahayn danta dalka iyo dadka kaleba.

Aan ku baree maandhow gob iyo nasab waxaa ah kan sharaftiisa ilaaliya sharafta dadka kalena dhawra,kan caqligiisa wax ku fiiriya fudayd iyo faduulnimona lagu arag,kan qaska iyo qabka aan aqoon dadkana daacadnimo kula dhaqma,kan diinta iyo dadnimada ku duula dadkana daryeela,kan dadka ku haga dariiqa toosan oo xaqa ah kana weeciya dariiqa aan toosnayn oo baadilka ah,kan dadka ku booriya nabadda iyo khayrka dagaalka iyo sharkana ka fogeeya.

Maandhow gob iyo nasab waxaa ah kan dadkiisa iyo dalkiisaba daacadda u ah danta guudna daneeya,kan asluubta iyo anshaxa ku abtirsada weji furnaana dadka ku soo dhoweeya,kan xaqdhawrka iyo xurmada ku dhaqma sida dadka loo wanaajiyana garanayo,kan dulqaadka iyo dabeecadda fiican leh sida garta loo naqona yaqaano,kan qabiilka iyo qaraabakiilka ka dhiidhiya oo ka faana, qaranimodana ku dhiiran oo ku faano.

Arrintaasi waa naga talo iyo tusaalee maandhow towfiiqda Eebbe hanna waafajiyo....Aamiin,

Mataanaha Ruuxa
Saxardiid iyo Saxarla

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN GURXAN UU KU CIBRO QAATO WARQADDAASI,MISE GURXAN WUXUU ARRINTA KA DHIGI DOONA MINDI MINDI KU TAAG?..MAXAY TAHAY TALLAABADA DANBE EE AY CUBTAN QAADI DOONTO?

# -31aad-

Gurxan oo is leh jawaab uun bixi ayuu warqad kale oo cagajuglayn ah u qoray Saxardiid iyo Saxarla wuxuuna ku yiri:dib danbe ha noo soo qorina warqad..wax talo iyo tusaale ahna nama siin kartaan kuna talogala in beri ka maalin aan ka xaajoon doono.

Gurxan wuxuu intaas raaciyay:waan idin soo socdaaye meesha ka carara ballan ayaana ku qaaday in aan meeshiina idinku imaanayo..marka aad leedihiina mataanaha ruuxa..maxaad ulajeeddaan?..waxaan jirin ha noola imaanina ha noona sheegina.

Waxaan kuu sheegayaa Saxardiidow in naag aysan faa'iido lahayn..waxaana kuugu fiican in aan kuu daayo Cawrala..naagaha ayaad la darajo tahayee..jawaabna hadda kaddib iyadaa ku siin.

Gurxan wuxuu aad uga carooday u yeeridda loogu yeeray maandhow isagoo jeclaa in la yiraahdo oo loogu yeero geesiga,Aarka iyo wixii la mid ah..wuxuuna afkiisa ka sheegtay in uu ilbax yahay oo uu geesi yahay wax kastana uu garanayo.

Gurxan wuxuu kaloo warqaddiisa ku soo qaatay hadalladiisii hore ee uu caanka ku ahaa oo xikmadda ka fogeyd.

Saxardiid iyo Saxarla waxay ka fursan waayeen in ay jawaab u diraan Cawrala iyo Gurxan waxayna ku yiraahdeen:erayga wanaagsani wa saddaqo..sida uu sheegay nebigeena Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee..sidaas daraadeed waxaa sharaf idin ah in aad noqotaan dadka carrabkooda markasta ku xusa waxa wanaagsan.

Waxaanu la yaabbanahay Gurxanow sida aad wax u qaadataan ama aad u maqashaan,mise arrintu waxay tahay iyaguba way hadleenee idinkuna hadla?

Miyaadan ogeyn Gurxanow in qofkii xumaan sameeya iyo qofkii wanaag sameeyaba labaduba la xusi doono oo taariikhda xusi doonto..miyaadan ogeyn in ay wanaagsan tahay in jiilka danbe loo dhaafo wax wanaagsan oo dhaxal u noqda?..waxaan rajeynaynaa in Ubadkeena dhammaantood ay aqrisan doonaan waxa aad qalinka ku duugtay iyo waxa aanu ku sallaynay qoraalkeena si ay u ogaadaan in dunida laga helayo qoraal si xun loo qoro oo bulshada lagu marin habaabiyo iyo qoraal si wanaagsan loo qoro oo talo iyo tusaalaba u noqota bulshada.

Annagu intii awooddeena gaarto waxaanu wadi doonaa in aan xaqa sheegno xaqiiqdana aan taabano ilaa ay ka dhammaato macaggagnimo iyo madax adayg..xaqana aad ku garataan.

Waxaa in lays weydiiyo mudan:macallin markuu ardaygiisa u soo jeediyo xaar xaaro isla markaana uu tuso arrin iyo daw ma guddoonsadaa,mise wuu ku celiyaa?..Walle hadduu yahay arday wanaagsan wuu ka guddoonsadaa wuuna uga mahad celiyaa.

Gabanow..maandhow igu diiddayee murtidan iga dhuux..aan kuu meeriyee:qalin lays kama qaato qoridna laguma degdego..qalinka sida loo qaato oo wax loogu qoro way fududdahay..hayeeshee sida wax loogu qoro way qalleyf tahay haddii aan laga fiirsana waxa la qorayo iyo qofka loo qorayo cawaaqib xumo ayay leedahay..qofka iyo qoraalkiisana waxay noqdaan sidii cunug yar oo loo dhiibay qalin iyo warqad kaddibna la yiri:wax qor dabadeedna ku falaaday.

Gabanow..waxa maskaxda kaa qaaday kumaan oraninee musiibbadu xaggee bay kaa haleeshay?..maxay tahay waxa laablakaca kuugu riday oo kaa caraysiiyay?..waxa fadhiga kaa kiciyay oo degganaanta kuu diiday?..waxa ku ceejiyay oo cunaha kaa qabtay?..ma hadalladii toosinta iyo turxaan bixintaad ka caloolxumaatay,mise ciil horaa jiray?..Gabanow..gabalkaagu yuusan dhicinee barasho horteed ha i nicin.

Waxaa wax lala yaqyaqsado ah sida aad u quursanaysid ama aad u yasaysid naagaha kuna tilmaamaysid in ay yihiin wax aan faa'iido lahayn..maxaa dhacay?..miyaanay ku dhalin oo kula dhalan adiguna aadan dhalin,mise waxaad tahay kuwa naagahooda ku yiraahda:naayaahee iga aamusi carruurta aad dhashay sidii qof aan shaqo ku lahayn oo kale..qadada ma bisayl baa sidii qof baar jooga oo kale..qolka ma gogoshay sidii qof hotel ku sugan oo kale iyo wax la mid ah.

Waxaad ogaataa in haweenaydu ay tahay hooyadeena macaan oo la'aanteedu ay noloshu kharaar noqonayso..waa gabadheena Ubaxda ah..waa walaasheena quruxda badan.

Abwaankii Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) waxaa maskaxdiisa ka soo maaxatay Fannaankii codka macaanaana ee Maxamed Suleymaan Tubeec ku heesay:
Hooyo la'aantaa adduunyadu hubaashii hami kama baxdeeno..iftiin lama heleeno,dadku uma hayaameen dayaxeeda joogo.

Hooyo la'aantaa higgaad lama barteeno..hooyo la'aantaa hadal lama kareeno,ruux aanad habino kolba aanad hees iyo hoobay ku sabino,hawshaada waaya hanaqaadi maayo.

Hooyo taftaadaa dugsi laga helaayo..hooyo dhabtaadaa hurdo lagu gam'aayo..hooyo dushaada nabad lagu helaayo..waxa lagu halmaala hooyo ababintaada,hayin lagu baraaray,gogol lama huraane,dugsi lagu hirtaaye,hiddo lagu arooray..intaad hooyo nooshahay hanbalyo iyo salaan baan hanti kaaga dhigaya,hamrasho iyo xaqdhawr baan dusha kaa hubinaya,hiyiga iyo laabtaan kuugu haynayaayo..ifka hibo ku noolow aakhiro halkii roon.

Caa'isha Ilaahay raalli haka noqdee mar la weydiiyay wuxuu nebi Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee qaban jiray markuu aqalka joogo?..waxay ku jawaabtay:wuxuu ahaa bashar basharka kale la mid ah oo maradiisa tosha Ridiisa soo maala u adeega naftiisa.

Suubbanuhu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee marka uu aqalka joogo wuxuu kaalmayn jiray marwadiisa marka ay salaadda soo gashana wuu weesaqaadan jiray dabadeedna wuxuu aadi jiray Masjidka.

Nin baa u yimid nebi Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee..markaasuu weydiiyay oo uu yiri:rasuulkii Ilaahayow:yaa dadka iigu xaq badan xagga la saaxiibka?..wuxuu Suubbanuhu ugu jawaabay:

Hooyadaa..haddana yaa iigu xiga ayuu ninkii weydiiyay?..wuxuu Suubbanuhu ugu jawaabay:hooyadaa..haddana yaa iigu xiga ayuu ninkii weydiiyay?..markaasuu Suubbanuhu ugu jawaabay:hooyadaa..haddana yaa iigu xiga ayuu ninkii weydiiyay?..wuxuu Suubbanuhu ugu jawaabay:aabbahaa.

Nin asxaabtii ka mid ahaa ayaa nebi Muxammad naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee waxa uu weydiiyay:waa maxay qofkeen xaqa ay ku leedahay ooridiisa?..wuxuu nebigu ku jawaabay:waa in haddii uu wax cuno cunto siiyo, hadduu dhar gatana waa in uu u gadaa marasho.

Axaaddiis fara badan ayaa sheegaysa in haweenku ay mudan yihiin in la sharfo lana ixtiraamo..adiguna Gurxanow waad quursanaysaa..waxaanse rajeynaynaa in aan dib danbe lagaa maqlin in naaguhu ay yihiin wax aan faa'iido lahayn xikmadahaa Suubbanaheena kaddib.

Waxaad tiri Gurxanow:waan idin soo socdaayee meesha ka carara,mataanaha ruuxana waxay ku leeyihiin:ka carari meynee safarkaadi soo dedeji..saddex berri waynu ku hayn wixii ka badana adigaa is debberi..ballana ku imaw balad baynu joognaaye.

Gabanow..ma waxaad la kaftamaysaa nin naagtaadii 80 u go'aamisay adiguna xuur kuu garatay..marka aad leedahay:abaalkaagu waxaa weeye gacan in lagaaga aar goosto..ma waxaad hadalkaasi ku maaweelisaa ooridaada,mise habeenkii ayaad nafsaddaada ku raalli gelisa oo ku marqaanta?

Waxaa ayaandarro ah in maantana aad usha la dhacdo ooridaada adigoo aadan garanayn in dharbaaxintaasi ay si toos ah ugu dhacayso..haddaadan xusuusan waxa aad tiri,aan kuugu soo celino annagaa kayd ka dhiganaye..waxaa kuugu fiican ayaad tiri Gurxanow.."in Cawrala laguu daayo naagaha ayaad la darajo tahaye"..ma waxaa lagaa soo dhaadhiciyay in Cawrala ay kaa hooseyso oo garaad iyo garasho toona aan lahayn..adiguna kuu sugnaatay kasmo iyo kalsooni?

Ma waxaa maskaxdaada ka weynaatay maqalka mataanaha ruuxa?..haddii aadan magaalo ku maqal waad timidee ku baro..ogow oo garo mataanaha ruuxa waxba iskama qarsadaan noloshuna way wadaagaan..haddii aad idinku kala qarsataan sirta noloshuna aadan wadaagin waa nasiib xumo ku haysata.

Eebbe ha naga dhigo kuwa markasta kasbada wanaagga..waxaana idin rajeynaynaa caafimaad iyo in aad caqli wax ku maamushaan.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MA LAGA YAABAA IN GURXAN IYO CAWRALA AY SOO JAWAABAAN,MISE INTAAS BAY KU QANCI DOONAAN SIDII AY CUBTANBA U AAMUSTAY OO AY KU QANACDAY?

# -32aad-

Cubtan markii ay waraaqaha u qori jirtay Saxardiid iyo Saxarla lama aysan socodsiin jirin ninkeeda Warfaa umana arkaynin arrin daw ah in ninka wax walba loo sheego lagalana tashado..sidaas daraadeed nolosheeda inta badan gaar bay u ahayd.

Cubtan markii ay arrintu ku kharaaraatay ayay ciirsi kale u dhaqaaqday.. haseyeeshee dadkii ay u ciirsatay markii ay u kuur galeen arrinta halka ay ka soo alkuntay ayay Cubtan kula taliyeen in ay faraha kala baxdo cudaddaarna bixiso ninkeedina la socodsiiso wax kasta wixii la soo gudboonaada.

Warfaa oo aan la socon waraaqihii ay qori jirtay Cubtan ayuu si lama filaan ah miiska dushiisa ee yaala qolka fadhiga ugu arkay warqaddii ugu danbaysay oo ay Saxardiid iyo Saxarla u soo qoreen Cubtan..intuu aqriyay ayuu meesheeda ku celiyay.

Warfaa waxay la noqotay arrin ka fajacisa waxa uu warqadda ku arkay,wuxuuna aad uga carooday xaaskiisa Cubtan sababta ay ula socodsiin weyday waxa dhexmaray iyada iyo Saxardiid iyo Saxarla.

Cubtan oo ay xilligaasi ka maqnayd guriga ayay soo xusuusatay iyadoo dibedda joogta in warqaddii Saxardiid iyo Saxarla ay u soo direen ku soo illowday oo ay uga timid miiska dushiisa.

Cubtan markii ay guriga dib ugu soo laabatay ayay durba u carartay qolka fadhiga si ay miiska dushiisa uga qaaddo warqaddii ay ku illowday iyadoo is leh:waan nasiib badanahay..Warfaa muusan arag warqadda.

Haseyeeshee Warfaa isagoo aan waqtiba siin Cubtan ayuu ku yiri:waxaan miiska ku arkay warqad ay soo qoreen Saxardiid iyo Saxarla..waxayna ka jawaabayeen warqad aad adigu u dirtay oo aad ku dhaleecaynaysid..marka hore gabar kaa weyn oo waliba adigoo gurigooda ku soo barbaartay in aad wax ka sheegto waa kuugu gaf..marka labaad:maxaad ila socodsiin weyday in aad warqad u dirtay oo aad ku hujuuntay Saxardiid iyo Saxarla?..maxaase keenay in warqadda noocaas oo kale ah aad u qorto?..sow ma'ahayn in aad igala tashato?..miyaanan xaq u lahayn in aan ogaado shar iyo khayr wixii kula soo gudboonaado?..miyaanan ahayn odaygaaga?

Cubtan iyadoo garan la' wax ay ku jawaabto ayay ku tiri ninkeeda Warfaa:waan joojiyay in aan warqad danbe u qoro Saxardiid iyo Saxarla ee innaga daa sheekadaas..haseyeeshee Warfaa oo aan ku qancin hadalkaas ayuu Cubtan ku yiri:warqaddaas aan arkay oo aad miiska ku illowday ma'ahayn arrin sahlan..ama gar baad leedahay waa in lagu raalli geliyaa..ama waad ka gardaran tahay waa in aad raalli gelisaa..labadaas arrimoodna wax u dhexeeyo ma jirto.

Cubtan oo ka daashay dagaalkaas qoraaleed oo ay kula jirtay Saxardiid iyo Saxarla isla markaana aysan doonayn in dib loo xusuusiyo wixii dhacay ayay ninkeeda Warfaa ku tiri:anigaa gardaran waana u cudaddaaraya..adiguna ku raalli noqo la socodsiinta aan kula socodsiin waayay arrintaasi.

Dhinaca kale waxaa muran kharaar ahi dhexmaray Cawrala iyo duqeeda Gurxan..waxayna Cawrala ku tiri Gurxan:innaga jooji waraaqaha aan u dirayno Saxardiid iyo Saxarla kolley kama gar baxaynee.

Haseyeeshee Gurxan oo madax adayg daraaddii wax u maleegaya garna aanay galaynin ayuu Cawrala ku yiri:waan wadayaa kamana harayo..adigaana marka hore i geliyay..oo fidnadaa bilaabay..markaan u adkaysan waayay cabashadaada ayaan kula saftay..iminkana waxaad

i leedahay innaga jooji oo warqad danbe ha qorin..ma waxaad doonaysa in aan fulay noqdo sidaada oo kale?

Waxaan kuu sheegaya in aan u jawaabayo ilaa ay Saxardiid iyo Saxarla ka joojinayaan waraaqahooda.

Cawrala oo si toos ah ugu jawaabaysa odaygeeda Gurxan ayay ku tiri:ujeeddadu ma'ahan in wax uun layska qoro fulaynimaduna ma'ahan in qofkii gartiisa qaato uu gefsan yahay..Gurxanow aan raalli gelino Saxardiid iyo Saxarla..annagaa gardaranee..colaad socotana faa'iido ma laha..mana ahan in aan madax adaygno.

Midda kale..ma'ahan ceeb in aan cudaddaar bixino..waxaanu nahay bini'aadam..waanu gefi karnaa waana toosnaan karnaa..haddii ay arrintu sidaa ku socoto waxaan ka baqayaa in ay dadku nala yaabaan.

Gurxan oo weli qab weyni ka muuqato iyo madax adayg ayuu Cawrala ku yiri:waan u jawaabaya..haddii aysan ku cajab gelin oo aadan doonayn in aad i soo raacdo ina kala daa oo ina kala kaxee.

Cawrala oo ka naxday go'aankaa adag ee uu gaaray Gurxan ayay nafta u baqday waxayna garan weyday in ay Gurxan ku raacdo oo Saxardiid iyo Saxarla loo jawaabo iyo in ay faraha ka qaaddo ninkeeda oo ay ka tashato.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:CAWRALA,MA WAXAY KU RAACI DOONTAA GURXAN IN SAXARDIID IYO SAXARLA LOO QORO JAWAAB,MISE WAY KA DIIDI DOONTA DABADEEDNA KA TASHAN DOONTA?

# -33aad-

Cubtan oo ay u dheganuglaatay odaygeeda Warfaa ayay go'aansatay in ay warqad cudaddaar ahi u qorto Saxardiid iyo Saxarla iyadoo ay uga raalli gelinayso wixii gef ahaa ee ay u geesatay.

Cubtan waxay warqaddeeda ku tiri:salaan dabadeed,waxaan idin kaga cudaddaaraya waxyaabihii aan idin geestay oo gef ahaa..waxaan kaloo kaaga cudaddaaraya Saxarlaayey in aan kaa gaar maray oo aanan ku garab istaagin xilli aad u baahnayd in garab iyo gaashaanba laguu noqdo..xilli aad dagaal ugu jirtay sidii uu kuugu imaan lahaa Saxardiid..xilli aysan mudnayn in aan kuugu daawado halgankaas xaqa ah..xilli aan hiil iyo hooba kula imaan hadal macaana aan ku oran.

Ilaa iminka waxaanan garanayn Saxarlaayey sidii aan u gardaraystay odaygaaga Saxardiid..meeshii laga rabay in aan soo dhoweeyo kuna farxo imaanshihiisa ayaa shaydaan i qaaday shar ayaana la hor tegay Saxardiid.

Waxaan diyaar u ahay in arrintaasi aan xaal ka bixiyo..wax kasta wixii aad igu xukuntaana aan qaadanayo.

Waxaa idin soo salaamaya odaygayga Warfaa..waxaadna salaan naga gaarsiisaan carruurtiina.

Cubtan waxay warqad ka heshay Cawrala waxayna uga hadashay go'aankii adkaa ee uu gaaray Gurxan kaasoo goostay in uu sii wadi doono qoraalladiisa colaadda iyo xumaanta ku salaysnayd.

Cubtan oo aanay doonayn in ay colaaddu sii socoto nabadduna la baal maro ayay warqad u dirtay Gurxan waxayna ku tiri:Gurxanow waxaa i soo gaartay in aad go'aan adag qaadatay oo ku saabsan in aad weli damacsan tahay in aad wax u qoraysid Saxardiid iyo Saxarla.

Waxaan kuu sheegi lahaa Gurxanow:talo waa layska qaataaye waxa ay naagtaada ku talisay oo ay raalli ka tahay ku dhaqaaq..haddii ay nabad salka ku hayso waa sida la doonayo..haddii ay colaad xanbaarsan tahayna lama raaco oo halkeeda ayaa looga tagaa..marka iima muuqato waxa aad taloda Cawrala ku diidayso marba haddii ay salka ku hayso nabad iyo raalli gelin.

Gurxanow..anigu waxaan warqad u qoray Saxardiid iyo Saxarla oo aan kaga raalli gelinayo wixii gef ahaa ee aan u geestay..anigoo waliba raacay talo wanaagsan oo uu i siiyay odaygayga Warfaa..adiguna in aad waddadaas marto oo ay nabaddu noqoto tan had iyo jeer sarreysa.

Gurxan oo ka dhaadhacsanayd in haweenka laga dhaxlayn talo wanaagsan ayuu ku gacan saydhay fikraddii ay soo jeedisay Cubtan wuxuuna ku yiri, warqad gaaban uu u diray:go'aankaasi waa go'aan rageed,hawl adiga kuu taalna ma'ahan ee dantaada ka raaco.

Cubtan oo hadalkaasi ka carootay ayay isla markiiba teleefon kula hadashay Cawrala waxayna ku tiri:waxaan ku oran lahaa Cawralaay:hadduusan Gurxan nabaddu doonayn oo colaad uun diyaar u ah in aad ka tashato boqolaal ka fiicanba waa laga tashtaaye macaggagnimadiisa iyo qabweynidiisa meel ha geyso.

Cawrala waxay duqeeda ku tiri:burbur qoyskeena ku dhaco sabab ha u noqon Gurxanow..Cubtan waxay warqad u qortay Saxardiid iyo Saxarla oo ay ugu cudaddaarayso..aniguna warqaddaas oo kale ayaan u qoraya Saxardiid iyo Saxarla..nabadgelyo ayaan wadaaye ila garo.

Gurxan oo aan u cuntamin taloda naagtiisa iyo taloda Cubtan midna ayuu Cawrala ku yiri:ha noo soo qaadin warka Cubtan..annagu gabadhaasi nama xukunto nagamana ra'yi fiicna..waan wadayaa wixii aan go'aansaday adiguna sidaan horay kuugu sheegayba:ama i soo raac ama nabadgelyo.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay Cubtan ka heleen warqaddii cudaddaarka ahayd waxay durba u qoreen jawaab waxayna ku yiraahdeen:

Waanu kaa guddoonay Cubtaney cudaddaarkii aad noo soo gudbisay..wax xumaan ah oo aan kuu qabnana ma jirto..Ilaahna waxaan ka baryeynaa in uu naga dhigo kuwa markasta u hoggaansama xaqa wanaagguna ka taliya..kuwa markasta jacaylka nolol u noqda dadkana u naxariista..kuwa markasta dadka ku booriya nabadda dagaalkuna ka fogeeya..kuwa markasta dadka ku soo dhoweeya weji furnaan weji macbuusna lagu arag..kuwa markasta khayrka ku orda shartana ka orda shaydaankana la dagaalama.

Waxaad salaan naga gaarsiisaa odaygaaga Warfaa iyo inta nabadda nala jecel oo aan dhibka nala damacsanayn..

Nabadgelyo
Mataanaha Ruuxa
Saxardiid iyo Saxarla

Saxardiid iyo Saxarla waxaa soo gaartay in murugo iyo is-afgaranwaa ay ka dhex dillaacday Cawrala iyo duqeeda Gurxan iyagoo kala gaaray marxalad aad u xun oo guurkooda xasil la'aan ku ridday.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay ka wada tashteen arrintaas naxdinta leh oo ku soo kordhay nolosha Cawrala iyo Gurxan ayay go'aansadeen in ay warqad u qoraan waxayna ku yiraahdeen:

Walaalayaal..waxaa ina soo gaartay in uu idinku soo kordhay walaac iyo walbahaar sababna u ahayd xaqii aan isku sheegaynay iyo xaqiiqdii aan is tuseynay.

Annagu dooni meyno in daraaddeena aad isku dirirtaan oo aad kala diddaan..annagu dooni meyno in uu dagaal socdo denbiguna uu bato..annagu dooni meyno in nabaddu ay daahdo colaadduna ay sii socoto..annagu dooni meyno xumaan iyo xasarad in uu xal noqdo.

Mabda'ayagu wuxuu yahay kuna dhisan yahay in laga dheeraado wixii dhib keenaya..nabad iyo degganaana lagu waaro.

Waxaan ku leenahay Gurxanow haddii ay Cawrala marin toosan kula timid ha murugayn maankeedina ha kala rogin..kibir hadduu wax tarayo Fircoon baa adduunkan u talin lahaa..hanti haddii ay wax tareysana Qaaruun baa adduunkan ku waari lahaa..awood sheegasho haddii lagu faani lahaana Hitler baa adduunkan gacanta ku dhigi lahaa..waxaanu ku leenahay oo aanu rajeynaynaa sida ay Cubtanba xaqa u garatay Cawralana u dareentay adiguna in aad ku dayatid.

Annagu cid aan xumaan u qabno ma jirto..Cubtanaan u qabin..Cawralaan u qabin oo adigaan kuu qabin..xaqa iyo xaqiiqda sheegistooduna cid aan uga baqayno ma jirto haddii ay malyan ruuxood nagu nacaayaana.

Ilaahay waxaan ka baryeynaa in uu denbigeena dhaafo xaqana uusan na seejin..in uu nagu toosiyo waddada toosan nagana weeciyo jidka loo maro:kibirka,faanka,qabweynida iyo wixii rafiiq la ah.

Nabadgelyo
Mataanaha Ruuxa
Saxardiid iyo Saxarla

Cawrala iyadoo weli ka fikirsan go'aankii ay siin lahayd odaygeeda Gurxan isaguna uu ka dhursugayo labadii arrimood ee uu u jeediyay middii ay qaadan lahayd ayay warqad ka heleen Saxardiid iyo Saxarla.

SU'AASHU WAXAY TAHAY:MAXAY NOQON DOONTA TALLAABADA AY KU DHAQAAQI DOONAAN GURXAN IYO CAWRALA KADDIB MARKA AY AQRISTAAN WARQADDII AY U SOO DIREEN SAXARDIID IYO SAXARLA?..MA CUDADDAAR BAY SIIN DOONAAN,MISE JAWAAB AAN WANAAGSANAYN BAY BIXIN DOONAAN?..MA U WADI JIRI DOONAAN JAWAAB CELINTA, MISE WAY KALA JIRI DOONAAN?

# -34aad-

Gurxan waxaa la qummanaatay in uu raaco taloda Cawrala kaddib markii uu ka baqay in colaaddu ay keligiisa ku koobnaato..meel cidlana lagaga dhaqaaqo.

Gurxan waxaa saamayn weyn ku yeelatay warqaddii ugu danbaysay ee ay soo qoreen Saxardiid iyo Saxarla..wuxuuna is weydiiyay:maxaan helaya oo aan ka faa'iidaya in aan Cawrala xumeeyo,Saxardiid iyo Saxarlana xumaantada ku wado.

Gurxan waxaa aad uga dhaadhacday in colaad iyo fidno socoto aysan faa'iido lahayn..wuxuu gartay in nabaddu ay ku jirto in laysku calool fayoobaado..wuxuu fahmay in la raaco waxa ay diinteena Islaamka ahi na fareyso oo sal u ah:in wanaagguna lays faro xumahana layska reebo..wuxuu garwaaqsaday in xishoodka iyo xaqdhawrka uu dhaqan iyo dhalanba u yahay dadka Soomaaliyeed..wuxuu ogaaday in la dhawro tixgelina ay mudan tahay hooyada na dhashay..nala dhalatay oo aanu dhalnay.

Cawrala iyo Gurxan waxay markaa kaddib goosteen in ay warqad cudaddaar ahi u qoraan Saxardiid iyo Saxarla..waxayna warqaddooda ku yiraahdeen:

Salaan kaddib,waxaad ku raalli ahaataan Saxardiid iyo Saxarla haddii aad tihiin wixii gef ahaa oo xaggeena idin kaga yimid waxaana codsaneyna in wixii dhacay oo gef ahaa aad naga cafisaan..noogu salaama carruurtiina waadna mahadsan tihiin.

Saxardiid iyo Saxarla markii ay warqaddaasi ka heleen Gurxan iyo Cawrala waxay ugu jawaabeen:

Waan idinka guddoonay salaantiina iyo cudaddaarkiina mana jiro sidaan horayba idinku sheegnay cid aan xumaan u hayno..sida aan Cubtanba u cafinay ayaan idinkuna idin cafinay..waxaana Ilaah ka baryeynaa in uu na waafajiyo xaqa iyo wax kasta wixii khayrka ku jira nagana weeciyo wax walba wixii xumaanta keeni kara.

Waxaad salaan sharaf leh ka guddoontaan mataanaha ruuxa Saxardiid iyo Saxarla.

Saxardiid iyo Saxarla oo ka soo laabtay kuna soo guulaystay dagaalkii xaqa ahaa ee ay kula jireen Cubtan,Cawrala iyo Gurxan ayaa u bilawday nolol cusub oo farax iyo rayrayn ka muuqato waxayna wadeen sidii ay noloshooda jacaylka ahi u hormarin lahaayeen.

Saxardiid iyo Saxarla waxay tusaale u noqdeen dadkii is qabay oo jacaylka isku guursaday..waxay noqdeen dad meel walba lagu hadal hayo oo la xuso jacaylkooda iyo wadajirkooda..waxay noqdeen dad talo iyo tusaale laga qaato.

Saxardiid iyo Saxarla waxay ku fikireen "kaddib markii ay dib ugu laabteen dalkoodii hooyo dooggii cagaarnaana ay ku dhex mushaax bilaabeen,neecawdii saafiga ahayd ee ͜addii bilicda ahaydna ku hawo qaadanayeen" in ay sameeyaan mashruuc samofal ah oo ay ugu magac dareen:

KU NOOLOW JACAYL .. NABAD IYO CAAFIMAAD AAD KU WAARTIDEE.

Mashruucaas samofalka ahi waxaa lagu dhiiraggelinaayay laguna wacyi gelinaayay labada guur doonka ah in ay is fahmaan oo ay is jeclaadaan iskuna kalsoonaadaan.

Mashruucaas markii shaaca laga qaaday waxaa durba ku soo biiray boqolaal qofood oo diyaar u ahaa in ay qayb ka qaataan hirgelinta mashruucaas.

Muddo gaaban markuu socday mashruucu wuxuu ku guulaystay in uu soo saaro qoraalo iyo buugaag badan oo giddi looga hadlaayay micnaha jacaylka.

Saxardiid markuu 75 jirsaday Saxarlana ay 70 jirsatay ayaa loo dabbaaldegay jacaylkii Saxardiid iyo Saxarla oo 50 jirsaday..waxaana la sameeyay xaflad aad u ballaaran oo ay ka soo qaybgaleen boqolaal ruux..Cubtan iyo Cawrala iyo labadooda odayna ee Warfaa iyo Gurxan way ka soo qaybgaleen.

Saxardiid iyo Saxarla waxaa munaasabadaasi lagu guddoonsiiyay bilad dahab ah oo ku dhigan halkudhegga Mashruuca oo ahayd:

KU NOOLOW JACAYL .. NABAD IYO CAAFIMAAD AAD KU WAARTIDEE.

Munaasabada xafladdaasi waxaa lagu sharfay oo lagu soo dhoweeyay in uu hadal ka jeediyo Saxardiid wuxuuna yiri isagoo ilkacaddaynaya Saxarlana ay dhinaciisa fadhido bilicdii badda Xamarna ay u muuqanaysay hawadii saafiga ahaydna lagu raaxaysanaayay:

jacaylku waa wax macaan ah oo nafta raaxadeeda ah la'aantiisuna aan noloshu dhadhamayn..jacaylku waa sidii Ubaxa oo kale..wuxuu u baahan yahay waraabin,xannaanayn iyo xiisayn joogto ah.

Haddii aan intaasi lagu samayn oo aan jacaylkii la waraabin..la xannaanayn lana xiisayn waxaa khasab noqonaysa in jacaylkaasi uu wax gaarayo.

Labada qofood ee lab iyo dheddig haddii ay si dhab isu jeclaadaan wuxuu jacaylkooda ka hortagaya wax kasta wixii dhibaato ah ee soo foodsaarta.

Labada is qabta ee is jecel waa in ay:is tixgeliyaan daacadna isku noqdaan..waa in ay nafsadda isku huraan iskuna samraan..waa in ay saaxiibaan oo ay isku noqdaan sidii far iyo faraati oo kale.

Dardaarankaygu waa:

jacayl isku dhisa.. jacayl isku soo dhoweeya jacaylna ku waara.

waadna mahadsantihiin.

**-DHAMMAAD-**

# Haddii Alle Idmo

Buuggayga labaad oo aan imminka gacanta ku hayo wuxuu noqon doona:

**"Gobannimadii Soomaaliya iyo Xisbigii S.Y.L."**



Mohamed Hussein
(Maxamedeyn)

Buuggan ..............

Noloshaydiiyay..ka guddoon salaan Saxardiid dunida kaa doortay, say subax walba ku leh:subax wanaagsan,saqda dhexana ku leh seexasho san, salaantaa kaddib:

Macaantaydiiyay..dadka ka digtoonow wixii dan kuu wado soo dhoweey wixii diradiraale ahina ka durug, danta guud iyo dariiqa toosana daw ka dhigo dabeecaddaadii dahabiga ahaydna dadka kula dhaqan.

Hooyadii daacadda ahaydey..waxaan kuugu dardaarmaya in aadan marnaba daynin diintii iyo dadnimadii laguugu ogaa..in aadan ka daalin dulqaadkii iyo dad la dhaqankii wanaagsanaa ee aad ku caansanayd..waxaan kuugu dardaarmaya in aad dadka kala ogaato qof ku dulminayo iyo mid ku daryeelayo labaduba waa kuu diyaar..qof ku danaynayo iyo mid ku dayacayo labaduba waad la kulmaysaa.

Noloshaydiiyay..ha noqon kuwa is dhigay oo aan waqtigu ka faa'idaysan waayay..ha noqon kuwa daadka qaaday oo markay duni cusub arkeen diintii iyo dalkiiba si fudud ku illoobay..ha noqon kuwa saygoodii ka seexday samirkiina ka suulay.

Waxaan kuugu ogahay in aad gacanta ku dhigto labada Ubax uu Ilaahay na siiyay kuna hagto barbaarinta toosan ee Islaamka,waxaan kuugu dardaarmaya in aadan cidna rumaysan haddii ay kuu soo tebiyaan war xaggayga ah oo laguugu marin habaabinayo sida aan aniguba u rumaysnayn war xaggaaga ah oo laguugu waxyeelayo,wixii aad ii sheegto ayaan rumaystaa maskaxdayduna ku tallaala,adiguna sidaas oo kale waa in aad rumaysataa wax kasta wixii aan kuu soo tebiyo.

Waxaan rajeynaya in jacaylkeenu uu noqdo kii guulaysta dadkuna ay ku daydaan kuna ducaystaan:Allahayow..jacaylkeena ka dhig oo ka yeel sida jacaylkii Saxardiid iyo Saxarla oo kale.

Hadal[illegible] waxaa laga aqrisan kara warqad dheer oo uu Saxardiid u diray Saxarla [illegible] Saxardiidna uu markaasi ku sugnaa Afrika.

ISBN 90-805742-1-X